

Waad riyootee runtu waa maxay?

Waad riyootaye runtu waa maxay?



Dr. Sheekh Siciid Maxamed Faarax

Waad riyootee runtu waa maxay?

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

Waad riyootee runtu waa maxay?

Xuquuqda qoraalku way dhawrsan tahay, lama daabacan karo, lamana dhanbalan karo, si kalena looma minguurin karo iyada oo aan oggollaansho qoran laga haysan qoraaga kitaabkan.

Tusmo

MAHADNAQ	11
HIBAYN	13
AFEEF	14
HORDHAC	15
Maxaa igu kallifay qorista kitaabkan?	20
CUTUBKA KOOWAAD	22
Dadkii ugu caansanaa fasiraadda cilmiga riyooyinka	22
Diiwaannadii ugu Caansanaa Fasiraadda riyooyinka	23
Riyooyinka iyo diimaha	23
Dadka iyo ku dhaqanka riyada	23
Riyooyinka iyo Cilmi Nafsiga	24
Kala Duwanaashaha Sida ay ku Abuuranto riyadu	24
CUTUBKA LABAAD	25
Fekerkii Froyed	25
Fikirikii Yong	25
Muxuu aaminsan yahay Yong?	25
Fekerka dibadda kaga imanaya qofka	25
Fekerka fisiyoolajiga ah (cilmi nafsiiga ah)	26
Fekerkii hurda'da jilicsan iyo ta culus	27
CUTUBKA SADDEXAAD	29
Riyada wanaagsan iyo riyada xun	29
Wakhtigee baa ugu wanaagsan riyada habeenkii iyo ta maalinnimo?	29
Noocyada ay u kala baxaan riyooyinku	30

Sharrax kooban riyada wanaagsan	30
Riyada wanaagsani waa laba nooc	31
Sharraxa Riyada qofku naftiisa ugu sheekeeyo	31
Calaamadaha riyada xun	32
Anshaxa riyada wanaagsan.....	32
Maxaa la gudboon qofka riyo wanaagsan arka?	32
Adaabta riyada xun	33
Sharrax kooban Tallabooyinka aynu ka qaadanaynno riyoooyinka xun xun	33
Riyadu waxay u dhacdaa sidii loo fasiro.....	34
Dib-u-dhaca riyada	35
Aadaabta looga bahan yahay qofka muslimkii inta aanu seexan	35
Dembiga qofka beenka sheega riyadiisa	36
Derejooyinka ay leeyihiin dadku xagga riyada	36
Riyada ay tahay in aynu fasirno waa tuma?	37
Riyada marka loo eego dusha iyo gudaha	38
Riyo baqashada leh (night mare).....	39
Inta badan wakhtigeey bay dhacdaa cadhadani?	39
Yay ku dhacdaa?.....	39
CUTUBKA AFRAAD.....	41
Ilaahay riyo ma lagu arki karaa?	41
Waxyaabaha lagu fasiro aragtida Ilaahay.....	41
Nebiga riyo ma lagu arki karaa?	41
Astaamihii Nebiga Cws.....	42

Qofkii ku riyooda Nebiga (Cws)	42
Adaabta fasiraadda riyoooyinka	42
Muhiimadda ay leedahay qofka riyada ku weydiinayaa xaaladdauu ku sugan yahay	43
CUTUBKA SHANAAD.....	47
Ma la arkaa riyada carruurta?.....	47
Ma dhacdaa riyada gaaladu iyo faasiqiintu?	47
CUTUBKA LIXAAD.....	49
Qaacidooyinka Fasiraadda Riyayoooyinka	49
Kala geddisnaanta nolol-maalmeedka iyo arsaaqda	52
2 Qawaacidda fasiraadda riyoooyinka.....	53
Fasiraadda riyada marka dusha laga eegayo	54
Qawaacidda fasiraadda riyoooyinka (3).....	56
Riyadu maxay ka kooban tahay?	56
Ilaha laga eegayo fasiraadda riyada:	56
Fasiraadda la isticmaalyo aayaddaha Quraanka.....	56
Fasiraaddo waxyaabo kala geddisan.....	58
Fasiraadda la isticmaalayo macnaha iyo qiyaasta	59
Fasiraadda Magacyada.....	60
Cakiska iyo Qalibka.....	60
Afarta Qawaaciidoe Fasiraadda Riyada	61
CUTUBKA TODDOBAAD.....	65
Fasiraadda Riyoooyinka Cusub.....	65
Fasiraadda Riyoooyinka Dadka	67

Dadku waa saddex qaybood mid uun	67
Fasiraadda Midabadda	69
CUTUBKA SIDDEEDAAD	82
Riyada Xayawaannada	82
Sharrax kooban oo xayawaanka ah	82
CUTUBKA SAGAALAAD	90
Fasiraadda Riyada Nebiyada	90
Riyada Malaa'igta	92
Riyooyinka Saxaabada	93
Waa kuma saxaabiggu?	93
Abuubakar Siddiiq (Radiyallaahu canhu)	94
Cumar Binu Khaddaab (radiyallaahu canhu)	94
Cusmaan Binu Cafaan (radiyallaahu canhu)	94
Cali Binu Abi Daalib (radiyalaahu canhu)	94
Abu-Cubayda Ibnu Jaraax (radiyallaahu canhu)	94
Dalxa Ibnu Cubaydi Laah (Radiyallaahu canhu)	94
Asubayr Ibnu Al Cawaam (radiyallaahu canhu)	95
Sacad Ibnu Abii Waqaas (radiyallaahu canhu)	95
CUTUBKA TOBNAAD	96
Faa'iidooyinka laga dheehanayo suuratu	96
Faa'iidooyinka cilmiga ah ee laga faa'iidaysanayo suuratu Yuusuf	96
Faa'iidooyinka cilmiga riyada ee laga dheehanayo suuratu	96
Faa'iidooyinka cilmiga ah ee laga faa'iidaysanayo suuratu	97

Faa'iidooyinka cilmiga ah ee laga faa'iidaysanayo suuratu yuusuf, Aayaddeeda 21-22 ^{aad}	97
Faa'iidooyinka cilmiga ah ee laga faa'iidaysanayo suuratu	97
Faa'iidooyinka cilmiga ah ee laga faa'iidaysanayo suuratu	98
Faa'iidooyinka cilmiga ah ee laga faa'iidaysanayo suuratu	98
Faa'iidooyinka cilmiga ah ee laga faa'iidaysanayo suuratu	99
Faa'iidooyinka cilmiga ah ee laga faa'iidaysanayo suuratu	99
Midabka riyada	100
Riyada Jinka iyo Shaydaanka.....	100
Jinka	100
CUTUBKA KOW IYO TOBNAAD	102
Riyada haddii la fasiro sidii loo fadiray ma u dhacdaa?	102
Riyooyinkii nebiga	103
Riyooyinki Saxaabada	104
Fasiraadda riyooyinkii ibnu Siiriin!.....	105
Fasiraadda kowaad ee riyada,	105
Fasiraadda riyada labaad.....	105
Hal-tebinta riyada saddexaad	106
Micnaynta riyada afraad.....	106
Fasiraadda riyada lixaad.....	106
Riyooyinkii uu fadiray qoraagu buuggu.....	107
Qisada kowaad:	107
Qisada saddexaad:	107
Qisada afraad:	108

Qisada shanaad:	108
Qisada toddobaad:	108
Qisada siddeedaad	109
Qisada sagaalaad	109
Qisada tobnaad	109
Qisada kow iyo tobnaad	109
Qisada laba iyo tobnaad	110
Qisada saddex iyo tobnaad	110
Qisada afar iyo tobnaad	110
Qisada Shan iyo tobnaad	110
Qisada toddoba iyo tobnaad	111
Qisada Sideed iyo tobnaad	111
Qisada Sagaal iyo tobnaad	111
Qisada labaatanaad	112
Qisada labaatanaad	112
Qisada kow iyo labaatanaad	112
Qisada laba iyo labaatanaad	112
Qisada saddex iyo labaatanaad	113
Qisada afar iyo labaatanaad	113
Qisada shan iyo labaatanaad	113
Qisada lix iyo labaatanaad	113
Qisada toddoba iyo labaatanaad	114
Qisada sideed iyo labaatanaad	114
Qisada Sagaal iyo labaatanaad	114

CUTUBKA LABA IYO TOBNAAD	115
Dhacdooyinka riyoorkii la soo dhaafay	115
Riyooyinka	116
Qodobo si guud kaaga caawinaya fasiraada riyada.....	121
Faa'iidoyinka iyo midhaha riyada.....	122
Wax yaabaha cilmigga cusub ogaaday.....	124
Ku saabsan qoraaga.....	126
Tixraaca buugga.....	131

MAHADNAQ

Mahad oo dhammi waxay u sugnaatay Allaha wayn ee innagu galaday nimcooyinkiisa faraha badan. Waxa kale oo aan halkan uga mahad naqayaa asxaabtaydii intii hawasha buugani socotay boorinta illa garab taagnayd. Sidoo kale waxaan Mahadnaq aan la soo koobi karin u hayaa Gudoomiyaha Shirkadda Caymiska ee Takaful, Mudane Cumar X. Xuseen “Cumar Xaashi” oo gacan wayn ka gaystay sidii loo soo daabici lahaa buugan. Sidoo kale waxaan u mahad celinayaa Siddiiq Jaamac Ibraahim (Cubayd) oo isna in badan iga gacan siiyay sidii aan u qori lahaa buuggan una soo saari lahaa. Siddiiq oo ahaa qofkii gacantiisa ku garaacay dhiganahan. Sidoo kale iyana waxa aanan ilaawi karin oon mahad aan duugoobin u hayaa, Walaalkay Qoraa Xasan Cabdi Madar, Sheekh Qoraa Maxamed Cabdi Daa’uud iyo Sheekh Cawil Faatax Shire, oo iyaguna in badan wakhti galiyay akhrinta iyo turxaan bixinta buuggan. Waxa aan iyana mahad iga mudan, Sheekh Aadan Maxamuud Xiiray (Aadan-siiro) iyo Sheekh Maxamed Cumar Dirir.

Siciid Maxamuud Gahayr (Hargeysaawi) oo ah Qoraa iyo Hal-abuur ku nool Hargeysa waxa aan ku bogaadinayaa xilkasnimadii iyo doorkii uu ka qaatay tifaftirka buugga. Eebbe ha ka abaal mariyo kaalinta sharfan ee uu ka geystay. Waxa isna abaal mudan Maxamed Saleebaan Axmed (Tixmagabe), oo ka qayb qaatay quraaridda buugga.

Waxaa kale oon isna si wayn ugu mahad naqayaa Abwaan Cali Axmed Raabi (Cali Seenyo) oo ahaa shaqsigii u magac bixiyay Barnaamijkii buuggani ka dhashay. Sidoo kale iyaguna waxaan Mahad balaadhan u hayaa. Mulkiilaha Talafishanka Universal Tv, Eng Axmed Abubakar iyo Agaasimaha Universal Tv, Eng Cabdalla Mad'har oo iyaguna Xil wayn iska saaray sidii loo duubi lahaa Barnaamijkii *Waad Riyootee Runtu waa Maxay?*. Waxa aanan ilaawayn isna oon u ducaynayaa Alle ha u naxariistee, marxuun Axmed Xasan Cawke, oo lahaa codkii ka horreeyay maxaadirooyinkii buuggu ka dhashay.

Waad riyootec nuntu waa maxay?

HIBAYN

Kitaabkan waxa aan u hibaynayaa qof kasta oo samaha iyo sinnaanta jecel. Waxa aan si gaar ah ugu hibaynayaa, hooyaday Caasha Cali Ismaaciil, marwadayda Faysa Xasan Cabdillaahi iyo carruurta.

AFEEF

Soomaalida ayaa hore ugu maahmaahday *Aqalkaaga hortii ood roгаа la dhigtaa, hadalkaaga hortiina afeef baa la dhigtaa*. Maadaama diiwaankani yahay, kii ugu horreeyay ee aan qoro, waxa laga yaabaa in uu yeesho dhaliilo kala duwan. Sidaa darteed waxa aan idinka codsanayaa in wixii qalad ah ee aad kala kulantaan aad ii soo gudbisaan si daabacaaddaha dambe loo saxo. Waxa talo iyo tusaale ahna waxa aad iigu soo hagaajin kartaan ciwaannada xagga dambe ee buugga ku qoran.

HORDHAC

Ugu horrayn Eebbe ayaa mahad leh, oo nimcooyinkiisa aan la koobin innagu galladay, isla kolkaana inoo fududeeyey in buuggani dhammaystirmo. Buuggan oo aynu kaga warrami doonno riyada iyo noocyadeeda, oo aan ku niyad samahay in uu xog waafi ah ku siin doono, isla kolkaana wax badan kaga kordhi doonaan.

Cilmiga fasiraadda riyoooyinka buuggaag badan iyo afaf badan ayaa laga qoray oo lagu qoray, jirto haddana aan afkeenna cidi hore aysan waxba uga qorin inta aan xog ku hayo. Taas ayaana ah sababta ugu weyn ee buuggan “*Waad riyootaye, runtu waa maxay?*” loo qoray.

Sida uu Ilaahay u abuuray soojeedka ayuu hurdadana u abuuray. Arrimo ayuu Ilaahay qofka ku tusaa hurdadiisa, si iyaga oo dhacdooyin ah uu ugu arko soojeedka. Arrinta ugu weynee riyoooyinku ay faa’iidaynayaan ayaa ah in dadka loo sheego waxyaabaha ay uga baahan yihiin nolol-maalmeedkooda, gaar ahaan nebiyada dhimashadooda ka dib, maxaa yeelay waxygii baa is taagay. Sida xadiiskii *Bukhaari iyo Muslim* ay soo weriyeen ee nebigu (N.N.K.H) ku yidhi: “*Haddii wakhti aakhirku*

soo dhawaado qofka muslimka ah riyadiisu maba beenawdo, diinta islaamkuna waa diin xaq ah oo caqiido fiican”

Qofka bini-aadamka ahna uma aragto in uu yahay dhiig, dhoobo iyo cad. Waayo Diinta islaamku waxay u aragtaa qofku in uu yahay mid leh jiidh, caqli iyo ruux, kuwaas oo mid waliba baahi gaar ah uu leeyahay. Ruuxa aan Ilaahay aaminsanayn ruuxdana ma aaminsana. Riyooyinkana waxaa aasaas u ah ruuxda, cilmiga iyo qaybka cilaaqada ka dhaxaysa, diinta islaamkuna aad bay riyooyinka uga hadashay.

Riyada dhabta ahi sida uu nabigu sheegay (N.N.K.H), xadiiskii Caasha ee Bukhaari iyo Muslim ku sugnaayeen. Waa tii Caashi lahayd: *“Markii ugu horraysay nebiga waxyiga ayaa u iman jiray isaga oo riyo ah, sida waaga berigiisa ayuuna u arki jiray riyadaas”*.

Riyadu waa qayb nebinnimada ka mid ah waayo, qaybka in ka mid ah ayaa la ogaanayaa. Sida uu nebiguba (N.N.K.H) ku yidhi xadiiskii Anas ee Bukhaari ku sugnaa: *“Riyada wanaagsan ee qofka wanaagsani arko ama loo arkaa waa qayb ka mid ah afartan iyo lixda qaybood ee Nebinnimada”*. Halka axaadiis kale oo nebiga ka soo aroortay ay

sheegayaan: “*In ay riyadu tahay qayb ka mid ah toddobaatan qaybood oo nebinnimada ah*”. Waana axaadiis sugan.

Sidii uu nebigu yidhi (naxariisi korkiisa ha ahaatee), xadiiskii Ibnu Cabbaas ee Saxiixu-Muslim ku sugnaa; “*Bushaarooyinkii nebinnimada waxaa ka hadhay oo qudha riyada uu addoonka wanaagsani arkayo ama loo arko*”. Culimadu waxa ay yidhaahdeen xadiiskaa micnihiisu waxa weeye: “*Waxyigu dhimashadii nebiga ayuu ku go'ay, waxaa keli ah ee ka hadhay, lagana dhaxlay, lagana ogaan karo, waxaa dhici doona waa riyada*”.

Riyooyinku waa mawduucii qisadii Nebi Yuusuf (naxariis iyo nabad galyo korkiisa ha ahaatee). Cilmiga fasiraadda riyooyinku waa aqoontii Ilaahay ku galladay *Nebi Yuusuf*. *Nebi Ibraahin* isaga oo da' weyni ku dhalay, waa kii ku riyooday isaga oo inankiisii gawracaya; kamana uu baqan ee waa kii gawraca fulintiisa u dhaqaaqay, sidiina inankiisii ugu sheegay: ee isna uu ka aqbalay. Waayo riyada nebiyadu waa waxyi.

Sheekh Sacdi markuu fasirayay suuratu Yuusuf wuxu yidhi: “Cilmiga cabbiraadda riyooyinku waa qayb ka mid ah culuumta sharciga ah, qofkayna tahay in uu barto iyo in uu dadka kaleba baro. Halkaa oo uu ajarna ka helayo, waayo fasiraadda riyooyinku waxa ay soo hoos gelayaa Fatwada, sida uu Ilaahayba ku yidhi qur'aankiisa.

قُضِيَ الْأَمْرُ الَّذِي فِيهِ تَسْتَفْتِيَانِ

Uma bannaana qofka aan garanaynin ee aan aqoon u lahayni in uu isku dayo cilmiga farsiraadda riyooyinka. Waayo cilmigan fasiraadda riyooyinka culimo faro badan ayaa dhex galay oo ay ugu caansanaayeen; *Ibnu khaldun* iyo kitaabkiisii caanka ahaa ee “*Muqaddimah*”. Waxa uu ku yidhi “*Cilmiga fasiraadda riyooyinku waa cilmi culuumta shareecada ka mid ah. Barashadiisuna muhiim tahay, in wax laga qoraana ay ka sii mihiim san tahay*”.

Ibnu Al Qayim Al jawsiyah, waxa uu ku sheegay kitaabkiisii (Saad Al Macaad) cilmiga fasiraadda riyooyinku waa xaq, maxaa yeelay riyadu

waxay xidhiidh la leedahay waxyiga hurdada oo qayb iyana ka ah laamaha nebinnimada.

Shawkaani waxa uu ku sheegay kitaabkiisii (**Fatxi Al-qadiir**) in ay ummaduhu isku raaceen in dadka fasira riyoooyinku, waxyaalaha ay ka warramaan la arko. Isla jeerkaasna tirada culimadii wax fasiri jirtay ayaa ka koobnaayeen (**Toddoba kun iyo shan boqoloo qof**) sida uu sheegayo kitaabka (**Dabaqaat Al-Mucabiriin**) ee uu qoray **Al-Xasan Al-Khalaal**. Ugu dambayntii, buuggani waxa uu si faahfaahsan kuu dhacsiin doonaa, cilmi aan afkeenna hore ugu qornayn, ee ka durduuro oo shifo ku af saar.

Waa maxay riyadu?

Riyada waxaa lagu micneeyaa haddii la qeexayo fasiraado kala geddisan. Balse, Dhiganeheenan waxa aynu ku soo qaadanaaynaa qeexitaan kooban, oo ku saabsan riyada iyo waxa ay tahay.

Riyadu waa silsilado isku xidhiidhsan oo khayaali u badan, kana dhacda huradada dhexdeeda. Halka marmar ay tahay wax aan isku xidhiidhsanayn, run iyo waxyaabo badan oo qayrul macquul ahna laga heli karo.

Waxa uu yidhi Sigmond Forayd "*Riyadu waa waddo qofku baahiyihiisa ku daboolo. Waxyaabaha aanu gaadhi karin ee nolol maalmeedka caadiga ah. Sidii ruux doonaya in uu noqdo maalqabeen, ama doonaya in uu guursado, gabadh aanu dhaqaale u hayn ayaa uu ku riyoonayaa, arrimii oo sidii uu rabay ugu dhacay*".

Sidoo kale ruux shaqaale ah oo uu dhibay maamulkiisii, ayaa ku riyoonaya in uu iska celiyo maamulhiisa. Halka Alforayd Adlar uu yidhi "*Riyadu waa arrin hurdada dhexdeeda dhacda oo qofku kaga hortagayo mustaqbal*". Halka culimo kale, ay aaminsan yihiin in ay riyadu tahay dhacdooyin kala geddisan oo qofku inta uu hurdo u ilaalinaysa in aanu ka toosin hurdada.

Dadkii cilmigaa u ban baxay, waxa ay heleen qoraallo dhagxaan lagu qoray oo taariikh ahaan ka soo jeeda xadaaraddii qadiimka ahayd ee "Soomar". Halka Giriiggu ay leeyihiin riyadu waa hibo Ilaahyadu bixiyaan, oo bini aadamku macluamad cusub ka baranayo.

Maxaa igu kallifay qorista kitaabkan?

Ibnu Xasan, ayaa wuxuu sheegay in qofka wax qorayaa, toddobadan qaybood ee soo socda mid ka mid ah in uu gelayo waxa uu qorayaa:

- Arrin cusub, oo la ikhtiraacayo, sida buug cusub oo aanay cidiga uga horrayn.
- Buug aan dhammaystirayo oo la dhammaystirayo.
- Buug warkiisu badan yahay oo la sharxayo.
- Buug dheer oo la soo koobayo iyada oo micnihii waxba laga beddelin.
- Buug kala tafaraafuqsan oo meel la iskugu wada keenayo.
- Buug aan habaysnayn oo la isku habaynayo.
- Ama buug ninkii qoray uu khalday oo la saxayo.

Ka sheekaynta riyooyinka wakhtigan xaadirka ahi waa mawduuc aad u mihiim ah. Maxaa yeelay xaqii iyo baadilkii ayaa iskaga keen qaldamay. In ka mid ah dadka ayaa waxa ay ku talax tageen fasiraadda riyooyinka, oo halkii diinta islaamku inoo xadaysay dhaafiyey. Kana dhigay in riyadii waajibaad sharciya laga fahmayo. Kuna saabsan cibaadadii, dhimashadii, noloshii, nebinimadii, arsaaqadii iyo qaybkiiba, oo aan illaahay mooyee cid kale garan kirin.

In kale oo dadkaa ka soo horjeeda, ayaa fudaydsaday riyadii, oo ka soo qaaday in ay tahay wax been ah oo aan jirin. Qofka riyoodaana u bahan yahay in dhakhtar nafisiya loo geeyo si looga dabiibo cudurka haya. Markaa waxa igu kallifay buugan in aan qoro, dadkaana dhexdhexaad u noqdo; Markii aan arkay xaalka cilmigani marayo maanta, una cadeeyo in aanay riyadu waxyi ahayn sharci wata, Qosol qosol iyo kuraafaadna ahayn. Laakin ay tahay sidii uu nebigu yidhi, (Naxariis iyo nabad gelyo korkiisa ha ahaatee), In ay riyada qayb ka mid ahi run saalixa tahay. Kana mid tahay 46ka qaybood ee nebinimada qayb ka mid ah.

Waad riyootee runtu waa maxay?

Qayb kalena tahay, sheekada nafta iyo shaydanka oo murugo gelinaya qofka. Waxaa kale oo jira, in ay riyadu xidhiidh la leedahay dadka iyo nolol maalmeedkooda. Iyada oon la kala saarayn oo dadku dhammaan arkayaan, rag iyo dumar, yar iyo wayn, madax iyo miskiin. Qani iyo faqiirba. Dadkaa intooda badani way ka sheekeeyan riyada, wayna is waydiiyaan in ay fasirtaana way ku dadaalaan.

CUTUBKA KOOWAAD

Dadkii ugu caansanaa fasiraadda cilmiga riyoooyinka

Nebiyada: Ibraahin, Yacquub, Yuusuf, Dul-Qarnayn.

Saxaabadii: Abuubakar, Cumar, Cismaan, Cali, Anas Ibnu Maalik, Caa'isha.

Taabiciyiintii: Saciid Ibnu Al Musayib, Xasan Al Basri, Ibraahin Al Nukhaaci,

Al-fuqahaa: Shaafici, Aw Saaci, Ibnu Xambal,

Saahidiintii: Maxamed Ibu Waasici, Maalik Ibnu Dinar,

Mu'allifiintii: Maxamed Ibnu Siiriin, Al Xasan Ibnu Xusayn, Arda Midroos, Alyuunaanii.

Falaasafadii: Aflaadoon, Bat laymuus, Arda Daaliis,

Dhakhtarradii: Jaaliyoos, Ahraan, Maxamed Ibnu Sakariyaa.

Yuhuuddii: Kacab Ibnu Al ashraf, Xuyay Ibnu Akhdab,

Nasaaradii (kiristan): Sayn Aldabarii, Xunanayn Ibu Isxaaq, Abu Makhlad.

Majuus (Dab caabud): Hurmus Ibnu Ardashiir, Anuu Sharwaan, Jaama Sab,

Mushrikiintii Carabta (Gaaladii Carabta): Abu Jahal, Abu Daalib, Abu Caas,

Faaliyayaashii: Sadeex, Abu Suraaraa, Al Qadaamii,

Saaxiriintii: Cabdullaahi ibnu Hilaal, Qardu Ibnu Sayid,

Indheer-garadkii: Saciid Ibnu Sinaan, Muwaaciye Ibnu Kaltuun.

Diiwaannadii ugu Caansanaa Fasiraadda riyoooyinka

- ✚ Tacbiir Al Anaam Fii tacbiir Al Manaam (Qoraa Cabdiqani Al naabusi).
- ✚ Al Tacbiir Al Muniif wata wiil al Shariif (Qoraa Maxamed Ibnu Qudub Al ruumi).
- ✚ Kitaabu Al ishaaraat, fii cilmi cibaaraat (Qore Khaliil Ibnu Shaahin Al Daahiri).

Riyoooyinka iyo diimaha

Dad badan ayaa waxay aaminsan yihiin in ay kala fog yihiin riyoooyinka iyo diimuhu, balse riyoooyin fara badan ayaynu la soconaa in fasirkooda laga helay kitaabada diimaha kala geddisan ee kala ah Tawraad, Injiil iyo Furqaan. Kitaabka Injiilka waxaa laga helay riyadii Yuu-Xanaa, oo ah Nabi Yaxye oo ay habara wadaagna ahaayeen nabi Ciise Calayhi salaam.

Quraanka kariimka ah kolkaad eegto suuratu Yuusuf oo aynu odhan karno waa suuradii riyoooyinka, ayaa waxay cadaynaysaa in quraanku uu xusay toddoba riyo oo lix goobood ku kala sugan. Saddex ka mid ah oo ku jira suuratu Yuusuf. Afarta kalena ay ku kala jiraan; suuratu Anfaal aayaddeeda 43^{naad}, riyaa ku sugan. Suuratu Saafaad aayaddeeda 102^{aad}, hal riyo ayaa ku jirta. Suuratu Fatxi aayaddeeda 27^{aad} hal riyaa ku jirta. Quraanka iyo riyoooyinkii ku jira sidan aynu ku soo sheegnay, waxaa la is waydiiyaa suuratu Israa, ayda 60^{aad}, in nay riyo ku jirto balse wuxuu ibnu Cabaas cadeeyay in aanay riyo ahayn ee xaqiiqo tahay.

Dadka iyo ku dhaqanka riyada

Dadka iyo ku dhaqanka riyadu waxa ay kala taagan yihiin laba aragtiyood. Qolada kowaad waa kuwa ku dhaqma intooda badan riyada ay arkaan, nolol maalmoodkoodana ku qaata. Halka qolada labaadna, ay yihiin kuwa aanaminsanayn dhacda riyadooda. Dadka muslimiinta ah ee hannuunsani waxay aaminsan yihiin in ay riyadu tahay xaq kitaabka iyo sunahaba laga helayo. Cidda keliya ee diida riyada wanaagsani in Ilaahay xagiisa tahay oo ay bishaarana waddo, waa dadka ku dhaqma falsafada iyo Cilmi nafsiga qaybtiisa khaldan.

Riyooyinka iyo Cilmi Nafsiga

Arrintan riyooyinku waxay soo jiidatay dadkii riyoonayey iyo fasirayaasha quruumihii ina soo dhaafay oo idil, soo jiidashadaa waxa ka dhashay fekerro kala geddisan iyo istihaad badan oo ka unkamay kala duwanaashaha fasiraadda riyooyinka, kuna saabsan sida ay u abuuranto riyadu.

Kala Duwanaashaha Sida ay ku Abuuranto riyadu

Waxaa dhacay kala geddisnaan lagu kala afkaar duwan yahay siday ku abuuranto riyadu, qolo kastaaba waxay aaminsan tahay haddii aynu soo qaadanno, waxaynu eegi doonnaa aragtida kowaad iyo Froyed.

CUTUBKA LABAAD

Fekerkaa Froyed

In riyooyinku aanay wax dhici kara ahayn mustaqbalka'e ay tahay wax ka warramaya uun. werwerka kaa haysta nolol maalmeedkaaga caadiga ah, ama waxyaalo aad jeclaysanaysay ama aad necbayd markaad yarayd, oo aad ka ledi wayday.

Froyed fekerkiisu waxa uu yahay, riyada shaqadeedu waxay tahay. inay qofka ka ilaaliso hurdadiisa wixii dibadda kaga imanaya. Riyadu waxay qofka ku caawisaa inuu huradadiisa ugu sii jiro si raaxo leh. Sidoo kale riyadu waxay qofka u abuuraysaa jawi dhalanteed ah (khiyaali) oo u diidaya inuu soo tooso. Froyed wax soo dhaweyna kama helin culumadii ay isku wakhtiga noolaayeen.

Fikirikii Yong

Yong oo ka hadlaya fekerkaa Froyed wuxuu yidhi "*Fekerikii Froyed wax suurtagal ah ma aha*".

Muxuu aaminsan yahay Yong?

Yong wuxuu aaminsanyahay riyooyinka waxa ka masuul ah maskaxda aadamaha qaybteeda danbe. Taasi ayaana keentay in uu xidhiidh la sameeyo qofkani wakhtiyo aanu noolayn oo quruumo hore ah, kana soo min guuriyay quruumahaa noloshoodu siday ahayd.

Fekerka dibadda kaga imanaya qofka

Arrintaa waxaa inoo sharxaya tusaalayaashan soo socda:

Tusaale Hooyo seexatay ayaa saacaddii ku buuxsatay si ay u toosto ubadkeedanau diyaariso quraacdoonii, si ay u tagaan iskuulkii ayaa waxay hooyadii iska jeclaysanaysaa inay iska sii nasato oo hurdada ku sii jirto, iyadoo jawigaa ku jirta ayay saacaddii dhawaaqday, waxayna ku riyoonaysaa hooyadii inay kacday saacaddiina bakhtiisay. Sidoo kale carruurtiina u kicisay quraacdiina una amba bixisay dugsigii. Ka dibna

hurdadeedii ku soo noqotay. Hooyadii markii ay hurdadeedii ka bogatay ee ay indhaha kala furatay ayaa waxay aragtay carruurteedii oo weli aan amba bixin hawshiina wali qabyo u tahay, riyona ay ahayd wixii ay ku jirtay.

Tusaale 2

Haddii qof caadaystay Inuu wax cuno ama uu cabbo inta aanu seexan, ayaa waxaa dhici karta in uu habeen illaawo oo una cabbin ama cunin cuntadii uu cuni jiray. Waxaa laga yabaa in uu qofku ku riyoodo cuntadii isaga oo cunaya ama caanihii cabbaya.

Fekerka fisiyoolajiga ah (cilmi nafsiga ah)

Fekerkani wuxu xambaarsan yahay in riyooyinku ay ka abuurmaan nusqaan fisiyooliji ah oo ay ka mid yihiin: jidh xanuun, daal, wahsi, calool-istaag, calool-xanuun iyo maskaxda oo daasha qofka. Arrimahaas ayaa keena in qofku xasuusto dhacdooyin ku kaydsanaa maskaxdiisa. Cilmi-baadhis la sameeyay ayaa lagu ogaaday in dhaqdhaqaaqa indhuhu ay xidhiidh la leeyihiin riyada iyo intay soconayso. 160 xaaladood oo cilmi-baadhis lagu sameeyay ayaa lagu ogaaday in 130 xaaladood ay iyagu xasuusteen wixii ay ku riyooden. In kale oo ka mid ah dadkaa ayaa 15 daqiiqo ka dib, markii riyadu dhammaatay lagu gartay istaagga dhaqdhaqaaqa indhahooda, dadkaasi markii riyadoodii dhammaatay waxaa suurtagal noqotayin ay xasuustaan dhacdooyinkii ay ku riyooden.

Diinta islaamka ayaa ugu horraysay arrimaha noocan ah, nebigana waxa ka soo arooray (N.N.K.H) xadiiskii Saxiixu-Maslim soo weriyay ee nebigu marka uu tukiyo salaadda subax. Saxaabada inuu su'aali jiray inta uu soo jeedsado "*Qof idinka mid ahi xalay riyo ma ku riyooday?*". Culimadu waxay xadiiskaa ka fahantay in la isweydiin karo riyada, la iskuna fasiro karo inta maskaxdu weli deggan tahay ee anay weli wax mashquul ah la kulmin subaxa hore. Laba bare sare oo ka hawl gala jaamacadda Shikaago ee carriga Maraykanka lana kala yidhaahdo "**Kalaytmaan iyo Dement** ayaa waxay iyaguna sheegeen in riyooyinku

ku kala geddisan yihiin dhanka dhererka, oo ay socon karto riyadu muddo lagu qiyaasay hal saac. Fekerkan ayaa ah mid ka soo horjeeda fekerikii hore u jiri'jiray ee culimada nafsigu ay odhan jireen “*Riyada wakhtigeedu aad buu u gaban yahay 3 daqiiqana kama badna*”.

Fekerikii hurda'da jilicsan iyo ta culus

Culimo badan baa waxay aaminsan yihiin in shan marxaladood ay soo maro qofka hurdadiisu. Marxladda hore iyo ta labaad waa markay hurdadu, bilaabmato. Waxayna sheegeen in wakhtigaa qofka seexday uu dareemo waxa agtiisa ka dhacaya laydh iyo jabaqba, una gudbayo marxaladda saddexaad iyo ta afraad, labadan marxaladood waa marxalad uu qofku hurdada culus galo oo aanu dareemayn waxa hareerahiisa ka dhacaya.

Waxa anay sheegen in labada marxaladood ay yihiin labada jidhka bini aadamka ugu faaiidada badan. Marxaladda shanaad waxay bilaamataa sagaashan daqiiqadood (90 daqiiqadood) ka dib marka qofku uu seexdo. Waxaana loo yaqaannaa marxaladda qofku riyada arko ee maskaxdu shaqayso. Sidoo kale wadnaha shaqadiisa iyo neeftu badato. Indhuhuna dhaqdhaqaaqyo degdeg ah ay sameeyan, waxaana loo yaqaannaa marxaladda dhaqdhaqaaqa indhaha (Rapid eye movement rem phase).

Dadka aan seexannin saacado ku filan, waxa dhici karta in aanay si fiican u gudo gelin marxaladdan shanaad. Sidaasi ooy tahay dareen baa gala inaanay riyo arag ama aanay xasuusan Karin wixii riyo ay arkeen, taa micnaheeduna maaha in ayna riyoon.

Cilmi-baadhista waxay caddaysay in dadka oo dhammi ay marxaladdan shanaad ee riyoooyinka gudo galan, laakiin ay asbaabi jirto inaanay u suurta galin in ay riyoooyinkii xasuustaan. Kuwaas oo ay ka mid tahay in dadkaasina aanay iskuba mashquulin in arrinta riyada. Ama ay seexdaan saacado ka yar intii loogu talagalay qofka Bini-aadamka ahi in uu seexdo (7 ilaa 8 sacadod) maalintii.

Waad riyootee runtu waa maxay?

CUTUBKA SADDEXAAD

Riyada wanaagsan iyo riyada xun

Riyada wanaagsan iyo ta xumi labaduba waxay cabbirayaan qofku wuxu ku riyoodo. Culimadu waxay yidhaahdeen “*Wixii wanaagsan ee qofku ku riyoodo khayr iyo quruxna le waxaa loo yaqaan (ru’yaa). Xagga wixii shara ee fool xun culimadu u yaqaannaan (xulum)*”.

Bukhaari iyo Muslim waxay soo wariyeen in Nabigu uu yidhi (N.N.K.H). Ruyadu waxay ka timaaddaa Ilaahay (Swc). Xulumkuna waxay ka soo aroortaa shaydaanka, in ruyada Ilaahay loo nisbeeyaa waa sharaf la raaciyay ru’yada.

Wakhtigee baa ugu wanaagsan riyada habeenkii iyo ta maalinnimo?

Ibnu Siiriin wuxuu weriyay xadiiskii Bukhaari ku sugnaa ee nebigu yidhi riyada habeenkii waa sida ta maalintii. Riyada habeenkii waxaa ugu run badan saacadaha ka horreeya salaadda subax, waayo waa wakhtiga Ilaahay iyo raxmaddiisu soo degto, shaydaankuna fogaado.

Riyada maalintiina waxaa ugu run badan ta bacda duhur, waxaana u daliil ah xadiiskii *Bukhaari iyo Muslim* ku sugnaa ee Anas soo weriyay. Anas wuxu yidhi “Umu Xaram baa ii warrantay in uu nabigu naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee, isaga oo gurigeeda jooga in uu hurdo ka soo kacay isaga oo qoslaya. Umu Xaram waxay ku tidhi “*Rasuulkii Ilaahayoow maxaad la qoslaysaa?*” waxa uu ku yidhi “*Waxaan la yaabay dad ummadaydda ka mid ah oo Badda, ku safray oo sidii boqorrada sariiro saaran*”. Umu Xaram waxay ku tidhi “*Rasuulkii Ilaahayoow iigu ducee in aan kuwaa raaco*”. Nebigiina waxa uu ugu jawaabay “*Kuwaas ayaad ka mid tahay*”. Haddana hurdadii ayuu dib ugu noqday nebigu. Mar kale inta uu soo kacay ayuu riyadii ku soo celiyay isaga oo qoslaya. Umu Xaram mar labaad bay tidhi “*Ii bari nebi Allaw*

inan ka mid noqdo dadkaa". Markaa ayaa uu ku yidhi nebigu "Adigu kuwii hore ayaad raacday".

Waxaa guursaday Umu Xaram, saxaabigii Cubayda Ibnu Saamit. Cubayda jihaadkii buu u kaxaysatay Umu Xaram. Markay ka soo laabatay dagaalkii ayay hal ay lahayd is tidhi fuul, balse way ka soo dhacday qorta dhaawac ka soo gaadhay ayayna u dhimatay. Riwaayad kalana waxay sheegaysaa in ay badda raacday wakhtigii Mucaawiya. Markay ka soo laabatayna hal ay leedahay fuushay kana soo dhacday sidaa daraaddeedna ay u geeriyootay.

Noocyada ay u kala baxaan riyoooyinku

Riyoooyinku waa saddex nooc sidii Abu Hurayra ku soo weriyay xadiiskii Bukhaari iyo Muslim ku sugnaa ee nebigu nabad galyo korkiisa ha ahaateeku yidhi "Riyadu waa saddex:

- ✚ *Riyo wanaagsan oo bishaaro ah kana timaaddaxagga Ilaahay.*
- ✚ *Riyo shaydaanku qofka murugo uu gelinaayo.*
- ✚ *Riyoka timaadda qofku wuxu naftiisa ugu sheekaynaayo "*

Ibnu Maaja wuxuu soo weriyay xadiiskii uu nebigu (csw) yidhi "Riyadu waa saddex.

- ✚ *Baqasho dhanka shaydaanka ah, si uu murugo u geliyo bini-aadamka.*
- ✚ *Wuxuu qofku kudhaqaaqoisagoo soo jeeda deetana riyo uu ku arko.*
- ✚ *Waa qayb ka mid ah 46 qaybood ee nebinnimada "*

Sharrax kooban riyada wanaagsan

Waa bishaaro Ilaahay qofka bini-aadanka ah ugu bishaaraynaayo uguna farxad gelinayo, waana qayb ka mida nebinnimada.

Waad riyootee runtu waa maxay?

(لَهُمُ الْبُشْرَى فِي الْحَيَاتِ الدُّنْيَا وَفِي الْأَجْرَةِ لَا تَبْدِيلَ لِكَلِمَاتِ اللَّهِ ذَلِكَ هُوَ الْفَوْزُ الْعَلِيمُ)
Aayadda asaxaabada nin ka mid ah, markii la weydiiyay wuxuu yidhi
“Waa riyada wanaagsan ee qof arko ama loo arko”

Riyada wanaagsani waa laba nooc

- ❖ Riyo cad oo aan sharrax u baahnayn taasina maaha qaalib.
- ❖ Riyo tusaale ah oo macno badan ku duugan una baahan in la sharraxo.

Waa riyo baaddil ah oo aan qiimo la hayn una baahnayn in la isku mashquuliyo maxaa yeelay shaydaanka ayaa qofka bini-aadamka ah ku dheldheelaya, murugo iyo walaac na ku beeraya. Sida xadiiska ku sugan saxiixu Muslim ee uu soo weriyay Jaabir.

Nin reer miyi ah oo nebiga u yimi kuna yidhi “*Nebi Allaw waxaan riyo ku arkay aniga oo madaxa la iga gooyay ina hor cararay, culays badanina i fuulay markaan riyada arkay*”. Kaddib nabigii baa ninkii ku yidhi “*Dadka ha uga sheekaynnin ciyaarta uu shaydaanku kaaga ciyaaray hurdadaadii*”

Sharraxa Riyada qofku naftiisa ugu sheekeeyo

Taasi waxay la xidhiidhaa qofka bini-aadanka ah iyo nolol maalmeedkiisa waana sida, arday imtaxaankisii ka werweraya, ama ruux ganacsigiisii ka walwal qaba, ama qof safar ka werweraya oo tabaabushaysi ku jira. Riyada noocan ahina wax qiimo ah ma laha.

Calaamadaha riyada wanaagsan

- ✚ Riyada wanaagsani waa riyo caddaan ah oo aan laga soo helayn waxyaalo tashuush geliya.
- ✚ Waa riyoooyin dhacdooyinkoodu macquul yihiin iskuna xidhiidhsan.
- ✚ Qofka riyoodaa waxa uu ku dedaalaa in uu fasirto riyada ama cidi u macnayso. Taasoo bushaaro u ah ama digniin.

- ✦ Riyada waxaa la socda laabta oo nafis dareenta iyo iimanka oo sare u kaca.
- ✦ Waxaa calaamad u ah in qofku waxaa uu arkayaa uu noqdo wax uu jecelyahay.
- ✦ Soo noqnoqashada ama dhawr arkaan sidii xadiiskii Bukhaari iyo Muslim ee Ibnu Cumar soo weriyey ahaana in rag saxaabada ka mid ah la tusay, in habeenka laylatu qadrigu uu ku jiro toddobada habeen ee ugu danbeeya Ramadaan. Markaasu nabigu yidhi “*Waxaan arkaa in riyadiinnii iskugu soo biyo shubatay toddobada habeen ee u danbeeya bisha, qofkii markaa cibaadaysanayowna toddobadaa ka dayday laylatu qadriga*”.
- ✦ Waxa calaamad u ah in aan la illaawin riyada, maxaa yeelay waa nooc waxyiga ka mid ah nebinnimadana ka mid ah.

Calaamadaha riyada xun

- ✦ Riyada xumi ma cadda tashuush iyo wax kale ayaana ku dhex jira.
- ✦ Sidoo kale bishaaro iyo digniin toona ma wadato.
- ✦ Riyada xuni murugo iyo werwer ayay leedahay.
- ✦ Riyada xun qofku kuma degdego umana cararo siduu u fasiran lahaa.
- ✦ Inta badan riyada xuni kama warranto mustaqbalka ee waxay ka warrantaa wakhti-xaadirka wixii taagan iyo kii hore ee tagay.
- ✦ Inta badan riyada xumi waxay wadataa arrimo aan caqliga iyo diintu oggolayn

Anshaxa riyada wanaagsan

Bukhaari wuxuu soo weriyay xadiiskii *Abu Saciid Al-Khudri* ee nabigu naxariisi ha maashaysee uu yidhi “*Haddii qof idinka midi uu arko riyo uu jeclaado waa wax Ilaahay loogu mahad celiyo. Kuna wanaagsan inuu ka warramo*”.

Maxaa la gudboon qofka riyo wanaagsan arka?

Waxaa la gudboon dhawrkan arrimood ee aynu sheegi doonno:

- ✚ In uu Ilaahay u mahad-celiyo.
- ✚ Inuu uga warramo cidda uu jecel yahay.
- ✚ Inaanu qof neceb ama qof xaasid ah uga warramin
Sidii nebi Yacquub inankiisii nebi Yuusuf, uu dardaaranka ugu siiyay inaanu ka warramin riyadii uu ku riyooday iyo xadiiskii nebiga ee ku sugnaa *Dabraani* ee nebigu yidhi arrimihiinna qarsoodi ku dhammaysta. Qof wal oo Ilaahay u nimceeyay
- ✚ xaasid buu leeyahay.
- ✚ Inuu ku bishaaraysto sidii nebigu sheegay ee ahayd in qofkii riyo wanaagsan arkaa uu ku bishaaraysto.
- ✚ Inaanu uga sheekaynnin qof kale. qof uu jecel yahay mooyaane, ugana warramo qof cilmi u leh hal tebinta riyoooyinka.

Sidii naxariis iyo nabad galyo Alle haka yeelee, waa kii *lahaa xadiiskii Tirmiidi* soo weriyay ee nabigu yidhi “*Ha uga warramin riyada qof cilmi u leh mooyaane. Ruux kale*”.

- ✚ Inuu fasirto ama loo fasiro. Siduu u arkayna u sheego waxna aanu ku darin waxna aanu ka dhimin.

Adaabta riyada xun

Xadiiskii Saxiixi Muslim ku sugnaa ee Jaabir soo weriyay, waa kii lahaa wuxuu yidhi “*Qof idinka mid ahi hadduu riyo arko oo uu karaahiyaysto saddex jeer dhankiisa bidix ha afufo, shaydaankana ha iska naaro saddex goor, dhanka uu u jiifayna ha beddelo*”.

Sharrax kooban Tallabooyinka aynu ka qaadanaynno riyoooyinka xun xun

1. Inaynu sharkeeda Ilaahay ka magan galno, riyada oo keliya maahee arrin waloo xunba in Ilaahay sharkiisa laga magan galo ayaa muhiim ah.
2. In shaydaanka la iska naaro.
3. In bidixda la afuufo si shaydaanka loo eryo lana xaqiro hoosna loo dhigo.
4. Dhinicii loo jiiifayna in la beddelo xaalad kasta oo xunna rejo wanaagsan laga dhigto, taasoo micnaheedu uu yahay in xaaladdii xumayd ee hore Ilaahay laga magan sado mid rejo wanaagsan.
5. Inaanu cidna uga warramin.
6. Inuu tukado laba ragcadood haddii uu karayo.
7. In aanu naftiisa u fasin maxaa yeelay riyadu sida loo fasiro ayay u dhacdaa inta badan.

Riyadu waxay u dhacdaa sidii loo fasiro

Xaakim wuxuu soo weriyay xadiiskii Anas ee nabigu uu yidhi “*Riyadu waxay u dhacdaa sidii loo fasiro*”. Sidoo kale waxay soo weriyeen *Abu Daauud, Tarmadii, iyo Ibnu Maaja*, ba inuu nabigu yidhi “*Riyadu waxay ka laallaaddaa shimbir lugteed intaan la fasin. Haddii la farisna way ka dhacdaa*”. Waxaynu tusaale u soo qaadan sheeko dhacday xilligii nabiga naxariisi ha maanshaysee oo ku sugan *Kitaabka Daarimii*.

Waxay tidhi Caasha: “Waxaa jirtay gabadh reer Maddiina ah oo nin taajir ahi qabay oo safar badnaa. Mar wal oo ninkeedu ka dhoofaba riyo ayay ku riyoon jirtay, inta badanna iyadoo uur leh ayuu ka safri jiray, markaa ayay nebiga u iman jirtay. Kol kasta oo ninkeedu ka haajirana waxa ay ku odhan jirtay “*Ninkaygu waa ganacsade, waxa uu iga tegay anigoo uur leh. Dabadeed waxa aan ku riyooday isaga oo tiir ka mid ah tiirarka gurigu uu jabay, uurkaygana aan dhalay ilmo cawaran*”. Waxa uu nebigu ugu jawaabi jiray “*Ninkaaguna caafimaad buu kuugu soo noqon ilma baarriyana waad dhali*”. Laba ilaa saddex jeer oo ay ku riyootayba sidaas ayaa uu ku yidhi. Dhawr jeer oo u sheegayna sidii ayay u dhacday. Maalin maalmaha ka mid ah, ayay mar kale arrintii ku dhacday gabadhii, nebiga ayayna gurigiisii timi. Markaa ayaa Caa’isha waydiisay “*Maxaad*

Waad riyootee runtu waa maxay?

u socotaa?”. “*Riyo ayaan arki jiray oo riyadaa ayuu ii fasiri jiray*” ayay ku tidhi gabadhii. Caa’isha ayaa weydiisay kuna tidhi “*Bal ii sheeg riyadaa?*”. Gabadhii waxa ay ku tidhi “*Kuu sheegi maayee nebiga ayaan la sugayaa*”. Mar kale ayaa ay ku adkaysay Caa’ishi in ay u sheegto. Markay ku celcelisay ayay u sheegtay riyadii. Caa’isha ayaa u fasirtay oo ku tidhi “*Ninkaaguna wuu dhimanayaa, khayr laawana waad dhalaysaa*”. Intaa wixii ka danbeeyay way ooyday gabadhii riyada loo fasiri jiray.

Iyada oo gabadhii ooyaysa ayaa uu nebigii soo galay gurigii, markaa ayaa uu weydiiyay nebigii “*Maxaa ku dhacay gabadhan Caa’ishaay?*”. Caa’isha ayaa uga warrantay nebiga sidii riyadu ahayd iyo siday ugu fasirtay gabadha. Nebigiina markaa ayaa uu ku “*Yidhi ma aha sidaasi Caashaay*”.

Waayo qofka muslimka ah riyada waxaa loogu fasira dhinaca khayrka leh. Maxaa yeelay riyadu sida loo fasiro ayay u dhacdaa. Muddo yar ka dib ayuu ninkii dhintay, khayr laawana way dhashay gabadhii. Cadaaba, waxaa laga soo wariyay in uu yidhi “*Riyadu sidii loo fasiray u dhacdaa*”. Xaggaa waxaa inooga cad in uu Ilaahay qaddaro in ay riyo dhacdo, waxa uuna u sakhiraa qofka fasiraya in uu u fasiro siday u dhacayso riyadu.

Dib-u-dhaca riyada

Waxaa u qaalib ah riyada wanaagsan in fasiraaddeedu dib u dhacdo. Si qofka ay bushaaro ugu noqoto inta aan loo fasirin naftuna ugu faraxdo markaa loo fasiro. Riyada xun waxaa qaalib u ah in uu arko inta aanay dhicin ama markay dhacdaba, oo ay ku soo degdegto dib u dhacna aanay lahayn, bishaaro na aanay wadan.

Aadaabta looga bahan yahay qofka muslimkii inta aanu seexan

Waxaa looga baahan yahay qofka muslimka ah intaanu seexan tallaabooyin sharci ah hadduu riyoodana caawinaysa, shaydaanka ka fogaynaysa. Waxa ka mid ah:

- ✦ In aanu salaadda cishaayi hurdadiisu ka dambayn wax daruuriya oo jira mooyaane, sida cilmi uu baranayo, marti uu soorayo iyo wixii la mid ah.
- ✦ In uu ku dedaalo siduu weyso ugu seexan lahaa, hurdadiisana uu ku bilaabo dhinaca midigta una barkan lahaa gacantiisa midig.
- ✦ In adkaarta soo aroortay ee faraha badan mid ka midah uu akhristo.
- ✦ In uu labada gacmood intuu isku soo dhaweeyo saddexda Qulhu wallena uu ku tufo. Dabadeedna madaxa illa inta uu jidhka marinkarayo uu mariyo.

Dembiga qofka beenka sheega riyadiisa

Bukhaari waxa uu weriyay xadiiskii Ibnu Cabbaas, ee nebigu uu yidhi “*Qofka ka been abuura riyo aanu arag, waxaa lagu amrayaa in uu laba tin isku tidco, taasi oo ah mid aan u suurtagali karayn*”. Xadiiskii Bukhaari ee Ibnu Cumar soo weriyay ee uu yidhi “*Beenta been ugu weyniwaxaa weeyi ruuxa ka been sheega riyo aanu arag*”. Dabari wuxuu yidhi “*Maxaa ka dhigay beenta been ugu wayn?*”.

Sidaynu ognahay beenta uu qofku isagoo soo jeeda uu sheegaa waa arrin weyn, waayo markhaati dila ayay geli kartaa, sidoo kale dad xoolo isku haya ayay geli kartaa. Haddana beenta riyada laga sheego ayaa ka weyn, waayo Ilaahay baa been laga sheegay, waana taynu hore u soo sheegnay inay riyadu tahay 46 ka qaybood ee nebinnimadda qayb ka mid ah, ooaynu og nahay inay xagga Ilaahay ka timaaddo.

Derejooyinka ay leeyihiin dadku xagga riyada

- ❖ Nebiyada riyadooda oo dhammi waa run, wax yaalo u baahan fasiraadna way ku riyoon karaanwaana waxyi inta badan.
- ❖ Saalixiinta (Muuminiinta) riyadooda waxaa qaalib ku ah runta, waxa anay ku riyoon karaan wax yaabo aan u baahnayn turjumaad.
- ❖ Wixii aan labada horeahayn, run iyo beenba way iskugu jirtaa riyadoodu waxa anay u kala baxaan saddex qaybood oo kala ah:

Waad riyootee runtu waa maxay?

- A. Dadka khayrka badan riyoooyinkoodu khayr iyo shar way is leeg yihiin.
- B. Fasaqiinta riyadooda sharka iyo beenta ayaa ku badan, run tuna way ku yar tahay.
- C. Gaalada riyadooda waxaa naadir ku ah runta. *Bukhaari iyo Muslim* waxay soo weriyeen inuu nebigu yidhi (Csw) “*Riyada ugu wanaagsani waata ka timaadda ama uu arko qofka ugu run sheegga badan*”.

Karmaani wuuxu yidhi:

- ✓ Riyada qofka muuminka ah ayaa runta uga dhaw ta qofka gaalka ah.
- ✓ Sidoo kale riyada qofka caalinka ah ayaarun uga dhaw ta qofka jaahilka ah.
- ✓ Mar kale riyada waayeelka ayaa run uga dhaw riyada qofka dhallinyarada ah.

Riyada ay tahay in aynu fasirno waa tuma?

Marka hore ma habboona in qofka muuminka ahi uu isku mashquuliyo sida uu u fasiran lahaa riyoooyinkiisa oo dhan, taas oo dumarka inta badan qaalib u ah, marka ragga loo eego, waayeelkana qaalib u ah, marka dhallinyarada loo fiiriyo.

- ✚ Riyadu hadday tahay riyo xun oo baqasho leh, qofkuna uu ka soo baxo tallabooyinkii uu iskaga ilaalinayay ee ay ka mid ka ahayeen: inuu bidixdiisa afuufo, shaydaankana iska naaro, waayo wuxuu arkay dhici maayaan. Hadday dhacaanna wax dhibaato ah u geysan maayaan. Sidaa darteed looma baahna in la fasiro riyadaa.
- ✚ Waxa uu qofku naftiisa intaanu seexan kula sheekaysto ama dhacdooyinka maalmahaa ku dhaca oo uu ku arko riyo ahaan. Riyada noocaa ahi waa mid fasiraad leh.
- ✚ Waa nooca ay tahay in aynu muhiimadda siino, fasiraaddeeda. Waana riyada bushaarada wadata ee wanaagsan. Taana waxa uu uga warrami

karaa uun qof uu jecel yahay, waxa aanu fasiraaddeeda weydiinayaa qof caalim ah oo diintiisa iyo aqoontiisaba uu ku kalsoon yahay.

Riyada marka loo eego dusha iyo gudaha

Qofka riyoonaya uma bannaana in uu isku mashquuliyo riyadiisu waxa guud ee ay xanbaarsan tahay, mana aha inuu ku farxo riyadiisa guud oo khayr tilmaamaysa, sidoo kale maaha inuu murugoodo haddii riyadiisa guudkeedu uu yahay mid murugo leh. Waxaa muhiim ah in arrimahaa loo daayo cilmiga fasiraadda riyooyinka iyo qawaaciddiisa. Waxa aanay u qaybsamaan afar dhudood oo kala ah:

- *Riyada la mahadiyo kor iyo hoosba*: sida qofka ku riyooday in uu Ilaahay la hadlaayo (Sbw) ama malaa'igta mid ka mid ah, amaba nebiyadda in ka mid ah (Calayhi salaam) Iyadoo taasi xanbaarsan tahay sife wanaagsan ama hadal wanaagsan. Sidoo kale haddii uu ruux ku riyoodo isaga oo jooga meelaha lagu cibaadaysto Ilaahayna lagu caabbudo... Riyadaasina mid kor iyo hoosba la mahadiyaybay noqonaysaa.
- *Riyada korka la mahdiyay gudahana aan wanaagsanayn*: sida dhegaysiga heesaha ama in uu qofku ursado ubaxyada, waayo taasi waa hammi iyo murugo sababtuna waxa ay tahay dhegaysiga heesuhu, dadka dhegaystaa wax ay iskaga fogeeyaan muragada. Halka ubaxana inta badan loo geeyo dadka xanuusanaya. Ama sidoo kale qof ku riyooday in loo magacabay meel aanu u qalmin oo aanu hanan karin. Taasi na ma wanaagsana.
- *Riyo kor iyo hoosba aan la mahadin*: Sida Qof ku riyooday mas qaniina, dab gubay, daad qaaday, ama aqal ku dumay. Intaasiba ma fiicna gudo iyo dibadba, maxaa yeelay calaamad waxay u tahay werwerka iyo walbahaarka.
- *Riyada dushana aan wanaagsanayn, gudahana wanaagsan*: sida qof ku riyooday in uu ilmihisii gawracayo oo lagu fadirayo xashka.

Riyo baqashada leh (night mare)

Dadka waxaa soo mara riyooyin baqasho leh, taas oo u sababaysa sas iyo hurdo xumo, inta badanna riyooyinka noocaas ahi way kala fogfog yihiin. Riyada noocaas ahi laba kooxood bayna u badan tahay.

- ❖ Dad marxalado iyo duruufaha adagi ay soo mareen noloshooda.
- ❖ Dad xanuunno ku dhaceen dhanka maskaxda ah oo dawooyin loo qoray.

Culimada aqoonta u le cilmigani waxay isku dayeen in ay arrimahaa cilmi-baadhis ay ku sameeyaan. Qoladda aaminsan Fekerkaa *FROIED* waxay yidhaahdaan “*Riyada noocasa waxaa keena baahiyo kala geddisan oo dagaal ku jira qofka guduhiisa ah*”. *Qolada labaad*, waxay aaminsan yihiin in riyadan baqashada iyo saska leh ay sabab u tahay dhacdooyin hore oo soo maray ruuxa riyooday, sida ka baqashada mugdiga, meel-ka-soo-dhaca, dhul-gariirka, duufaannadaiyo dabka, *Fekerka qolada saddexaad*, waxay aaminsan yihiin in waxyaabaha keena xanuunka saska ay yihiin ciil iyo cadho ku jira ruuxa guduhiisa oo aanu dibadda u soo saari karin marka uu soojeedo. Haddii uu seexdana ku dhex qarxaya dabadeed isku beddelaya riyo xun.

Inta badan wakhtige bay dhacdaa cadhadani?

Waxa ay cilmi-baadhayaal badani cadeeyeen inay dhacdo markay hurdadu soo gabaabsiga tahay. Xanuunkan labada saac ee u dameeya hurdada oo ah marxaladda shanaad ee loo yaqaanno marxaladda riyada.

Yay ku dhacdaa?

Inta badan waxaa lagu arkaa carruurta yaryar, haddii uu soo noqnoqdana wax buu yeelaa ilmaha koritaankiisa. Waxaa lagula taliyaa macalliminta iyo waalidkaba in ay ka waraystaan riyada noocaas ah. Taasaana daawo u ah. Riyada noocaas ahina marka ilmaha da'diisu korto marba marka ka dambaysa way sii yaraataa. Laakiin dadka waaweyn riyada noocaas ahi way ku yar tahay, inta badanna waxay ka dhalataa xaaladaha nolol maalmeed.

Waad riyootee runtu waa maxay?

CUTUBKA AFRAAD

Ilaahay riyo ma lagu arki karaa?

Waxa ay isku raaceen saxaabadii, taabaciyiintii iyo culimadii aqoonta u lahayd fasiraadda riyoooyinku in ay suurtagal tahay. Sidaa si le'eg na waxaa aaminsan Imaamu Nawawi, sida, ku cad kitaabka uu ku sharxayo saxeexu Muslim. Sheekhul islaam Ibnu Taymiya waxa uu ku yidhi kitaabkiisa (Majmuuc Al-fatawaa) qofka bini-aadamki Ilaahay uu ku arki karaa riyada, laakiin waxa uu arkaya Ilaahay xaqiiqadiisii maa aha, oo sida aynu wada ognahayba, Ilaahay adduunyada laguma arki karo, waayo Ilaahay wax la mid ahi ma jiro, sida uu Alle ku sheegay suuratu Al-shuraa, aayaddeeda 11^{aad}. waana nimacada ugu weyn ee qofka jannada galaa la siinayo in uu Ilaahay ku arko, waayo waxaa kuu caddaynaya in aan riyada lagu arki karin adduunyada Ilaahay. Nebi Muuse markii uu dalbaday in uu arko, waa kii arki kari waayay.

Waxyaabaha lagu fasiro aragtida Ilaahay

Waxaa ka mid ah tawbadda, tawxiidka oo la ilaaliyo, magacyada Ilaahay oo la rumeeyo. Waxa kale oo lagu fasiraa in la iska ilaaliyo fitnada qofka Ilaahay ka fogaynaysa.

Nebiga riyo ma lagu arki karaa?

Anas waxa uu soo wariyay xadiiskii Bukhaari, ee (Csw) uu yidhi "*Qofkii riyo igu arkaa run buu igu arkay, waayo shaydaanku iskama kay dhigi karo*". Xadiiskaa iyo axaadiis badan oo la mid ahi waxay inoo caddaynayaan in nebiga riyo lagu arki karo, shaydaankuna aanu nebiga suuraddiisii iska dhigi karin. Culimadu waxay isku khilaaftay aragtida nebiga, inta badana waxaa la isku qabsadaa Nebiga oo sidee u eeg ayaa la arki karaa? Waxaanay yidhaahdeen "*Waxaa lagu arki karaa sifadii markii uu noolaa*". Haddii uu qofku ku riyooday nebiga Csw, waxaa la weydiinaya sida uu u ekaa. Haddii uu tilmaamo astaamihii axaadiistu sheegtay ee nabiga lagu arki jiray, ruuxaasi waxaa dhaboobaysa in uu

nebiga arkay, haddii kale oo uu astamahaa u arki waayo waxa dhacaysa in aanu arag nebigii (Csw).

Astaamihii Nebiga Cws

Sida ku soo aroortay kitaabka (Al Tarmidii Ashaamil Al Muxamadiya) nebigu (csw) nin dheer ma uu ahayn, nin gaabni lagu sheegana ma ahayn balse, ruux dhexdhexaad ah oo dherer xiga ayaa uu ahaa. Nebigu (cws) calool ma lahayn. Nin cad oo labada dhaban casaan ku jiro ayaa uu ahaa. Sida uu sheegay *AL-qaadi ciyaad*, "*Waxa aad moodasay cadceedda iyo dayuxu inay dhabankiisa ka muuqdeen*". Sida oo kale, nebigu, sunnayaal dhuudhuban ayaa uu lahaa oo aan isku xidhnayn. Waxa uu lahaa ilko cad oo aan raarnayn. Sankiisu waa dhuubnaa, Indho waaweyna ayaa uu lahaa iyo gadh weyn.

Timo badan oo dhaadheer aad na u madaw ayaa uu lahaa, inta badan laguma arag cirro wax ka badan 20 xabbo. Waxa uu lahaa laba garab oo ballaadhan, dhididkiisu udgoon buu ahaa. Ruux sifooyinka iyo wixii la mid ah haddii uu arko, nebiga run buu u arkay. Kii sawir kale ku arkaana waa bushaaro iyo khayr. Laakiin lama mid aha ruuxa astaamihii hore arkay ee aynu soo sheegnay.

Qofkii ku riyooda Nebiga (Cws)

Haddii ruux uu ku riyoodo nebiga oo ku amraya arrimo diini ah maxaa laga yeelayaa? Sida aynu ognahay nebigu csw, intii aanu xijaaban diinta waa inoo dhammays tiray. Haddii ruux uu ku riyoodo amar diini ah oo ka soo hor jeeda diinta in uu nabigu ku amray, sidii salaad lixaad oo la waajibiyay. Riyadaa waxba laga soo qaadi maayo. Haddii uu riyo ku xaaraantinnimeeyay wax xalaala ama uu ku xalaaleyay waa xaaraan ah wax ba laga soo qaadi maayo iyadana. Laakiin tii sharciga waafaqsani waa bishaaro iyo khayr.

Adaabta fasiraadda riyoooyinka

Maxaa Looga Baahan Yahay Qofka Fasiraya Riyada?

- ❖ In uu riyada si fiican u dhegaysto.
- ❖ In uu mariyo riyada wejiga ugu wacan.
- ❖ Qofka wax fasirayaa inuu noqdo ruux cibaado badan oo Alle-ka-cabsi badan.
- ❖ In uu qofka wax fasirayaa aqoon durugsan u lahaado kitaabka Ilaahay iyo sunnaha nebiga.
- ❖ In uu asturo riyada loo keenay, waayo ceebo iyo cawro ayay kashifi kartaa riyadu.
- ❖ In aanu ku degdegin fasiraadda, ilaa inta uu ka gun gadhayo waraysiga riyada.
- ❖ Wixii aanu garanayn, inuu ka run sheego, oo yidhaahdo “*Waxba ka garan mayo riyada*”. Sidi Maxamed Ibnu Siiriin oo cilmigaa loo daba fadhiisan jiray, isaguba waa kii riyooyinka qaar garan waayi jiray. Sida la soo weriyay waxa badnayd, su’aalaha la soo weydiiyo inta uu ka garan waayi jiray.
- ❖ Waxaa ka mid ah aadaabta, in uu doorto erayada ugu fiican ee riyada lagu fasirayo. Hadday riyadu khayr noqotana in loo bishaareeyo qofka loo fasirayo, hadday shar tahayna, inuu ka aammuso ama dhanka ugu fiican ugu fasiro.
- ❖ Marka uu fasirayo riyada waa in uu bisinka qabsado, Ilaahayna u mahad-celiyo.

Muhiimadda ay leedahay qofka riyada ku weydiinayaa xaaladda uu ku sugan yahay

Waxaa muhiim u ah qofka wax fasiraya in uu ogaado xaaladaha uu ku sugan yahay kuna xeeran ruuxa wax loo fasirayo.

- ✦ Garashada nooca qofka riyooday, waa in aynu ogaannaa ma lab baa, mise dhadig? Waayo dabeecadahoodu way ku kala geddisan yihiin xagga riyada.

Tusaale, dahabka oo kale haddii lagu riyoodo dumarka waa u riyo fiican. Raggana waa u riyo xun. Sidoo kale dharka cascas dumarku

waa u riyo fiican balse ragga waa u foolxumo. Halka gadhka, shaarubaha iyo cirraduba ragga, riyo fiican u yihiin, dumarkana riyo xun u yihiin.

- ✦ Wakhtiga riyadu dhacday, qofka riyada fasirayaa waxaa waajib ku ah in uu ogaado, maalinta, bisha ama sannadka oo mihiim u noqon kara riyoooyin fara badan fasiraaddooda.
- ✦ Waddanka ay riyadu ka dhacday: Sida aan wada ognahay dhaqannadda, cimilada iyo diimaha kala geddisani, door bay ku leeyihiin riyada wayna soo geli karaan.

Tusaale, qof ku nool waddamada Yurub mid ka mid ah oo ku riyooda qaraabadiisa oo qayb ka mid ahi ay galeen dukaanadda lagu iibiyo khamriga, kana soo iibsadeen. Taa fasiraaddeedu waxa ay tahay waa ganacsi ay geli doonan, maxaa yeelay, dalalkaa waa la oggol yahay in khamriga laga ganacsado. Halka isla riyadaa haddii qofku ku riyoodo isaga oo jooga Sucuudi Carabiya, waxaa lagu fasirayaa dhibaatooyin iyo xadhig. Maxaa yeelay khamirigu waa ka xaaraan Sucuudiga.

- ✦ Da'da qofka riyoonaya, waa mihiim inay da'diisu caddaato maxaa yeelay qofka aan qaan-gaadhin, riyadiisu way ka duwan tahay riyada dhallinyarada, wayna ka duwan tahay ta qofka da'da ah.

Tusaale, haddii uu qofka aan qaan-gaadhin ku riyoodo in uu duulayo isagoo meel ka duulaya meel kalena u duulaya waxa lagu fasirayaa, in xaal cusub oo tii hore ka wanaagsan uu galayo. Halka isla riyada haddii uu ku riyoodo qof da' wayn ay tahay micnaheedu geeridiisii oo soo dhawaatay.

- ✦ Ogaanshaha xaaladda qofka (caafimaadka iyo qoys): qofka riyada fasiraya waxa mihiim ah in uu wax ka ogaado xaaladda qofka riyada uu u fasirayo. Ma doob baa? Ma xaasbaa, ma carmaalbaa, mise waa ma-dhalays? Ogaanshaha xaaladahaasi door weyn bay ka qadataa

fasiraadda riyada. Waayo, waxaa khalad ah in wiil doob ah riyo uu ku riyooday loogu fasiro wiil u dhalanaya, ama gabadh carmal ah riyo ay aragtay la yidhaahdo, iyada iyo ninkeeda ganacsigaa ku guulaysanaya. Ama sidoo kale nin ma-dhalays ah la yidhaahdo waxaa kuu hanuunsanaan doona ubadkaaga. Waxaa qaalib ah inta badan in riyooyinka doobku u batan jacayl, doonis, guur, IWM. Halka qofka xaaska leh ay riyooyinkiisu ku dul meeraysataan nolosha badhaadhaha, liibaanta, ubadka, dhaqaalaha iyo masaariifta. Halka riyadá qofka xanuusanaya ay ku meeraysanaynso caafimaadkiisa iyo xanuunka haya noociisa, xilliga uu ka bogsanayo iyo adeegyada caafimaad. Halka ruuxa caafimaadka qaba ay riyadiisu u badan tahay hanka iyo himiladiisa iyo halka uu higso leeyahay.

- ✦ Mihnadda Qofka riyoonaya: Waxaa waajib ku ah qofka fasiraya riyada in uu ogaado wax uu qabto qofka loo fasirayo riyada, ma arday baa, ma shaqaalaa, ma ganacsadaa, ma hooyo guri-joog ah baa, ma qof talax gabaa? Waayo fasiraaddu ma aha in talax gabe ama qof bilaa shaqo ah in loogu fasiro in uu dallacaad helayo. Ama arday riyadiisa loogu fasiro in laga eryayo shaqadiisa isaga oo aan shaqayn.
- ✦ Xidhiidhka ka dhexeeya qof iyo Ilaahay: waxaa muhiima qofka riyada fasirayaa in uu wax ka ogaado xaaladda diiniga ah ee ruuxa riyooday, ma mid liidataa, ma dhexdhexaad baa, ma mid sarraysaa, mise waa iska caadi? Waxaa jirtay in Sheekhii weynaa ee Ibnu Siriin ay laba nin oo isku xigaa u soo galeen isagoo wax dhigaya. Kii ugu horreeyay waxa uu ku yidhi sheekhii “*Waxa aan ku riyooday aniga oo eedaamaya*”. Waxa uu ugu bishaareeyay in sannadkan uu tagi doono xashka. In yar ka dib waxaa u soo galay sheekhii nin kale, waxa uu ku yidhi “*Waxa aan ku riyooday aniga oo eedaamaya*”. Sheekhii waxa uu faray ardaydiisii in ay qabtaan ninkan waayo, waxa uu yidhi “*Waa tuug*”

Ardaydii bay ku noqotay layaab iyo amakaag! Waayo laba nin oo isku xiga ayaa midna la yidhi xashka ayaad tegaysaa midna la yidhi tuug baad

tahay. Ardaydii oo weydiinaysa macallinkoodii sida ay wax u dhaceen ayaa waxa uu ugu jawaabay "Kii hore wejigiisa diin iyo akhlaaq baa ka soo iftiimayay, dabadeed waxa aan ugu fasiray eedankiisii, eedaankii Ilaahay ku amray Nebi Ibraahin in uu dadka xajka ugu eedaamo"

وَأَذِّنْ فِي النَّاسِ بِالْحَجِّ يَأْتُوكَ رِجَالًا وَعَلَىٰ كُلِّ ضَامِرٍ يَأْتِينَ مِنْ كُلِّ فَجٍّ عَمِيقٍ

Ninkii labaadna wixii uu wajigiisa uu ka akhristay, ayaa waxa uu ugu fasiray markii Nebi Yuusuf, walaalladii oo safraya inta aanay kicitimin ugu fasiray, tuug baad tihiine ha kicina.

فَلَمَّا جَهَّزَهُم بِجَهَّازِهِمْ جَعَلَ السَّقَايَةَ فِي رِجْلِ أَخِيهِ ثُمَّ أَذَّنَ مُؤَذِّنٌ أَيَّتُهَا الْعِيرُ إِنَّكُمْ لَسَارِقُونَ

CUTUBKA SHANAAD

Ma la arkaa riyada carruurta?

Haa, sida ay suuratul Yuusuf inoo sheegtay riyadii uu riyooday Nebi Yuusuf isaga oo Toddaba jira.

اذ قال يوسف لابيهِ ياأيتِ إني رأيتِ أحد عشر كوكبا والشمس والقمر رأيتهم لي
:-سورة يوسف آية (سجدين)

Markii uu u sheegay riyadii nebi Yuusuf, aabihii nebi Yacquub ee uu hoos u fasirtay waxa uu ku amray in aanu u sheegin walaalladii.

قال يابني لا تقصص رءياك على إخوانك فيكيدوا لك كيدا إن شيطان للإنسن عدو
(مبين)
:-سورة يوسف آية

Telegram:- Same Wade

Taasi waxa ay kuu caddaynaysaa mihiimadda ay leedahay riyada carruurta in la fasiro, haddii ay wadato miisan culus. Calaamaddii ahayd 11ka meere waxaa lagu fasiray carruurtii Nebi Yacquub, oo aanu ku jirin Nebi Yuusuf. Halka calaamadda cadceedda iyo dayuxu lagu fasiray, cadceedu in ay tahay nebi Yacquub, dayuxuna yahay xaaskiisii Raxiil. Calaamadda sujuudduna ay tahay oggolaansho iyo aqbalaad. Riyadaa oo la arkay 40 sanno ka dib.

Ma dhacdaa riyada gaaladu iyo faasiqiintu?

Sida riyada dadka muslimka ah ee wanaagsani u rumawdo, ayaa sidaa si le'eg ta gaalada iyo kuwa diinta ka fogi ba ay riyadoodu u rumawdaa. Sida ay u rumawday riyadii labadii nin ee la xidhnaa Nebi Yuusuf (Calayhi Salaam).

ودخل معه السجن فتيان قال احدهما إني أرئني أعصر خمرا وقال الآخر إني
(أرئني احمل فوق رأسي خبزا تأكل الطير منه نبئنا بتأويله إنا نرئك من المحسنين
:-سورة يوسف آية

Waad riyootee runtu waa maxay?

Xikmadda ka danbaysa in riyada gaalku rumawdo waxa weeye, sida ay gaalka xujo ugu noqoto, sidii riyadii *Fircoon* ee *nebi Muuse*, u fasiray iyo riyadii boqorkii Bakhti Nasar, in boqortooyadiisu suulayso ee uu u fasiray *Daaniyaal* ee rumawday.

Sidoo kale, boqorkii Kisraa riyadii uu ku riyooday ee rumawday. Waxaa kale, oo inoo cad in aan gaaladu iyo reer Galbeedku riyoooyinka aad u qiimayn, balse halkoodii ay u galeen *sixirka iyo faalku*, oo aad ugu baahsan oo waliba muuqaal baahiyayaal (tv) u samaysteen tiro badan, sidoo kale lacagna ay ku urursadaan. Halka qofka muslimka ah ee Ilaahay ka cabsanayaa markuu riyoodo, uu daydaydo qof cilmi iyo aqoon u leh oo una bayaamiya riyadiisa.

CUTUBKA LIXAAD

Qaacidooyinka Fasiraadda Riyayooyinka

Waa Cilmi ballaadhan fasiraadda riyoooyinku oo aan sahlanaayn, cid waliba na aanay ka warkeeni karayn una baahan shuruudo badan oo aan hore u soo sheegnay:

1. Hadday riyadu yeelato laba macne oo kala geddisan oo laba tafsiir leh misana iska hor imanaya, waxa uu qofka wax fasirayaa eegayaa alfaada, riyada iyo duruufta qofka riyada ku weydiiyay ta u dhaw, marwalba wuxuu u fasirayaa sidii wanaagga iyo rayn raynta ugu dhaw.
2. Waxaa laga yabaa riyadu in ay khaas u tahay qofka riyooday keligii. Sidii ruux ku riyooday in uu samada tagay, kana soo daaddagi kari waayay. Ninkaasi haddii uu xanuusanayo fasiraaddiisu waa dhimasho. Haddii aanu xanuusanaynna, waa safar. Haddii uu u qalmo xilna waa mid ku soo kordhay. Waa sida qof ku riyooda in guriguu deggenaa iyo kuwii ku xigayba dab qabsaday, waxaa lagu fasirayaa xanuunno ama dulmi uga yimaadda hoggaamiyaha dalkiisa, ama geeri, ama cadaw. Sidoo kale fitno ku faafta bulshada.
3. Waxaa laga yabaa riyoo aad ku riyootay adigu, in aanad fasiraaddeeda meelnaba ka soo gelin oo loo fasiro walaalkaa, saaxiibkaa, qof qaraabada ka mid ah ama qof aad cilaaqad leedihiin. Taasina waxa ay dhacdaa, marka aanay riyadu shaqaba kugu lahayn oo aan adiga lagu fasirayn. Haddii ilma yari riyoodo, riyadiisaa waxaa loo fasirayaa labadiisa waalid. Sidoo kale haddii qof shaqaale ahi uu riyoodo waxaa loo fasirayaa qofka uu u shaqeeyo. Haddii gabadh hooyo ahi riyooto, waxaa riyadeedaa loo fasirayaa saygeeda. Haddii aanu qofka riyooday meelna ka soo gelin riyada;

Telegram:- Same Wade

Tusaale, Sidii qof ku riyooday dhimashada Nebi Aadan oo lagu fasirayo aabbihiis oo dhintay, waayo aabbihiis waa kii ifka keenay sida Nebi Aadan (Cs) looga soo tafiirmay. Ama aabbe ku riyooday in uu indho beelay, oo loogu fasirayo inankiisa oo dhintay, waayo ubadku waa indhaha ruux kasta oo waalid ah.

4. Haddii uu qofku ku riyoodo arrin calaamad khayr ah, xukunkiisa waxaa loo gudbinayaa ehelkiisii, asxaabtiisii iyo inta wanaaggiisa ku farxa xumihiisana ka naxa. Sidaa si le'eg haddii uu ruuxu ku riyoodo cadawgisii oo dhibaataysan, isaga iyo qaraabadiisaba raaxo iyo faa'iido ayay u tahay. Haddii uu ku riyoodo riyo murugo leh, waxaa laga yabaa in arrintaasi ay uga baydho qaraabadiisii iyo asxaabtiisii uu jeclaa. Khayr iyo raaxanna ay u noqonayso cadawgiisa.
5. Waxaa laga yaabaa riyooyin kala geddisan in ay meel iskugu soo wada ururaan, oo wax keliya lagu wada fasiro. Sida qof ku riyooday cadceedda oo madoobaatay, ruux kalana ku riyooday badda oo qallashay, mid kalana ku riyoodo halka uu ku cibaadaysanayay oo la dumiyay, haddii ku kalana ku riyoodo buur weyn oo duntay. Intaasi oo dhan waxaa lagu fasirayaa dhimasho qof caan ah oo bulashada magac iyo milgaba ku leh, sida Boqor, Suldaan, Sheekh, Indheergarad.
6. Haddii qofku ku riyoodo isaga oo kutub badan akhrinaya, riyadiisaa waxaa loogu fasirayaa in ay tahay, isaga oo cilmi korodhsanaya, sida mid diineed iyo mid maaddi ahba. Sidoo kale haddii ruux uu ku riyoodo isaga oo dhakhtar yaalla riyadiisaa waxaa loogu fasirayaa in ay tahay mid caafimaad uu heli doono.
7. Fasiraadda la fasirayo riyooyinka waxyaabaha lagu salaynayo waxaa ka mid ah: da'da, muuqaalka iyo shaqada. Insaan

waliba waxa uu leeyahay fasiraad u gaar ah oo ku habboon (naasibta) kolba xaaladda uu ku sugan yahay.

Tusaale:

- ❖ Sida Sheekadii aynu hore u soo xusnay ee eedaanka.
 - ❖ Sida qof ku riyooday isaga oo meel fagaare ah ka qudbadaynaya, ayaa qofna loogu fasirayaa in uu xil helayo mid kalena looga fasirayaa in la deldelayo oo la dilayo.
8. Riyadu waxyaabo badan ayay ku kala duwan tahay:
- ❖ Sida luuqadda lagu hadlayo marka la riyoonayo.
 - ❖ *Sida kala geddisnaanta diimaha*, qofku haddii uu ku riyoodo isaga oo mayd cunaya, taa oo fasiraaddeedu tahay xoolo xaaraan ah in uu cunay (waa haddii islaam aad tahay waayo diinta muslimku way xaaraantinnimaysay cunista maydka). Haddii uu qofkaasi uu Kiristan yahay waxaa loogu fasirayaa, arsaaqad iyo raaxo. Sidaa si leeg ninka ku riyooda isaga oo xariir xidhan, ay riyo xun u tahay qofka muslimka ah ee xaaraanta ka tahay xariirtu, halka ninka gaalka ah ay u noqonayso riyo wanaagsan maxaa yeelay isaga waa u faa'iido diintiisuna way oggoshahay.
9. *Kala duwanaashaha wakhtiga*, xilliyadda qabawga, marka uu qofku ku riyoodo isaga oo dhar adag xidhan, biyo kululna isticmaalaya, waa khayr iyo raaxo waana riyo wanaagsan. Laakiin haddii uu kulaylaha ku riyoodo, riyada noocaas ah waa riyo aan wanaagsanayn iyo xanuunno. Sidaa si le'eg marka uu kulaylaha isticmaalo dhar khafiif ah ama uu ku maydho biyo qabaw, waa khayr, raaxo iyo riyo wanaagsan, laakiin riyadaas oo uu qabawbaha arkaa waa riyo aan wanaagsanyan iyo xanuun.

Telegram:- Same Wade

10. *Goobaha*, in uu qofku is qaawiyo musqusha dhexdeeda waa meel loogu tala galay, waana riyo wanaagsan. Laakiin, haddii uu fagaare isku qaawiyo waa riyo xun oo aan wanaagsanayn iyo in uu ku caan bixi doono wax aan la mahadin.

11. *Kala geddishaanshaha dhaqannadda*, sida xiirashada madaxa iyo gadhku, dadka ay dhaqanka u tahay waa u khayr iyo dhibaatooyin dhaafaya, ama ka dul kacaya. Halka xiirashada timaha iyo gadhku dadka karaahiyaysta ee aan iska xiirin, uu hammi iyo khasaare ku soo kordhay yahay. Sidaa si le'eg qolada dabka caabudda, waxa ay xaaraantinnimeeyaan cunitaanka hilibka lo'da, halkay ay Yuhuuddu xaaraantinnimeeyeen cunitaanka hilibka geela.

Sidoo kale Giriiggu, waxa ay xaaraantinimeeyaan cunitaanka hilibka digaagga (lukida). Halka muslimkana xaaraan uu ka yahay hilibka doofaarku iyo cabbitaanka khamrigu. Riyooyinkaas oo dhammi qolo kasta wixii ka xaaraan ahi waa u riyo xun, halka wixii u xalaal ahi na ay arsaaq iyo faa'iido u tahay.

Sidaasi si le'eg qofka dumarka ah ee ku riyootee iyada oo laga sinaysanayo meel fagaare ah, waa riyo xun iyo in ay qofkaasi caan ku tahay wax aan wanaagsanayn. Halka haweenayda Hindiyadda ahi ee ku riyootee iyada oo laga sinaysanayo ay u tahay riyo wanaagsan iyo cibaado suuban, maxaa yeelay waxa ay aaminsan yihiin in sinada Ilaahay loogu dhawaado (acuudi bilaah). Halka dadka dabka caabbuda, haddii ay ku riyoodaan iyaga oo dab shidaya ama u sujuudaya, waa u riyo fiican. Halka haddii ay dabka bakhatinayaan ay u tahay riyo xun.

Kala geddishaanta nolol-maalmeedka iyo arsaaqda

Qolooyinka cuntooyinka kariyaa haddii ay ku riyoodan iyaga oo dhar uskag ah xidhan ama jeexjeexan waa u riyo wanaagsan, waayo arsaaqdooda ayaa ku jirta huga noocaas ah, maxaa yeelay dharka noocaas ah, waxa ay xidhaan markay shaqada ku jiraan. Halka qayrkood ay u noqonayso riyo xun oo aan wanaagsanayn. Ninka cunta-kariyaha ahi haddii uu ku riyoodo isaga oo dhar nadiif ah xidhan, ay u noqonayso riyo xun iyo arsaaq la'aan.

Haddii riyo la arko oo fasiraaddeeda lagu soo waydiiyo, oo aad muslimka ceebihiisa iyo cawradiisa ka dhex dheehato, u astur hana ka sheekayn, hana magacaabin, si aanay xan kuugu noqon. Ibnu Qayim waxa uu ku sheegay kitaabkiisa (Iclaam Al-Muwaqaciin) qofka mufutiga ah, ruuxa riyada fasiraa iyo dhakhtarku waxa ay la kulmaan cawrada dadka iyo asraartooda, waxaana ku waajib ah in ay asturaan.

2 Qawaacidda fasiraadda riyoooyinka

- Dharka ama shaadhka waxaa lagu fasiraa diinta. Dhererka iyo gaabnida, nadaafadda iyo uskagga, intaaba qofka diintiisa ayaa lagu fasirayaa. Sidiid nebighu ba (Scw) uu ugu fasiray shaadhka diinta. Arrinta ay labaduba ka midaysan yihiin, waxa weeye in mid waliba wax asturay, oo dadka dhexdooda haybad iyo qiimo ugu yeelayo. Halka qofka shaadhku uu jidhkiisa asturayo, diintuna ruuxa qalbigiisa iyo ruuxdiisa ayay asturaysaa.
- Sidaa si le'eg caanaha waxaa lagu fasiraa, fitradda, fitraddana waxaa lagu fasiraa caanaha, labadooduba waxa ay ka midaysan yihiin nafaqada. Halka caanuhu ay nafaqo siiyaan jidhka, fitraduna ay nafaqo siiso nafta oo ay ku hanuuniso tubta toosan.
- Lo'da waxaa lagu fasiraa dadka wanaagsan ee ehlu-khayrka ah. Labadooduna waxa ay ka midaysan yihiin khayrkooda badan, dhibatadda aanay lahayn iyo baahida dadka iyo dalkuba u qabaan. Sidaa darteed, mar uu ku riyooday lo' la gawracayo, waxa uu ku fasiray saxaabadiisii oo qudha laga jarayo.

- Dhirta iyo beerta waxaa lagu fasiraa camalka, maxaa yeelay? Labadooda waxaa ka dhexeeya dedaal iyo manfac badan adduun iyo aakhiraba.
- Looxa waxaa lagu fasiraa munaafaqiinta, maxaa yeelay looxu hadh iyo intifaacsi midna ma leh. Sidoo kale munaafaquna iiman iyo khayrtoona aanu lahayn.
- Dabka iyo lolka waxaa lagu fasiraa fitnada, labadoodaba meeshay soo maraan waa ay fasahadiyaan. Dabku meesha uu haleelaba dambas buu ka yeelaa, halka fitanaduna dadka quluubtooda, diintooda iyo iimankoodaba ay baa'ba ka yeesho.

- Xiddigaha waxaa lagu fasiraa culimada, waxa ayna ka samii yihiin hanuuninta iyo toosinta.
- Roobka waxaa lagu fasiraa raxmadda, maxaa yeelay waxa ay ka siman yihiin hagaajinta xaaladda dadka iyo duunyadaba.
- Dhiigga qofka jidhkiisa ka baxa, waxaa lagu fasiraa xoolihiisa oo ka baxaya, maxaa yeelay labadaba dadka ayaa ku nool. Sida aad ogsoon tahay dhiigga qofna kama maarmi karo, sidoo kalena duunyada ruuxna kama maarmo.
- Haddii qof diinta Yuhuudda iyo ta Kiristaanka uu ku riyoodo waxaa lagu fasiraa bidco qofka dhanka diinta ka soo gashay.
- Haddii qofku uu ku riyoodo bir ama hub waxaa lagu fasiraa xoog iyo guul.
- Carfi udgoon haddii uu qofku ku riyoodo, waxaa lagu fasiraa ammaanta wanaagsan, qawlka fiican iyo camalka suubban.
- Urta aan wanaagsanayn, waxaa lagu fasiraa ammaanta xun hadalka aan wanaagsanayn iyo camalka foosha xun.
- Halka miisanka lagu fasiro caddaaladda.
- Ayaxa waxaa lagu fasiraa ciidanka iyo askarta.

Fasiraadda riyada marka dusha laga eegayo

1. Wax kasta oo biyo lagu kaydii karo waxaa lagu fasiraa weelka iyo alaabta.

Waad riyootee runtu waa maxay?

2. Wax kasta oo xoolaha iyo lacagta lagu ilaalin karo, sida sanduuqa iyo kiishka, waxaa lagu fasiraa qalbiga. Shay walba oo wax dhex gala ama la isku walaaqo waxaa lagu fasiraa guur, iskaashi iyo wada-jir.
3. Riyo wal oo ruux ku riyoodo oo dusha ka soo dhacaysaa waa riyo xun, halka riyo wal oo dusha loo baxayo ama sallaan la fuulayaa ay tahay riyo wanaagsan haddii aanay xadka dhaafsiisnayn.
4. Wixii dab gubaa waa masiibo, wixii jabaa na waa dhibaato. Wixii la xado ee aan la garanaynnin ciddii qaadatay ama xadday waa wax aan la helayn. Wiixi dhar ah ee qofku halkii loogu tala galay meel aan ahayn uu u xidho riyada dhexdeeda, waa riyo aan wanaagsanayn sida, cumaamadda oo lugta lagu xidhan yahay, sharabaaddo madaxa lagu xidhan yahay iyo qof dumar ah silis lugta ku xidhan. Siyaado walba oo qofka jidhkiisa ku siyaadda hadday tahay indhaha, dhererka, carrabka, gadhka, gacanta iyo lugtaba, waa siyaado khayr leh. Haddii ay xadka dhafsiisan tahayna waa shar, dhibaato iyo fadeexad.
5. Qofka xanuusanaya ee isaga oo aammusan guriggiisa laga soo saarayo, waxa ay calaamad u tahay dhimashadiisa. Isaga oo hadlaya haddii laga soo saaro gurigiisa, waxay calaamad u tahay noloshihiisa.
6. Ka soo baxa albaabbada cidhikhiga ihi waa badbaado iyo tawbad, gaar ahaan haddii loo soo baxo meel nafis ah ama waasic ah, dhimashada qofku waa tu cusub.
7. Dhimashada qofku waxay calaamad u tahay toobbaddiisa iyo soo noqashadii uu Ilaahay u soo noqonayey.
8. Wax la rahmay haddii qofku uu ku riyoodo waa dayn addoomuhu ku leeyihin ama xaq Ilaahay ku leeyahay.

Qawaacidda fasiraadda riyoooyinka (3)

Riyadu maxay ka kooban tahay?

Riyadu waxa ay ka kooban tahay saddexdan astaamood.

*Calaamad,
Markhaati,
Iyo dheeraad,*

1. **Calaamaddu:** waa bu'da riyada ee laga qaadanayo fasiraadda riyada la doonayo in la fasiro. Qofba qofka uu ka heli ogyahay calaamadda, ayaa uu kaga fasiraad fiican yahay qofka kale.
2. **Markhaatigu:** uma baahna fasiraad, waayo waxa uu isku xidhaa fasiraadda riyada iyo dhacdada. Waxa aanu mugdiga ka saaraa oo uu caddeeyaa calaamadda.
3. **Dheeradka:** ama siyaadada wakhti laguma lumiyo. Al-Baqawi na waxa uu yidhi "*Waxaa fasiraadda riyada ugu mihiimsani waa calaamadda*".

Ilaha laga eegayo fasiraadda riyada:

1. Kitaabka quraanka,
2. Sunnaha nebiga,
3. Macnaha iyo qiyaasta,
4. Magacyada,
5. Cagsiga iyo qaalibka,

Fasiraadda la isticmaalyo aayaddaha Quraanka

Xadhigga: waxaa lagu fasiraa ballanta.

واعتصمو بحبل الله جميعا ولا تفرقوا واذكروا نعمت الله عليكم إذ كنتم أعداءً فألف بين قلوبكم (فاصبحتم بنعمت الله إخوانا وكنتم على شفا حفرة من النار فأنقذكم منها كذلك يبين الله لكم آياته -سورة آل عمران آية (لعلكم تهتدون

Doonnida: waxaa lagu fasiraa badbaadada.

-سورة العنكبوت آية (فأنجينه وأصحب السفينة وجعلناها آية للعالمين)

Qoriga: waxaa lagu fasiray munaafaqiinta

وإذا رأيتهم تعجبك أجسامهم وإن يقولوا تسمع لقولهم كأنهم خشب مسندة يحسبون كل صيحة (-آية -سورة المنافقون (عليهم هم العدو فاحذرهم قتلهم الله أنى يؤفكون

Dhagaxaanta: waxaa lagu fasiraa qalbi adaygga.

ثم قست قلوبكم فهي كالحجارة أو أشد قسوة وإن من الحجارة لما يتفجر منه الأنهر وإن منها (سورة (لما يشقق فيخرج منه الماء وإن منها لما يهبط من خشية الله وما الله بغفل عما تعملون -آية -البقرة

Ilmaha sabiga ah: waxaa lagu fasiraa cadawga.

(فالتقطه آل فرعون ليكون لهم عدوا وحزنا إن فرعون و هلمن وجنودهما كانوا خاطئين) -آية -سورة القصص

Beedka: waxaa lagu fasiraa dumarka.

-آية -سورة الصافات (كأنهن بيض مكنون)

Albaab garaaca: waxaa lagu fasiraa ducada.

إن تستفتحوا فقد جاءكم الفتح وإن تنتهوا فهو خير لكم وإن تعودوا نعد ولن تغنى (-آية -سورة الأنفال (عنكم فنتكم شيئا ولو كثرت وأن الله مع المؤمنين

Cunitaanka hilibka qaydhin: waxaa lagu fasiraa xanta,

يأيها الذين ءامنوا اجتنبوا كثيرا من الظن إن بعض الظن إثم ولا تجسسوا ولا يغتب بعضكم (سورة (بعضا يحب أحدكم أن يأكل لحم أخيه ميتا فكرهتموه واتقوا الله إن الله تواب الرحيم -آية -الحجرات

Madaxda iyo boqorrada oo magaalo ama tuulo soo galaya: waxaa lagu fasiraa masiibo iyo dulli ku dhacaya dadka halkaa deggen.

سورة النمل (قالت إن الملوك إذا دخلوا قرية أفسدوها وجعلوا أعزة أهلها أذلة وكذلك يفعلون) - آية -

Haddaba aayadaha oo keli ah ma ahee, suuradaha laftooda ayaa marmar fasiraad xanbaarsan, sida:

- ❖ Suuratu Maa'ida, oo bushaaro xanbaarsan.
- ❖ Suuratu Tawba ayaa iyana u soo noqosho Ilaahay loo soo noqday xanbaarsan.
- ❖ Suuratu Maryam, ayaa iyana xanbaarsan xaas ama ilmo dhalanaya.
- ❖ Wannaasicaad iyo Cabasa ayaa iyaguna xanbaarsan hammi iyo diiqad.
- ❖ Suuratu Muuminuun, ayaa iyana xanbaarsan rumayn iyo walaaltinnimo Ilaahay dartii ah.

Kuwaasoo suuradda la magacaabayo riyada dhexdeeda ama qofka loo hadyaynayo.

Fasiraaddo waxyaabo kala geddisan

Tukaha: waxaa lagu fasiraa ninka faasiqa ah. Sidi (naxariisi korkiisa ha ahaatee) uu ku fasiray. Sida ku sugan xadiiskii Bukhaari iyo Muslim ay soo wariyeen.

Jiirka: waxaa lagu fasiraa gabadha faasiqadda ah, waayo waxa uu nebigu (naxariisi korkiisa ha ahaatee) u bixiyay fuwasiqa, sida ku sugan xadiiskii Bukhaari iyo Muslim ay soo wariyeen.

Feedhaha: Waxaa lagu fasiraa dumarka, (nabad galyo iyo naxariisi korkiisa ha ahaatee) waxa uu yidhi “*Qofka dumarka ahi waxa ay ka abuuran tahay feedh qolloocda*”. Sida ku sugan xadiiskii Bukhaari iyo Muslim.

Xadhigga lugaha lagu xidho: Waxaa lagu fasiraa sugnaan diinta lagu sugan yahay. Sida uu yidhi (nabad galyo iyo naxariisi korkiisa ha

Waad riyootee runtu waa maxay?

ahaatee). Waan jecelahay xadhigga, waayo waa sugnaan diinta lagu sugan yahay. Xadiis saxiixa Bukhaari.

Muftaaxa gacanta ku jira: Waxaa lagu fasiraa, xoolo, arsaaq, cisi, sharaf iyo karaamo.

Caanaha: Waxaa lagu fasiraa cilmiga. Sidoo kale (cws) mar kale waxa uu ku fasiray fadwada.

Gabadha: Gabadha Madaw ee timaha bulbulka ah leh, waxaa lagu fasiraa xanuun filiqsan. Sidi xadiiskii Bukhaari ku sugnaa ee nebigu (cws), uu ku riyooday gabadh dumar ah oo madaw timaheeduna bulbul yihiin. Waxa uuna ku fasiray xanuun filiqsan oo ku soo waajahan.

Roobka: waxaa lagu fasiraa hanuunka iyo cilmiga, sidi nebigu (cws) yidhi *“Ilaahay hanuunka iyo cilmiga uu ii soo diray, waa sidi roobka oo kale”*. Sida ku sugan xadiiskii Bukhari iyo Muslim ay soo weriyeen.

Geedka timirta: waxaa lagu fasiraa qofka muuminka ah ee wanaagsan. Sidi xadiiskii ay soo wariyeen Bukhaari iyo Muslim ee nebigu (cws) uu yidhi *“Geedaha waxaa ka mid ah geed aan caleentiisu dhicin, sida muslimka oo kale”*. Asxaabigii Ibnu Cumar ayaa gartay in ay tahay geedka timirta, laakiin kama uu jawaabin, halka uu markii danbe nebigu u sheegay in ay tahay geedka timirta.

Geela: Waxaa lagu fasiraa cisiga, halka adhiga lagu fasiro barakada, fardahanna lagu fasiro khayrka. Sida xadiiskii Ibnu Maaji soo weriyay uu ku sheegay.

Fasiraadda la isticmaalayo macnaha iyo qiyaasta

Dabka: Waxaa lagu fasiraa fitnada, waayo dabka iyo fitnadu waxay ka siman yihiin waxyeellada.

Xiddigiha: Waxaa lagu fasiraa culimada oo labaduba hanuun yihiin,

Birta iyohubka: Waxaa lagu fasiraa labadaba xoog.

Diigga: Waxaa lagu fasiraa nin meel higsanaya.

Maska: Waxaa lagu fasiraa cadaw ama ruux bidco la meeraysanaya.

Eyga: Waxaa lagu fasiraa cadaw itaal yar oo qaylo badan.

Dacawada: Waxaa lagu fasiraa nin xeelad badan oo khiyaamoole ah.

Geerida: Waxaa lagu hal-tabiyaa qofka oo toobbad keenay.

Safarka: Waxaa lagu macneeyaa xaal laga gudbayo meel kalana loo gudbayo.

Dhirta iyo midhaha: Waxaa lagu fasiraa shaqada.

Fasiraadda Magacyada

Fasiraadda magacu haddii uu riyada ku jiro, magacaas ayaa loo qaadaa. Haddii riyada uu ku jiro magaca Rashiid, waa toosin, haddii uu Axmed yahay na waa Xamdi, Siciid iyo Liibaan, waa badhaadhe, Naafic, wixii manfac leh, Salaax waa hanuun, Kaamil wixii dhammaystiran. Haddii aynu tusaale soo qaadanno; haddii lagu riyoodo qof xanuusanaya oo uu siyaartay ruux la yidhaa Saalim ama Saliim, Salmaan ama Sulaymaan waxaa lagu fasirayaa in qofkaasi xanuunka ka kacayo Allena ka badbaadinayo.

Cakiska iyo Qalibka

Cakiska iyo qalibku wuxuu ku xidhan yahay luuqadda lagu fasirayo riyada.

Tusaale:

Badda: Waxaa lagu fasiraa dabka, dabkana waxaa lagu fasiraa badda.

Toobinka: Waxaa lagu fasiraa shaanbadda, shaanbaddana toobinka.

Daacunka: Waxaa lagu fasiraa dagaal, dagaalkana daacuun.

Degdegga: Waxaa lagu fasiraa is qoomamayn, is qoomamayntana degdeg.

Caashaqa: Waxaa lagu fasiraa waalli, waallidana caashaq.

Guurka: Waxaa lagu fasiraa ganacsi, ganacsigana guur. Hadduu qof kuriyoodo isaga oo harraad qaba, riyadaasaa ka fiican in uu ku riyoodo

Waad riyootee runtu waa maxay?

isaga oo biyo ka dhergay. Riyada aad faqiirka tahay ayaa ka wanaagsan, riyada aad maal-qabeenka tahay. Riyada aad ku riyooto adiga oo lagu dilay ama lagu dhaawacay, ayaa ka wanaagsan ta aad wax disho ama aad wax dhaawacdo.

Afarta Qawaaciidoe Fasiraadda Riyada

Si aynu riyo u fasirno tallaabooyinbaa la qaadaa, sida kuwan aynu tusaalaha ku soo qadan doonno oo kale, culimada cilmigan ku hawllan in ka mid ahi na ay aaminsan yihiin.

1. Shaandhaynta riyada:

- ❖ Riyada wanaagsani waa riyada shuruuddeeda si habsami le u wadata. Waana bushaaro ama digniin, waana qayb ka mida 46kii qaybood ee nebinnimadda.
- ❖ Riyo xun oo waswaaska shaydaanka ah si uu u murugo geliyo qalbiga bini adamka hurdadana uga xumeeyo.
- ❖ Waa riyo la xidhiidha qofka nolol-maalmeedkiisa, sidii gabadh uu jecel yahay oo uu ku riyoodo.

2. Kala doorashada:

Kala doorashada oo micnaheedu yahay inaad gacanta ku qabato riyada, calaamadda ugu muhiimsan ood faraha ka qaaddo siyaadada iyo sheekooyinka aan muhiimadda kuu lahayn.

3. Is Hor Dhigidda Riyada:

Is hordhigidda riyada oo micnaheedu yahay inaad riyada aad soo shaandhaysay, ee aad calaamadda kala soo dhex baxday ayaad u soo bandhigaysaa shantii {5} tiir ee gundhigga u ahaa riyada:

Kitaabka Quraanka,
Sunnaha nebiga,
Macnaha iyo qiyaasta,
Magacyada,

Telegram:- Same Wade

Cagsiga iyo qaalibka,

4. Allifaadda:

Marka aad riyada shaandhaysay ee aad calaamad ka soo saartay, soona bandhigtay adiga oo adeegsanaya shantii tiir ee gundhigga kuu ahaa, ayaad u gudbaysaa tallaabaddan afraad ee allifaadda.

Tusaale Al Xajaaj Ibnu Yuusuf, ayaa wuxuu ku riyooday laba xuuralcayn inay samada kaga soo dageen, oo Xajaaj mid qabsaday. Middii kalena samada gadaal ugu laabatay.

Ibnu Siiriin oo ahaa Aabbaha fasiraadda riyooyinka ayaa fasiray riyadan uu ku riyooday Al Xajaaj. Waxa uuna ku micneeyay: waa laba dhibaatooyin oo midna uu goobjoog ka ahaan doono midna aanu ka ahaanayn markay dhacayaan.

Muddo ka dib Xajaaj wuxuu la kulmay dhibaataadii *Ibnu Al-Ashcas*, ee dhacday hilaaddii *81kii Hijrada* ee uu isku dayay inuu afgembiyo Xajaaj. Halka aanu la kulmin dhibaataadii *Ibnu Al Muhalab*, ee dhacday sannadkii *101 ee Hijrada* oo uu isku dayay inuu afgembiyo dawladdii *Umawayiinta* ee uu gadhwadeenka ka ahaa *Yasiid Ibnu Cabdimaalig*.

Sharrax kooban: Ibnu Siiriin riyadii uu soo shaandheeyey waxaa u caddaatay in ay u qalanto in la fasiro riyadani.

- ❖ Calaamad ayaa uu kala soo baxay, calaamaddaas oo ah labadii Xuuralcayn ee midna uu gacanta ku dhigay midina samadii ku laabatay.
- ❖ Bandhiggii oo gundhiggeedu yahay sunnaha. Horena dumarka aynu ugu soo fasinay fitno iyo dhibaato, nebigu (cws) yidhi xadiiskii Bukhaari iyo Muslim ku sugnaa ee ahaa “*Idin kagamaan tegin dabaday, fitno iyo dhibaato ragga uga daran dumarka*”

Sharraxa 2^{aad}:

Waad riyootee runtu waa maxay?

Nin baa u yimi Ibnu Siiriin, waxa uu ku yidhi “*Gabadh baan doonay, waxa anan ku riyooday, in ay tahay gabadh gaaban oo madaw*”. Ibnu Siriin waxa uu ku fasiray riyadaa, in madawga gabadhu uu yahay maalkeeda iyo xoolaheeda. Gaabnideeduna tahay cimrigeeda. Muddo ka dib waxaa geeriyootay gabadhii ninku doonay ee ooridiisa ahayd. Halkaasi oo uu ku dhaxlay maalkeedii loogu fasiray madawgeeda.

Ibnu Siiriin markii uu riyadii soo shaandheeyay ayaa uu laba calaamadood kala baxay, kuwaas oo kala ahaa; gaabnideedii iyo madawgeedii. Labadan qiso waxa ay soo hoos gelayaan calaamadiihii hore aynu u soo xusnay, tii ahayd, macnaha iyo qiyaaska.

Maahmaah Carbeedbaa tidhaa, “*Hebel madaw badan buu leeyahay*” oo xikmaddeedu tahay, hebel maal badan ama xoolo badan ayuu leeyahay.

Ibnu Siiriin waxa uu is barbar dhigay, qofka jidhkiisa dherer iyo gaabni in ay la mid tahay cimrigiisa, dherer iyo gaabni. Haddii ruuxu gaaban yahay sida Ibnu Siiriin uu qabo, cimrigeedu uu gaaban yahay, halka ka dheer uu leeyahay cimrigiisu uu dheer yahay.

Sharraxa 3^{AAD}:

Ninbaa Ibnu Siiriin u yimi waxa uuna ku yidhi “*Waxa aan ku riyooday aniga oo taash dahab ka samaysani madaxa ii saaran yahay*” Ibnu Siiriin waxa uu ugu hal-tebiyay “*Ilaahay ka cabso, aabbahaa waxa uu joogaa dal qurbe ah waanu indho beelay. Waxa uu doonaya in aad u tagto*”. Ninkii ayaa jeebka gacanta geliyay, waxa uuna ka soo saaray, warqad uga timi Aabbihii. Aabbihii oo uga wararmaya in uu ku indho beelay dal shisheeye, kana codsanaya in uu u yimaaddo soona eego. Riyadan Ibnu Siiriin saddex calaamadood ayaa uu ka helay: madaxa, taashka iyo Dahabka.

Madax: waxa uu ku fasiray madaxnimo, waayo qof walba Aabbihii ayaa madax u ah.

Telegram:- Same Wade

Waad riyootee runtu waa maxay?

Taashka: waxa uu ku fasiray, in dadka aan Carabta ahayn xidhan jireen wakhtigaa sida Ruum iyo Furus oo uu joogay Aabbihii.

Dahabka: Halka uu dahabku Af Carbeedka noqonayo “Dahabu basar” oo micnaheedu yahay indho-waa’ ama indho-beelid, intaas oo arrimood marka uu isku keenay waxaa uga soo baxay fasiraadda.

CUTUBKA TODDOBAAD

Fasiraadda Riyooyinka Cusub

Waxa aan uga jeedaa fasiraadda riyooyinka cusub, riyooyin iyo qalab aan jirin wakhtigii nebiga, saxaabada iyo Ibnu Siriin raggii la midka ahaa.

Kombuyuutarka: Waxaa lagu fasirayaa gabadh marka ay tahay guur. Xaaskana waxaa loogu fasiraa uur. Halka mar kale lagu fasiro cilmi iyo shaqo cusub. Waxa kale oo lagu fasiraa hawlaha oo si wanaagsan u socda. Haddii ruux uu ku riyoodo in uu computerkii ka jabayna waa masiibo iyo culays, qofku waxa uu higsanayayna aanu gaadhayn.

Tallaagadda: waxaa lagu fasiraa inanta shaaqiyadda ah ama shaqaalaha.

Qalinka: waxaa lagu fasiraa aqoonta iyo cilmiga badan.

Saacadda: waxaa lagu fasiraa, ballan soo dhawaatay.

Taleefanka iyo Farriinta: waxaa lagu fasiraa warar kala geddisan oo la maqli doono.

Sharraxa Riyada Taleefanka iyo Farriinta:

Hadduu Talifoonku cagaar yahay waxaa lagu fasirayaa, war wanaagsan. Halka ka madawna lagu fasiro in uu war muhiim ah xanbaarsan yahay. Hadduu cad yahayna, waxaa lagu fasiraa in uu yahay war xiiso leh. Midabka huruudda hadduu yahay waxaa lagu fasirayaa xanuun. Halka ka casna lagu fasiro guur iyo badhaadhe.

Baabuurka: Haddii ruux ku riyoodo baabuur, waa safar Iyo nolol guur.

Diyaaradda: Diyaaradda waxaa lagu fasiraa safarka iyo sarraynta.

Sidoo kale tawakulka Ilaahay lagu tala-saarto.

Doonnida: Doonnida waxaa lagu fasiraa badbaado iyo farash dhanka Alle ah. Marka ay doonnidu weyna tahayna waxaa fara badanaya manfaceeda iyo khayrkeeda.

Dayax Gacmeedka: Dayax-gacmeedka waxaa lagu fasiraa warar aan hore loo maqal oo soo fool leh.

Muuq Baahiyaha (Tv): waxaa lagu fasiraa lammaane, uur, shaac-bixid iyo caannimo.

- Dhugduglay (Mootada):** waxaa lagu fasiraa, shaqo iyo ganacsi.
- Baaskiil:** waxaa lagu fasiraa jidhka, muruqa iyo jiidhka xooggiisa.
- Cadarka:** waxaa lagu fasiraa warka wanaagsan, saaxiibka wanaagsan, khaatumada wanaagsan iyo tartanka wanaagsan.
- Suuqyada:** waxa lagu fasiraa xoolo iyo nolol cusub.
- Taangiga Biyaha:** waxaa lagu fasiraa sadaqada iyo nolosha deggen.
- Xadhkaha Laydhka:** waxaa lagu fasiraa qaraabo-xidhiidhinta.
- Qaboojiyaha:** waxaa lagu fasiraa lammaane iyo ubadkooda iyo nolosha wanaagsan.
- Batrootka Iyo Gaasta:** Shidaalka gawaadhida iyo gaasta waxaa lagu fasiraa in ay calaamad u tahay dhaqaalaha iyo safarka.
- Riyada Cajaladda CD-ga:** waxaa lagu fasiraa in ay tahay sir la qarinyo hadday wanaagsan tahay iyo hadday xun tahay ba.
- Kabaha:** Kabaha waxaa lagu fasiraa lammaane ul iyo diir ah, sidoo kale ubadkooda iyo cibaado Ilaahay loogu dhawaanayo.
- Furayaasha:** Furayasha waxaa lagu fasiraa dhaqaalaha iyo ubadka.
- Dab damiska:** Dab-damiska waxaa lagu fasiraa in uu yahay khilaaf soo af-meermay iyo belaayo dhammaatay.
- Dhooliga (Ambalaaska):** Dhooliga ama ambalaska waxaa lagu fasiraa qof dadka wanaagga la jecel.
- Cusbitaalka:** Cisbitaalka waxaa lagu fasiraa caafimaadka iyo baxnaano.
- Timo-Jaraha:** Timo jaraha ama Rayiislaha waxaa lagu fasiraa xajka iyo cumrada.
- Joornaalka:** Joornaalka waxaa lagu fasiraa warar kala geddisan: ka wanaagsan iyo ka xunba.
- Mal-Qaacadaha (Qaaddo):** Mal-qaacadaha waxaa lagu fasiraa guur.
- Madbacaddaha:** Madbcadaha waxa lagu fasiraa cilmiga iyo aqoonta.
- Kamaradaha:** Waxa lagu fasiraa xasuusta.
- Muraayadaha (Okiyaalaha):** Muraayadaha waxaa lagu fasiraa cilmiga.
- Tareenka:** Tareenka waxa lagu fasiraa safarka iyo axwaasha oo is beddesha.
- Dahabka:** waxaa lagu fasiraa guurka awlaadda iyo dhaqaalaha.

Internet Café: Internetka waxa lagu fasiraa inuu calaamad u yahay khayrka, sharka.iyo saaxiibka xun.

Qasaaladda: waxaa lagu fasiraa guurka iyo shaaqiyadda

Saxanka (Dish): Saxanka waxaa lagu fasiraa wakhti-lumis iyo xoolo-waa.

Hotel: Waxaa lagu fasiraa safarka.

Sigaarka: Waxaa lagu fasiraa dhibaataada.

Miisaanka: Waxaa lagu fasiraa caddaaladda iyo qaaddiga.

Kubbadda: Waxaa lagu fasiraa camal la'aan iyo wakhti-lumis.

Shaxda (jaska): Waxaa lagu fasiraa khiyaamo, ismaan-dhaaf, xasad iyo dhibaato.

Dawaarka: Waxaa lagu fasiraa hoggaaminta,

Baaskooladda: Haddii uu gacanta ruux ku hayo waa xoog, guul iyo adadayg. Haddii uu cid ku dhufanayo waa il, ka imanaysa qofkaa wax ridaya.

Sawir-qaade (Photographer): waxaa lagu fasiraa xaqiiqo jirtay oo la beddelay ama diinta oo laga gaabiyay.

Maqaska: Waxaa lagu fasiraa dhibaatooyin iyo arrimo la isku khilaafsan yahay.

Dhar la wadhay: Waxa lagu fasiraa inay tahay sir dibadda la soo dhigay.

Fasiraadda Riyooyinka Dadka

Dadku waxa ay u kala baxaan da'o kala geddisan. Sidaa oo ay tahay, riyooyinkoodu si isku mid ah uma wada dhacan, oo mid waliba fasiraad gaar ah ayaa uu leeyahay. Riyadu haddii ay qofka ku socoto waa la fasirayaa. Haddii kale waxaa loo fasirayaa qof uu dhalay ama walaalkii, ama waalidkii, ama se ruux magaca ay ka siman yihiin ama sidoo kale qof u eeg.

Dadku waa saddex qaybood mid uun

Ilmo yar oo dhashay, waxa lagu fasiraa murugo, werwer, sidii Maryan uga warwartay ilmihii ay dhashay Ciise (calayhi salaam). Waxaana lagu

fasiraa cadaw sidii nebi Muuse, markii uu Fircoon gurigiisa galay uu cadawgiisa u noqday. Isaga oo ilmo yar ah.

❖ **Ilma yar:** oo ah da'da u dhaxaysa 2 ilaa 4, oo aad ku aragto riyada waxaa lagu fasiraa hammi ama murugo. Sidoo kale waxa uu calaamad u yahay raaxo. Maxaa yeelay ilmaha 5 jirka ahi, waxa uu ruuxa ka caawiyaa adeegga shaqo in ka mid ah, sida dirashada. Sidaasi si le'eg, waxaa lagu fasiraa bushaaro. Haddii lagu riyoodo ilmihii oo baaluqay waxaa lagu fasiraa cadaw.

❖ **Dhallinyarada:** waxaa lagu fasiraa cadaw, waayo dheg uma dhigaan ciddii wax u sheegaysa ee ka waaninaysa waxa xun.

❖ **Haddii riyo lagu arko ruux da' weyn:** Waxay calaamad u tahay oo lagu fasiraa in uu yahay qofka riyooday awoowgii. Cirradu haddii ay ku badan tahayna, waxa ay calaamad u tahay khayrka iyo wanaagga.

❖ **Dumarka:** haddii riiyada lagu arko waxaa lagu fasiraa, farash iyo raaxo, kuna xidhan kolba quruxdeedu inta ay gaadhsiisan tahay. Sidoo kale waxaa lagu fasiraa haweenka, adduunyada. Waa kii nebiguna lahaa xadiiskii Imaamu Axmed ka soo weriyay "*Adduunyada waxaan ugu jecelahay dumarka iyo cadarka*". Mar kale waxaa dumarka lagu fasiraa Fitno, sidii nebiga laga soo weriyay kuna saxiixan Xadiiskii Imaamu Muslim, ee ahaa "*Fitnadii ugu horraysay ee reer bani Israa'iil dumarka ayay ahayd*".

Macooyada: Waxaa lagu fasiraa adduunyada oo dhammaad ah ama ruuxaan faa'iido badan lahayn.

Qofku hadduu ku riyoodo cid aanu geyin isaga oo u galmoonaya, sida hooyadii, walaashii, eedadii, habaryartii iwm waxaa lagu fasiraa xajka. **Haddii uu nin ku riyoodo isaga oo uurleh:** waxaa lagu fasiraa hammi, murugo, walbahaar, hadal xun iyo cadaw guriga u dhex fadhiya.

Fasiraadda Midabadda

Caddaanka: waxaa lagu fasiraa soon iyo shaki ka saar. Sidoo kale waxaa lagu fasiraa hanuuninta iyo xaqa oo lagu adkaado. Sida ay inoo sheegayso suuratu Al-Cimraan, Aayaddeeda 106^{aad}.

يَوْمَ تَبْيَضُّ وُجُوهُ وَتَسْوَدُّ وُجُوهُ فَأَمَّا الَّذِينَ اسْوَدَّتْ وُجُوهُهُمْ أَكْفَرْتُمْ بَعْدَ
إِيمَانِكُمْ فَدُوقُوا الْعَذَابَ بِمَا كُنْتُمْ تَكْفُرُونَ

Sidoo kale, mar labaad waxaa lagu micneeyaa, gargaar dhanka Alle ka yimaadda. Sida ku cad, suuratu Daaha, Aayaddeeda 22^{aad}.

وَاضْمُمْ يَدَكَ إِلَى جَنَاحِكَ تَخْرُجَ بَيْضًا مِنْ غَيْرِ سُوءٍ آيَةً أُخْرَى

Madawga: waxaa lagu micneeyaa, qofka xidhan in uu sharaf helayo, wixii aan lebbis ahayn. Midabkaasi riyada uma fiicna. Gaar ahaan wejiga. Sida ay sheegayso suuradda Al-Cimraan aayaddeeda 106^{aad}.

يَوْمَ تَبْيَضُّ وُجُوهُ وَتَسْوَدُّ وُجُوهُ فَأَمَّا الَّذِينَ اسْوَدَّتْ وُجُوهُهُمْ أَكْفَرْتُمْ بَعْدَ
إِيمَانِكُمْ فَدُوقُوا الْعَذَابَ بِمَا كُنْتُمْ تَكْفُرُونَ

Mar kale waxaa madawga lagu fasiraa, uur inan lagu sido. Sida ku cad suuratu Sukhruf Aayaddeeda 17^{aad}.

وَإِذَا بُشِّرَ أَحَدُهُمْ بِمَا ضَرَبَ لِلرَّحْمَنِ مَثَلًا ظَلَّ وَجْهُهُ مُسْوَدًّا وَهُوَ كَظِيمٌ

Sidoo kale waxaa madawga lagu fasiraa, guul iyo albaabbada khayrka ah. Sida xadiiskii saxiixu Muslim ku sugnaa inoo sheegayo ee Jaabir yidhi “*Maalintii Maka la furanayay nebigoo cumaamad madaw xidhan baan arkay*”.

Huruud/jaalle (Yellow) waxaa lagu fasiraa liibaan iyo oori wanaagsan, ganacsi barako badan, sida ku cad suuratu Baqra aayaddeeda 69^{aad}.

قَالُوا ادْعُ لَنَا رَبَّكَ يُبَيِّنْ لَنَا مَا لَوْثُهَا قَالَ إِنَّهُ يَقُولُ إِنَّهَا بَقَرَةٌ صَفْرَاءُ فَاقِعٌ لَوْثُهَا
تَسُرُّ النَّاظِرِينَ

Sidoo kale waxaa lagu fasiraa fitnada iyo mushkiladaha. Sida ku Xusan Suuradda Mursalaad, aayaddeeda 33^{aad}.

كَأَنَّهُ جِمَالَتٌ صُفْرٌ

Mar kale waxa lagu micneeyaa xaqiiqada adduunyada sida ay inoo sheegayso suuradda Xadiid aayaddeeda 20^{aad}.

اعْلَمُوا أَنَّمَا الْحَيَاةُ الدُّنْيَا لَعِبٌ وَلَهُوَ وَزِينَةٌ وَتَفَاخُرٌ بَيْنَكُمْ وَتَكَاثُرٌ فِي الْأَمْوَالِ وَالْأَوْلَادِ
كَمَثَلِ غَيْثٍ أَعْجَبَ الْكُفَّارَ نَبَاتُهُ ثُمَّ يَهِيجُ فَتْرَاهُ مُصْفَرًّا ثُمَّ يَكُونُ حُطَامًا وَفِي الْآخِرَةِ
عَذَابٌ شَدِيدٌ وَمَغْفِرَةٌ مِّنَ اللَّهِ وَرِضْوَانٌ وَمَا الْحَيَاةُ الدُّنْيَا إِلَّا مَتَاعُ الْغُرُورِ

Buluuggu: Waa midabka ugu xun ee lagu riyoodo. Sida ku cad, suuratu Daaha aayaddeeda 102^{aad}.

يَوْمَ يُنْفَخُ فِي الصُّورِ وَنَحْشُرُ الْمُجْرِمِينَ يَوْمَئِذٍ زُرْقًا

Waxaa mar kale lagu micneeyaa sixirka, falka, munaafaqnimada, gaalnimada iyo fitnada. Sida ku cad, suuratu Daaha Aayaddeeda 102^{aad}.

يَوْمَ يُنْفَخُ فِي الصُّورِ وَنَحْشُرُ الْمُجْرِمِينَ يَوْمَئِذٍ زُرْقًا

Casaanka: Midabkan cas waxaa lagu fasiraa, farxadda iyo quruxda, khaasatan waa midab dumarka u fican. Sidoo kale shayaadiintu jeceshahay. Mar kale waxaa lagu fasiraa aqoonta badan, khilaafka badan iyo xoog badan. Sida ku cad suuratu Faadir aayaddeeda 27^{aad}.

أَلَمْ تَرَ أَنَّ اللَّهَ أَنْزَلَ مِنَ السَّمَاءِ مَاءً فَأَخْرَجْنَا بِهِ ثَمَرَاتٍ مُّخْتَلِفًا أَلْوَانُهَا وَمِنَ الْجِبَالِ
جُدَدٌ بَيْضٌ وَحُمْرٌ مُّخْتَلِفٌ أَلْوَانُهَا وَغَرَابِيبُ سُودٌ

Nebigana hadal baa ka soo arooray ahaa in raggu aanay xidhan, midabka casaanka ah.

Akhtar (Cagaar): midabkan cagaarka waxaa lagu fasiraa, qalbi wanaagsan, guur wanaagsan iyo khaatumo wanaagsan. Sida ku cad suuratu Iinsaan, aayaddeeda. 21^{aad}.

عَالِيَهُمْ ثِيَابٌ سُنْدُسٍ خُضْرٌ وَإِسْتَبْرَقٌ وَحُلُّوا أَسَاوِرَ مِنْ فِضَّةٍ وَسَقَاهُمْ رَبُّهُمْ شَرَابًا طَهُورًا

Dameeriga: midabkan waxaa lagu fasiraa camalka aan faa'iidada lahayn.

Fasiraadda Nambarada

Waxa aad ogaataa, nambarada lagu arko hurdadu In ay yihiin calaamado la fasiro oo laga heli koro Quraanka, Sunnaha, Macnaha iyo Luuqadda.

0 (Eber): Eberka waxaa lagu fasiraa, khasaaraha iyo khayrka oo la iska afjaro. Sida uu nebigu yidhi (Cws) Xadiiskii Imaamu Axmed soo weriyayna ku sugnaa, ee ahaa “*Ilaahay waa Deeqsi, waxa uu ka xishoodaa addoonkiisu hadduu gacmaha u taago in iyaga oo eber ah ama madhan uu soo celiyo*”.

1 (Hal) numerkan kowaad: waxaa lagu fasiraa tawxiidka, sida ku cad Suuratu Baqra, aayaddeeda 163^{aad}.

وَإِلَهُكُمْ إِلَهٌ وَاحِدٌ لَا إِلَهَ إِلَّا هُوَ الرَّحْمَنُ الرَّحِيمُ

Sidoo kale waxaa lagu fasiraa xasadka iyo isha, sida ku cad suuratu Yuusuf aayaddeeda 67^{aad}.

وَقَالَ يَا بَنِيَّ لَا تَدْخُلُوا مِنْ بَابٍ وَاحِدٍ وَادْخُلُوا مِنْ أَبْوَابٍ مُتَفَرِّقَةٍ وَمَا أُغْنِي عَنْكُمْ مِنَ اللَّهِ مِنْ شَيْءٍ إِنْ الْحُكْمُ إِلَّا لِلَّهِ عَلَيْهِ تَوَكَّلْتُ وَعَلَيْهِ فَلْيَتَوَكَّلِ الْمُتَوَكِّلُونَ

Mar kale waxaa lagu fasiraa, in uu qofku caan ku noqdo cilmi iyo dhaqaale, siday inoo sheegayso suuratu Ala-Cimraan aayaddeeda 18^{aad}.

شَهِدَ اللَّهُ أَنَّهُ لَا إِلَهَ إِلَّا هُوَ وَالْمَلَائِكَةُ وَأُولُوا الْعِلْمِ قَائِمًا بِالْقِسْطِ لَا إِلَهَ إِلَّا هُوَ الْعَزِيزُ
الْحَكِيمُ

Sidoo kale waxaa lagu lagu hal-tabiyaa safarka xun, sidii sheegay xadiiskii Imaamu Axmed ku xusnaa ee nebigu (cws) yidhi “*Qofka keligii safraa waa shaydaan*”. Sidoo kale waxa lagu fasiraa ninku in uu guursanayo xaas kali ah, siday inoo sheegayso Suuratu Nisaa, aayaddeeda 3^{aad}.

وَإِنْ خِفْتُمْ أَلَّا تُقْسِطُوا فِي الْيَتَامَىٰ فَانكِحُوا مَا طَابَ لَكُمْ مِنَ النِّسَاءِ مَنَّىٰ وَثَلَاثَ وَرُبَاعَ
فَإِنْ خِفْتُمْ أَلَّا تَعْدِلُوا فَوَاحِدَةً أَوْ مَا مَلَكَتْ أَيْمَانُكُمْ ذَلِكَ أَدْنَىٰ أَلَّا تَعُولُوا

2 (Laba): waxaa lagu fasiraa, guul iyo saaxiib wanaagsan, diinta oo laga difaaco xumaha. Waxaa daliil u ah Suuratu, Tawba aayaddeeda 14^{aad}.

قَاتِلُوهُمْ يُعَذِّبُهُمُ اللَّهُ بِأَيْدِيكُمْ وَيُخْزِهِمْ وَيَنْصُرْكُمْ عَلَيْهِمْ وَيَشْفِ صُدُورَ قَوْمٍ مُّؤْمِنِينَ
Sidoo kale waxaa lagu fasiraa Quraanka oo la xafido, sida ku cad Suuratu Xijir, aayaddeeda 87^{aad}.

وَلَقَدْ آتَيْنَاكَ سَبْعًا مِنَ الْمَثَانِي وَالْقُرْآنَ الْعَظِيمَ

Mar kale waxaa lagu fasiraa, xoolaha badan. Sida ku cad Suuratu Ancaam aayaddeeda 143^{aad}.

ثَمَانِيَةَ أَزْوَاجٍ مِّنَ الضَّأْنِ اثْنَيْنِ وَمِنَ الْمَعْزِ اثْنَيْنِ قُلْ الذَّكَرَيْنِ حَرَّمَ أُمَّ
الْأُنثَيَيْنِ أَمَّا اشْتَمَلَتْ عَلَيْهِ أَرْحَامُ الْأُنثَيَيْنِ نَبَوُونِي بِعِلْمٍ إِنْ كُنْتُمْ صَادِقِينَ

Waxaa kale oo lagu fasiraa qofka oo laba dumar ah guursada.

3. (Saddex): waxa lagu fasiraa, guul, sida ku cad suuratu Yaasiin aayaddeeda 14^{aad}.

إِذْ أَرْسَلْنَا إِلَيْهِمُ اثْنَيْنِ فَكَذَّبُوهُمَا فَعَزَّزْنَا بِثَالِثٍ فَقَالُوا إِنَّا إِلَيْكُمْ مُّرْسَلُونَ

Sidoo kale waxaa lagu fasiraa iska ilaalinta shirkiga iyo raacidda dadka xun. Waxaa daliil inoo ah suuratu Al Maa'ida, aayaddeeda 73^{aad}.

لَقَدْ كَفَرَ الَّذِينَ قَالُوا إِنَّ اللَّهَ ثَلَاثٌ ثَلَاثَةٌ وَمَا مِنْ إِلَهٍ إِلَّا إِلَهٌ وَاحِدٌ وَإِنْ لَمْ يَنْتَهُوا عَمَّا يَقُولُونَ لَيَمَسَّنَّ الَّذِينَ كَفَرُوا مِنْهُمْ عَذَابٌ أَلِيمٌ

Waxa kale oo lagu micneeyaa bidcooyinka oo laga fogaado. Waxaa kale oo lagu fasiraa safarka wanaagsan, ee barakaysan. Sida Xadiiskii Abu Daa'uud soo weriyay ee uu nabigu ugu duceeyay saddexda qof ee wada safra. Waxaa lagu fasiraa saddex dumar ah oo la guursanayo, sida ku cad suuratu Nisaa aayaddeeda 3^{aad}.

وَإِنْ خِفْتُمْ أَلَّا تُقْسِطُوا فِي الْيَتَامَىٰ فَانكِحُوا مَا طَابَ لَكُمْ مِنَ النِّسَاءِ مَنَّىٰ وَثَلَاثَ وَرُبَاعَ فَإِنْ خِفْتُمْ أَلَّا تَعْدِلُوا فَوَاحِدَةً أَوْ مَا مَلَكَتْ أَيْمَانُكُمْ ذَلِكَ أَدْنَىٰ أَلَّا تَعُولُوا

4. (Afar): Waxaa lagu fasiraa dhawaanshaha Ilaahay loo dhaw yahay, iyo ilaalinta uu Alle ilaalinayo qofka riyada ku riyooday. Sida ay inoo sheegayso Suuradda Al Mujaadalah, aayaddeeda 7^{aad}.

أَلَمْ تَرَ أَنَّ اللَّهَ يَعْلَمُ مَا فِي السَّمَاوَاتِ وَمَا فِي الْأَرْضِ مَا يَكُونُ مِنْ نَجْوَىٰ ثَلَاثَةٍ إِلَّا هُوَ رَابِعُهُمْ وَلَا خَمْسَةٍ إِلَّا هُوَ سَادِسُهُمْ وَلَا أَدْنَىٰ مِنْ ذَلِكَ وَلَا أَكْثَرَ إِلَّا هُوَ مَعَهُمْ أَيْنَ مَا كَانُوا ثُمَّ يُنَبِّئُهُمْ بِمَا عَمِلُوا يَوْمَ الْقِيَامَةِ إِنَّ اللَّهَ بِكُلِّ شَيْءٍ عَلِيمٌ

Waxaa kale oo lagu fasiraa saaxiibtinnimadda, sida ku cad suuratu Alkahaf aayaddeeda 22^{aad}.

سَيَقُولُونَ ثَلَاثَةٌ رَابِعُهُمْ كَلْبُهُمْ وَيَقُولُونَ خَمْسَةٌ سَادِسُهُمْ كَلْبُهُمْ رَجْمًا بِالْغَيْبِ وَيَقُولُونَ سَبْعَةٌ وَثَامِنُهُمْ كَلْبُهُمْ قُلْ رَبِّي أَعْلَمُ بِعِدَّتِهِمْ مَا يَعْلَمُهُمْ إِلَّا قَلِيلٌ سَيَقُولُونَ ثَلَاثَةٌ رَابِعُهُمْ كَلْبُهُمْ وَيَقُولُونَ خَمْسَةٌ سَادِسُهُمْ كَلْبُهُمْ رَجْمًا بِالْغَيْبِ وَيَقُولُونَ سَبْعَةٌ وَثَامِنُهُمْ كَلْبُهُمْ قُلْ رَبِّي أَعْلَمُ بِعِدَّتِهِمْ مَا يَعْلَمُهُمْ إِلَّا قَلِيلٌ فَلَا تَمَارِ فِيهِمْ إِلَّا مِرَاءً ظَاهِرًا وَلَا تَسْتَفْتِ فِيهِمْ مِنْهُمْ أَحَدًا

Waxaa kale oo lagu fasiraa quraankoo la xiftiyo iyo fiqiga oo la barto. Sida xadiiskii Bukhaari ku sugnaa ee Nabigu yidhi (Cws), "Quraanka

saxaabadii afar ka mid ah ka barta”. Sidoo kale waxaa lagu fasiraa qofka inta cunto iyo cabitaan ee ku filan, sida xadiiskii Bukhaari ku sugnaa, ee yidhi “Cuntada saddex qof loogu talagalay afar ku filan”.

5. (shan): shan waxaa lagu fasiraa, saaxiibtinnimada, sida ku cad suuratu Kahaf aayaddeeda 22^{aad}.

سَيَقُولُونَ ثَلَاثَةٌ رَّابِعُهُمْ كَلْبُهُمْ وَيَقُولُونَ خَمْسَةٌ سَادِسُهُمْ كَلْبُهُمْ رَجْمًا بِالْغَيْبِ وَيَقُولُونَ سَبْعَةٌ وَثَامِنُهُمْ كَلْبُهُمْ قُلْ رَبِّي أَعْلَمُ بِعَدَّتِهِمْ مَّا يَعْلَمُهُمْ إِلَّا قَلِيلٌ فَلَا تُمَارِ فِيهِمْ إِلَّا مِرَاءً ظَاهِرًا وَلَا تَسْتَفْتِ فِيهِمْ مِنْهُمْ أَحَدًا

Mar kale waxaa lagu fasiraa ninka iyo naagta kala tegaya, sida ku cad suuratu Al Nuur aayaddeeda 7^{aad}.

وَالْحَامِسَةُ أَنَّ لَعْنَتَ اللَّهِ عَلَيْهِ إِنْ كَانَ مِنَ الْكَاذِبِينَ

Waxaa kale e lagu micneeya cibaadada iyo salaatu-laylka, sidii sheegayo xadiiskii Imaamu Axmed soo wariyay e Umu Salama tidhi “Nebigu wuxuu tukan jiray shan ragcadoo, oo witrifa” Waxaa lagu fasiraa oo kale rumaynta Qaybka la rumeeyo. Sidii nabigu sheegay e ku cad xadiiskii Bukhaari soo weriyay ee ahaa “Muftaaxyada qayb kuwaa shan”.

6. (lix): waxaa lagu fasiraa, Dhawaanshaha Rabbiga loo dhaw yahay, sida ku cad suuratu Mujaadala, aayaddeeda 7^{aad}.

أَلَمْ تَرَ أَنَّ اللَّهَ يَعْلَمُ مَا فِي السَّمَاوَاتِ وَمَا فِي الْأَرْضِ مَا يَكُونُ مِنْ نَجْوَى ثَلَاثَةٍ إِلَّا هُوَ رَابِعُهُمْ وَلَا خَمْسَةٍ إِلَّا هُوَ سَادِسُهُمْ وَلَا أَدْنَى مِنْ ذَلِكَ وَلَا أَكْثَرَ إِلَّا هُوَ مَعَهُمْ أَيْنَ مَا كَانُوا ثُمَّ يُنَبِّئُهُمْ بِمَا عَمِلُوا يَوْمَ الْقِيَامَةِ إِنَّ اللَّهَ بِكُلِّ شَيْءٍ عَلِيمٌ

Waxa kale oo lagu fasiraa, saaxiibtinnimada, sida ku xusan Suuratu AlKahaf aayaddeeda 22^{aad}.

سَيَقُولُونَ ثَلَاثَةٌ رَّابِعُهُمْ كَلْبُهُمْ وَيَقُولُونَ خَمْسَةٌ سَادِسُهُمْ كَلْبُهُمْ رَجْمًا بِالْغَيْبِ وَيَقُولُونَ سَبْعَةٌ وَثَامِنُهُمْ كَلْبُهُمْ قُلْ رَبِّي أَعْلَمُ بِعِدَّتِهِمْ مَا يَعْلَمُهُمْ إِلَّا قَلِيلٌ فَلَا تُمَارِ فِيهِمْ إِلَّا مِرَاءً ظَاهِرًا وَلَا تَسْتَفْتِ فِيهِمْ مِنْهُمْ أَحَدًا

Sidoo kale waxaa lagu fasiraa, caddaaladda iyo dhaxalka, sida ay inoo sheegayso suuratu Nisaa aayaddeeda 11^{aad} يُوصِيكُمُ اللَّهُ فِي أَوْلَادِكُمُ لِلذَّكَرِ ۖ لِلْأُنثَىٰ ۖ فَإِنْ كُنَّ نِسَاءً فَوْقَ اثْنَتَيْنِ فَلَهُنَّ ثُلُثَا مَا تَرَكَ ۖ وَإِنْ كَانَتْ وَاحِدَةً فَلَهَا النِّصْفُ ۖ وَلِأَبَوَيْهِ لِكُلِّ وَاحِدٍ مِّنْهُمَا السُّدُسُ مِمَّا تَرَكَ إِنْ كَانَ لَهُ وَلَدٌ ۖ فَإِنْ لَمْ يَكُنْ لَهُ وَلَدٌ وَوَرِثَهُ أَبَوَاهُ فَلِأُمِّهِ الثُّلُثُ ۖ فَإِنْ كَانَ لَهُ إِخْوَةٌ فَلِأُمِّهِ السُّدُسُ ۖ مِنْ بَعْدِ وَصِيَّةٍ يُوصِي بِهَا أَوْ دَيْنٍ ۖ آبَاؤُكُمْ وَأَبْنَاؤُكُمْ لَا تَدْرُونَ أَيُّهُمْ أَقْرَبُ لَكُمْ نَفَعًا ۖ فَرِيضَةٌ مِنَ اللَّهِ ۗ إِنْ اللَّهُ كَانَ عَلِيمًا حَكِيمًا

7. (Toddaba): Waxaa lagu fasiraa saraynta, sida ku cad, Suuradda Al-Baqara, aayaddeeda 29^{aad}.

هُوَ الَّذِي خَلَقَ لَكُمْ مَّا فِي الْأَرْضِ جَمِيعًا ثُمَّ اسْتَوَىٰ إِلَى السَّمَاءِ فَسَوَّاهُنَّ سَبْعَ سَمَاوَاتٍ وَهُوَ بِكُلِّ شَيْءٍ عَلِيمٌ

Waxaa kale oo lagu fasiraa Xash iyo cimro, sida inoo sheegayso suuratu Baqra, aayaddeeda 196^{aad}.

وَأَتِمُّوا الْحَجَّ وَالْعُمْرَةَ لِلَّهِ فَإِنْ أُخْصِرْتُمْ فَمَا اسْتَيْسَرَ مِنَ الْهَدْيِ وَلَا تَحْلِقُوا رُءُوسَكُمْ حَتَّىٰ يَبْلُغَ الْهَدْيُ مَحَلَّهُ فَمَنْ كَانَ مِنْكُمْ مَّرِيضًا أَوْ بِهِ أَذًى مِّن رَّأْسِهِ فَفِدْيَةٌ مِّن صِيَامٍ أَوْ صَدَقَةٍ أَوْ نُسُكٍ فَإِذَا أَمِنْتُمْ فَمَنْ تَمَتَّعَ بِالْعُمْرَةِ إِلَى الْحَجِّ فَمَا اسْتَيْسَرَ مِنَ الْهَدْيِ فَمَنْ لَمْ يَجِدْ فَصِيَامُ ثَلَاثَةِ أَيَّامٍ فِي الْحَجِّ وَسَبْعَةٍ إِذَا رَجَعْتُمْ تِلْكَ عَشْرَةٌ كَامِلَةٌ ذَلِكَ لِمَنْ لَمْ يَكُنْ أَهْلَهُ حَاضِرِي الْمَسْجِدِ الْحَرَامِ وَاتَّقُوا اللَّهَ وَاعْلَمُوا أَنَّ اللَّهَ شَدِيدُ الْعِقَابِ

Sidoo kale waxaa lagu micneeyaa barakada, xoolaha iyo sadaqada, sida aynu ku aragno suuratu Al Baqara, aayaddeeda, 261^{aad}.

مَثَلُ الَّذِينَ يُنْفِقُونَ أَمْوَالَهُمْ فِي سَبِيلِ اللَّهِ كَمَثَلِ حَبَّةٍ أَنْبَتَتْ سَبْعَ سَنَابِلَ فِي كُلِّ سُنبُلَةٍ مِّائَةٌ حَبَّةٌ وَاللَّهُ يُضَاعِفُ لِمَنْ يَشَاءُ وَاللَّهُ وَاسِعٌ عَلِيمٌ

Mar kale waxaa lagu micneeyaa badbaado ganacsi, sida aynu ka akhrisan karno, Suuratu Yuusuf aayaddeeda 47^{aad}.

قَالَ تَزْرَعُونَ سَبْعَ سِنِينَ دَأَبًا فَمَا حَصَدْتُمْ فَذُرُوهُ فِي سُنْبُلِهِ إِلَّا قَلِيلًا مِمَّا تَأْكُلُونَ

8. (Siddeed): waxaa lagu fasiraa saaxiibtinnimada sida ku cad Suuratu Kahaf, aayaddeeda 22^{aad}.

يَقُولُونَ ثَلَاثَةَ رَابِعِهِمْ كَلْبُهُمْ وَيَقُولُونَ خَمْسَةَ سَادِسُهُمْ كَلْبُهُمْ رَجْمًا بِالْغَيْبِ وَيَقُولُونَ سَبْعَةَ وَثَامِنَهُمْ كَلْبُهُمْ قُلْ رَبِّي أَعْلَمُ بِعَدَّتِهِمْ مَّا يَعْلَمُهُمْ إِلَّا قَلِيلٌ فَلَا تَمَارِ فِيهِمْ إِلَّا مِرَاءً ظَاهِرًا وَلَا تَسْتَفْتِ فِيهِمْ مِنْهُمْ أَحَدًا

Waxa kale oo lagu micneeyaa gabagabada wanaagsan iyo furitaanka albaabbada khayrka, sidii xadiiskii Bukhaari ee lahaa “*Jannadu waxay leedahay siddeed 8 albaab*”.

9. (Sagaal): waxaa lagu fasiraa dhawaanshaha foosha. Maxaa yeelay sagaal bilood baa la sidaa ilmaha. Sidoo kale waxaa lagu fasiraa calaamadaha cajiibka, sida Ilaahay qurankiisa ku sheegay in uu nebi Muuse ku galladay, sagaal (9) aayadood oo Xaj ah.

10. (Toban): waxaa lagu fasiraa, Xajka iyo Cimrada, sida ku cad Suuratu Al-Baqara, aayaddeeda 196^{aad}.

وَأَتِمُّوا الْحَجَّ وَالْعُمْرَةَ لِلَّهِ فَإِنْ أُحْصِرْتُمْ فَمَا اسْتَيْسَرَ مِنَ الْهَدْيِ وَلَا تَخْلِفُوا رُؤُوسَكُمْ حَتَّىٰ يَبْلُغَ الْهَدْيُ مَحَلَّهُ فَمَنْ كَانَ مِنْكُمْ مَّرِيضًا أَوْ بِهِ أَذًى مِنْ رَأْسِهِ فَفِدْيَةٌ مِنْ صِيَامٍ أَوْ صَدَقَةٍ أَوْ نُسُكٍ فَإِذَا أَمِنْتُمْ فَمَنْ تَمَتَّعَ بِالْعُمْرَةِ إِلَى الْحَجِّ فَمَا اسْتَيْسَرَ مِنَ الْهَدْيِ فَمَنْ لَمْ يَجِدْ فَصِيَامُ ثَلَاثَةِ أَيَّامٍ فِي الْحَجِّ وَسَبْعَةٍ إِذَا رَجَعْتُمْ تِلْكَ عَشْرَةٌ كَامِلَةٌ ذَلِكَ لِمَنْ لَمْ يَكُنْ أَهْلَهُ حَاضِرِي الْمَسْجِدِ الْحَرَامِ وَاتَّقُوا اللَّهَ وَاعْلَمُوا أَنَّ اللَّهَ شَدِيدُ الْعِقَابِ

Waxaa kale oo lagu fasiraa, Ilaahay oo loo dhawaado iyo rejada oo rumawda. Sida ku cad suuratu Al Acraaf, aayaddeeda 142^{aad}.

وَوَاعَدْنَا مُوسَى ثَلَاثِينَ لَيْلَةً وَأَتَمَمْنَاهَا بِعَشْرِ فِتْمٍ مِيقَاتُ رَبِّهِ أَرْبَعِينَ لَيْلَةً وَقَالَ مُوسَى
لَأَخِيهِ هَارُونَ أَخْلُفْنِي فِي قَوْمِي وَأَصْلِحْ وَلَا تَتَّبِعْ سَبِيلَ الْمُفْسِدِينَ

11. (Kow iyo Toban): waxaa lagu fasiraa saddexda cisho ee ku xiga maalinka ciidal adxaha. Waxa kale oo lagu fasiraa sarraynta iyo sharafta sida ku cad suuratu Yuusuf aayaddeeda ^{4aad}.

إِذْ قَالَ يُوسُفُ لِأَبِيهِ يَا أَبَتِ إِنِّي رَأَيْتُ أَحَدَ عَشَرَ كَوْكَبًا وَالشَّمْسَ وَالْقَمَرَ رَأَيْتُهُمْ لِي
سَاجِدِينَ

12. (Laba iyo toban): waxaa lagu fasiraa salaadaha sunnaha ee faralka ku xiga. Sidiid yidhi ee ka sugan xadiiskii saxiixu Muslim, qofkii tukada 12 ragcadood habeen iyo maalin walba, kuwaa dartood Ilaahay wuxu ugu yegleelaa guri jannada ah. Sidoo kale waxaa lagu micneeyaa bilaha sanadka. Sida ku cad Suuratu Al-Tawba aayaddeeda 36^{aad}.

إِنَّ عِدَّةَ الشُّهُورِ عِنْدَ اللَّهِ اثْنَا عَشَرَ شَهْرًا فِي كِتَابِ اللَّهِ يَوْمَ خَلَقَ السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضَ
مِنْهَا أَرْبَعَةٌ حُرْمٌ ذَلِكَ الدِّينُ الْقَيِّمُ فَلَا تَظْلِمُوا فِيهِنَّ أَنْفُسَكُمْ وَقَاتِلُوا الْمُشْرِكِينَ كَافَّةً كَمَا
يُقَاتِلُونَكُمْ كَافَّةً وَاعْلَمُوا أَنَّ اللَّهَ مَعَ الْمُتَّقِينَ

13. (Toban iyo saddex) waxaa lagu fasiraa salaatu laylka. Caashi waxa ay tidhi xadiiskii saxiixu Muslim “Waxa uu tukan jiray (13) ragcadood oo salaatu layl ah”. Mar kale waxa lagu fasiraa culays qofka kaga yimaadda dhanka diinta. Waayo saddex iyo toban (13) sannadood oo Maka uu joogay ayaa culays ka haystay.

17. (Toddaba iyo toban): waxaa lagu fasiraa, ilaalinta salaadda faralka, maxaa yeelay ragcadaha faralku waa 17 ragcadood.

20. (Labaatan): waxaa lagu fasiraa samir ama guul, sida ku cad suuratu Anfaal, aayaddeeda 65^{aad}.

يَا أَيُّهَا النَّبِيُّ حَرِّضِ الْمُؤْمِنِينَ عَلَى الْقِتَالِ إِنْ يَكُنْ مِنْكُمْ عِشْرُونَ صَابِرُونَ يَغْلِبُوا
مِئْتِينَ وَإِنْ يَكُنْ مِنْكُمْ مِائَةٌ يَغْلِبُوا أَلْفًا مِنَ الَّذِينَ كَفَرُوا بِأَنَّهُمْ قَوْمٌ لَا يَفْقَهُونَ

25-27 waxaa lagu fasiraa salaadda Jamaca: siday axadiistii Bukhaari iyo Muslimba ku jirtay ee ku sheegay in salaadda jamacu ka fadli badan tahay salaadda qofka keligii ah. 25 derejo marna 27 derejo.

30. (Soddon): Waxaa lagu fasiraa uur, daal, ummul, cimri dheer, tawbad, sida ku cad suuratu Axqaaf, aayaddeeda 15^{aad}.

وَوَصَّيْنَا الْإِنْسَانَ بِوَالِدَيْهِ إِحْسَانًا حَمَلَتْهُ أُمُّهُ كُرْهًا وَوَضَعَتْهُ كُرْهًا وَحَمَلُهُ وَفِصَالُهُ ثَلَاثُونَ شَهْرًا حَتَّىٰ إِذَا بَلَغَ أَشُدَّهُ وَبَلَغَ أَرْبَعِينَ سَنَةً قَالَ رَبِّ أَوْزِعْنِي أَنْ أَشْكُرَ نِعْمَتَكَ الَّتِي أَنْعَمْتَ عَلَيَّ وَعَلَىٰ وَالِدَيَّ وَأَنْ أَعْمَلَ صَالِحًا تَرْضَاهُ وَأَصْلِحْ لِي فِي ذُرِّيَّتِي إِنِّي تُبْتُ إِلَيْكَ وَإِنِّي مِنَ الْمُسْلِمِينَ

40. (Afartan): waxa lagu fasiraa toobad la'aanta. Sida ku cad suuratu Maa'ida, aayaddeeda 26^{aad}

قَالَ فَإِنَّهَا مُحَرَّمَةٌ عَلَيْهِمْ أَرْبَعِينَ سَنَةً يَتِيهُونَ فِي الْأَرْضِ فَلَا تَأْسَ عَلَى الْقَوْمِ الْفَاسِقِينَ

Waxa kale oo lagu fasiraa, dhawaansho Ilaahay loo dhawaado, sida ku cad suuratu, Acraaf, aayaddeeda 142^{aad}

وَوَاعَدْنَا مُوسَىٰ ثَلَاثِينَ لَيْلَةً وَأَتَمَمْنَاهَا بِعَشْرِ فَتَمَّ مِيقَاتُ رَبِّهِ أَرْبَعِينَ لَيْلَةً وَقَالَ مُوسَىٰ لِأَخِيهِ هَارُونَ اخْلُفْنِي فِي قَوْمِي وَأَصْلِحْ وَلَا تَتَّبِعْ سَبِيلَ الْمُفْسِدِينَ

50. (Konton): waxa lagu fasira cimri dheer, ama cimri gaaban. Sida ku cad suuratu Cankabuut, aayaddeeda, 14^{aad}

وَلَقَدْ أَرْسَلْنَا نُوحًا إِلَىٰ قَوْمِهِ فَلَبِثَ فِيهِمْ أَلْفَ سَنَةٍ إِلَّا خَمْسِينَ عَامًا فَأَخَذَهُمُ الطُّوفَانُ وَهُمْ ظَالِمُونَ

60. (Lixdan): waxaa lagu fasirayaa soon, quudin miskiin, in aan loo dhawaan xuduudda Ilaahay, sida ku cad suuratu Mujaadala, aayaddeeda 4^{aad}

فَمَنْ لَمْ يَجِدْ فَصِيَامُ شَهْرَيْنِ مُتَتَابِعَيْنِ مِنْ قَبْلِ أَنْ يَتَمَاسَا فَمَنْ لَمْ يَسْتَطِعْ فَاِطْعَامُ سِتِّينَ
مَسْكِينًا ذَلِكَ لِتُؤْمِنُوا بِاللَّهِ وَرَسُولِهِ وَتِلْكَ حُدُودُ اللَّهِ وَلِلْكَافِرِينَ عَذَابٌ أَلِيمٌ

70, (Toddobatan): waxaa lagu fasiraa saaxiib wanaagsan, sida ku cad suuratu Acraaf aayaddeeda 155^{aad}

وَاخْتَارَ مُوسَى قَوْمَهُ سَبْعِينَ رَجُلًا لِمِيقَاتِنَا فَلَمَّا أَخَذَتْهُمُ الرَّجْفَةُ قَالَ رَبِّ لَوْ شِئْتَ
أَهْلَكْتَهُمْ مِنْ قَبْلُ وَإِيَّايَ أَتُهْلِكُنَا بِمَا فَعَلَ السُّفَهَاءُ مِنَّا إِنْ هِيَ إِلَّا فِتْنَتُكَ تُضِلُّ بِهَا مَنْ
تَشَاءُ وَتَهْدِي مَنْ تَشَاءُ أَنْتَ وَلِيُّنَا فَاغْفِرْ لَنَا وَارْحَمْنَا وَأَنْتَ خَيْرُ الْغَافِرِينَ

Sidoo kale waxaa lagu fasiraa is ka ilaalinta munaafaqnimada. Sida ku cad suuratu Tawba, aayaddeeda 80^{aad}

اسْتَغْفِرْ لَهُمْ أَوْ لَا تَسْتَغْفِرْ لَهُمْ إِنْ تَسْتَغْفِرْ لَهُمْ سَبْعِينَ مَرَّةً فَلَنْ يَغْفِرَ اللَّهُ لَهُمْ ذَلِكَ بِأَنَّهُمْ
كَفَرُوا بِاللَّهِ وَرَسُولِهِ وَاللَّهُ لَا يَهْدِي الْقَوْمَ الْفَاسِقِينَ

Waxa kale oo lagu fasiraa Camal-xumida, sida ku cad suuratu Xaaqa, aayaddeeda 32^{aad}

مَّ فِي سِلْسِلَةٍ ذَرْعُهَا سَبْعُونَ ذِرَاعًا فَاسْلُكُوهُ

80. (Siddeetan): waxaa lagu fasiraa ku xad gudubka xuduudda Ilaahay, dembiyo waaweyn oo la sameeyo. Sida ku cad suuratu Nuur, aayaddeeda 4^{aad}

وَالَّذِينَ يَرْمُونَ الْمُحْصَنَاتِ ثُمَّ لَمْ يَأْتُوا بِأَرْبَعَةِ شُهَدَاءَ فَاجْلِدُوهُمْ ثَمَانِينَ جَلْدَةً وَلَا تَقْبَلُوا
لَهُمْ شَهَادَةً أَبَدًا وَأُولَئِكَ هُمُ الْفَاسِقُونَ

99 (Sagaashaniyo sagaal): Waxa lagu fasiraa, iska ilaalinta dulmiga sida ku cad suuratu Saad, aayaddeeda 23^{aad}

إِنَّ هَذَا أَخِي لَهُ تِسْعٌ وَتِسْعُونَ نَعْجَةً وَلِي نَعْجَةٌ وَاحِدَةٌ فَقَالَ أَكْفُلْنِيهَا وَعَزَّنِي فِي
الْخِطَابِ

100 (boqol): waxaa lagu fasiraa sinada sida ku cad suuratu Nuur aayaddeeda 2^{aad}

الزَّانِيَةُ وَالزَّانِي فَاجْلِدُوا كُلَّ وَاحِدٍ مِّنْهُمَا مِائَةَ جَلْدَةٍ وَلَا تَأْخُذْكُمْ بِهِمَا رَأْفَةٌ فِي دِينِ اللَّهِ إِنْ كُنْتُمْ تُؤْمِنُونَ بِاللَّهِ وَالْيَوْمِ الْآخِرِ وَلَيْشَهِدَ عِدَابَهُمَا طَائِفَةٌ مِّنَ الْمُؤْمِنِينَ (2)

waxa kale oo lagu fasiraa, dulqaad iyo guul, sida ku cad suuratu Anfaal aayaddeeda 66^{aad}

الآن خَفَّفَ اللَّهُ عَنْكُمْ وَعَلِمَ أَنَّ فِيكُمْ ضَعْفًا فَإِنْ يَكُنْ مِنْكُمْ مِائَةٌ صَابِرَةٌ يَغْلِبُوا مِئَتَيْنِ وَإِنْ يَكُنْ مِنْكُمْ أَلْفٌ يَغْلِبُوا أَلْفَيْنِ بِإِذْنِ اللَّهِ وَاللَّهُ مَعَ الصَّابِرِينَ

Waxa kale oo lagu fasiraa, xasanaadka iyo sadaqada, sida ku cad suuratu Al Baqara, aayaddeeda 261^{aad}

مَثَلُ الَّذِينَ يُنْفِقُونَ أَمْوَالَهُمْ فِي سَبِيلِ اللَّهِ كَمَثَلِ حَبَّةٍ أَنْبَتَتْ سَبْعَ سَنَابِلَ فِي كُلِّ سُنبُلَةٍ مِائَةٌ حَبَّةٍ وَاللَّهُ يُضَاعِفُ لِمَنْ يَشَاءُ وَاللَّهُ وَاسِعٌ عَلِيمٌ

200 (laba boqol): waxaa lagu fasiraa in ay tahay guusha cadawga laga helayo. Sida ku cad suuratu Anfaal, aayaddeeda 65

يَا أَيُّهَا النَّبِيُّ حَرِّضِ الْمُؤْمِنِينَ عَلَى الْقِتَالِ إِنْ يَكُنْ مِنْكُمْ عِشْرُونَ صَابِرُونَ يَغْلِبُوا مِئَتَيْنِ وَإِنْ يَكُنْ مِنْكُمْ مِائَةٌ يَغْلِبُوا أَلْفًا مِّنَ الَّذِينَ كَفَرُوا بِأَنَّهُمْ قَوْمٌ لَا يَفْقَهُونَ

300 (Saddex boqol): waxaa lagu fasiraa go'doonnimo sida ku cad Suuratu Kahaf, aayaddeeda 25^{aad}

وَلَبِثُوا فِي كَهْفِهِمْ ثَلَاثَ مِائَةٍ سِنِينَ وَازْدَادُوا تِسْعًا

360 (saddex boqol iyo lixdan): waxaa lagu fasiraa maalmaha sannadka. Sidoo kale waxaa lagu macneeyaa, xubnaha jidhka oo 360 ah Iyo sadaqada, sidii xadiiskii saxiixu Muslim sheegay.

1000 (kun): waxaa lagu fasiraa cimriga dheer iyo camalka fiican, sida ku cad suuradda Cankabuut aayaddeeda 14^{aad}

Waad riyootee runtu waa maxay?

وَلَقَدْ أَرْسَلْنَا نُوحًا إِلَىٰ قَوْمِهِ فَلَبِثَ فِيهِمْ أَلْفَ سَنَةٍ إِلَّا خَمْسِينَ عَامًا فَأَخَذَهُمُ الطُّوفَانُ وَهُمْ ظَالِمُونَ

Sidoo kale waxaa lagu fasiraa laylatu Qadarka oo lala kulmo, sida ku cad Suuratu Qadri aayaddeeda 3^{aad}.

لَيْلَةُ الْقَدْرِ خَيْرٌ مِّنْ أَلْفِ شَهْرٍ

Mar kale waxaa lagu fasiraa, siyaaradda masaajidka nebiga. Sida Xadiiskii Bukhaari iyo Muslim, uu ku sheegay in hal salaad oo masaajidka nebigu, ka fadli badan tahay kana khayr badan tahay kun salaadood oo masaajid kala ah.

2000. (Laba kun): waxaa lagu fasiraa, guuldarro iyo khasaare, sida ku cad suuratu Anfaal aayaddeeda 66

الآن خَفَّفَ اللَّهُ عَنْكُمْ وَعَلِمَ أَنَّ فِيكُمْ ضَعْفًا فَإِن يَكُن مِّنْكُمْ مِّائَةٌ صَابِرَةٌ يَغْلِبُوا مِائَتَيْنِ وَإِن يَكُن مِّنْكُمْ أَلْفٌ يَغْلِبُوا أَلْفَيْنِ بِإِذْنِ اللَّهِ وَاللَّهُ مَعَ الصَّابِرِينَ

5000 (shan kun): waxaa lagu fasiraa guul, sida ku xusan suuratu Al-Cimraan aayaddeeda 125

بَلَىٰ إِن تَصْبِرُوا وَتَتَّقُوا وَيَأْتُوكُم مِّن فَوْرِهِمْ هَذَا يُمْدِدْكُمْ رَبُّكُمْ بِخَمْسَةِ آلَافٍ مِّنَ الْمَلَائِكَةِ مُسَوِّمِينَ

50,000 (konton kun): waxaa lagu fasiraa, sarrayn iyo qiyaamaha oo soo dhawaada, sida ku cad suuratu Al Mucaarij aayaddeeda 4^{aad}

تَعْرُجُ الْمَلَائِكَةُ وَالرُّوحُ إِلَيْهِ فِي يَوْمٍ كَانَ مِقْدَارُهُ خَمْسِينَ أَلْفَ سَنَةٍ

100,000 (boqol kun): waxaa lagu fasiraa, faafinta dacwadda, sida ku cad Suuratu Saafaat, aayaddeeda 147

وَأَرْسَلْنَاهُ إِلَىٰ مِائَةِ أَلْفٍ أَوْ يَزِيدُونَ

Telegram: - Same Wada

CUTUBKA SIDDEEDAAD

Riyada Xayawaannada

Xayaawannadu waa qaybo badan oo kala geddisan, una kala baxa:

- ❖ Mid riyadiisu mar walba khayr tahay sida; Fardaha, Baqalka, Dameeraha iyo Adhiga.
- ❖ Mid marwalba riyadiisu ay shar tahay sida, masa-cagalayda.
- ❖ Midda saddexaad riyada xayawaannadu waa mid leh khayr iyo sharba. Sida shimbiraha iyo garanuugta, qayb ka mid ah.
- ❖ Mid kale waa mid aan shar iyo khayr toona lahayn, sida dukhsiga iyo qudhaanjada.

Sharrax kooban oo xayawaanka ah

Bakhaylaha: Waxa lagu fasiraa qof nacas ah. Sidoo kale waxa lagu micneeyaa xoolaha badan, ama hooyada ubadka badan iyo sidoo kale ugaadha iyo xajka. Sidoo kale waxaa lagu fasiraa, xaaska, ama xoolo hal milyan ah. Sida maahmaahda Carbeed sheegayso ee tidhaa “*Hebel wuxuu haystaa hal bakayle*”, oo u dhiganta wuxuu haystaa lacag dhan hal milyan.

Libaaxa: Waxaa lagu fasiraa, cadaw dulmi badan. Sidoo kale waxaa lagu fasiraa jahliga iyo kibirka. Waxa kale oo lagu fasiraa geerida.

Xuur badeed: Waxaa lagu fasiraa, dumarka quruxda badan. Haddii qof ku riyoodo isaga oo raacaya xuurta, waxa uu la saaxiibayaa dad sharaf badan.

Baqal: Waxaa lagu fasiraa safarka. Haddii ruux uu ku riyoodo isaga oo saaran baqal, waxaa lagu micnaynayaa cimri dherer. Sidoo kale waxaa lagu fasiraa in uu guursanayo gabadh ma-dhalays ah.

Lo'da: Waxaa lagu fasiraa sanadaha. Haddii uu qof uu ku riyoodo lo'da oo balbaadhan waxaa lagu fasiraa sanado barwaaqo iyo badhaadhe ah. Sidoo kale haddii lo'du ay caato tahay, waxaa lagu micneeyaa sannado abaaraysan. Haddii qofku ku riyoodo isagoo cunaya hilib lo'aad, waxaa

lagu micneeyaa, in uu helayo xoolo, maal iyo awood. Haddii qofku ku riyoodo isaga oo caano lo'aad cabbaya oo xanuusanaya, waxaa lagu micneeyaa in ay tahay isaga oo caafimaad helay. Sidoo kale waxaa lagu fasiraa culimada iyo dadka wanaagsan ee saalixiinta ah.

Kaneecada: Waxaa lagu micneeyaa in ay tahay cadaw xaasid ah, oo dadka xanta, iskuna daya in uu dadka sumacddooda waxyeelleeyo.

Aboorka: waxaa lagu fasiraa xanta iyo isku diridda. Sidoo kale waxaa lagu fasiraa, daciifnimada iyo fulaynimada. Qofku haddii uu ku riyoodo arsaaqdiisa oo dhextaal aboorka, waxaa lagu micneeyaa geeri iyo xanuun.

Yaxaaska: waxaa lagu turjumaa cadaw dhibaato badan, sidoo kale waxa lagu fasiraa shaydaanka.

Orgiga: Waxaa lagu fasiraa ninka guurka badan. Sidoo kale waxaa lagu fasiraa ruuxa xalaasha xaaraan-tinnimeeya, xaaraantana xalaashada. Taas waxaa daliil uga soo qaadan karnaa xadiiskii nebiga (Csw) ee ahaa ninka isku xalaaleeya laba lammaane oo is qabay, saddexdiina isku furay.

Dacawada: Waxaa lagu micneeyaa in ay tahay cadaw beenaale ah oo khiyaamo iyo mu'aamarado badan.

Dibiga: Waxaa lagu fasiraa, nin faaqay oo dhibaato badan. Sidoo kale waxaa lagu micneeyaa badbaadada. Mar kale waxaa lagu fasiraa madaxnimo iyo ganacsi hana qaada. Haddii qofku ku riyoodo dibi legdaya, halkaa fitno iyo halaag baa lagu fasirayaa. Haddii ruux kale ku riyoodo isaga oo dibiyo badan haysta, waxaa riyadiisaa loogu fasirayaa in ay tahay, mid xil sare qaban doona. Haddii isaga oo saaran dibina, uu ku riyoodo, waxaa lagu fasiraa barwaaqo iyo badhaadhe.

Maska: waxaa lagu fasiraa cadaw fog, oo aan qaraabo ahayn. Sidoo kale waxaa lagu fasiraa isha. Haddii qof uu ku riyoodo mas qaniinay. Marka uu soo toosana calaamadda jidhkiisa ku arko sida qaniinyo, madmadaw iyo finan waawayn. Waxaa lagu fasiraa in ay tahay sixir. Sidoo kale haddii ruux ku riyoodo isaga oo hantiyay mas, waxaa lagu fasirayaa in ay tahay xaq uu ku taagan yahay.

Awrka: waxaa lagu fasiraa murugo. Sidoo kale waxaa lagu fasiraa xajka. Haddii uu qofku ku riyoodo, isaga oo awr, ku wareegaalaysanaya, waxaa

lagu fasiraa, in ay tahay murugo iyo xanuun, ama dagaal uu qof la gelayo. Sidoo kale, haddii ruux uu ku riyoodo isaga oo awr gawracaya waxaa lagu micneeyaa raaxo iyo barwaaqo uu helayo. Haddii uu ka dhaco awrkana, waxaa lagu fasiraa in ay tahay, faqiirnimo Iyo caydh.

Ayaxa: waxaa lagu fasiraa fitno iyo cadaab. Waxaa kale oo lagu fasiraa xoolaha,

Abeesada: Waxaa lagu fasiraa, in ay tahay cadaw xoolo leh. Ruux hadduu gurigiisa soo gashadana waxaa la yidhaa cadaw buu soo kaxaysatay. Haddii ruux uu dilo, abeesada waxaa la yidhaa waa cadaw uu ka guulaystay. Haddii ruux uu ku riyoodo iyada oo qaniintay, waxaa lagu fasiraa, in ay tahay masiibo. Sidoo kale haddii ruux uu ku riyoodo abeeso madaw, waxaa lagu fasiraa sixir iyo il. Mar kale haddii ruux uu ku riyoodo isaga oo abeeso ku dilay sariirtiisa waxa lagu fasiraa in ay tahay, xaaskiisa oo geeriyoonaysa. Haddii uu ku riyoodo abeeso dhimatay, waxaa lagu fasiraa in ay tahay cadawgiisa oo halaagmay. Sidoo kale haddii ruux uu ku riyoodo, abeesooyin gurigiisa gelaya oo ka soo baxaya, Waxaa lagu fasirayaa in ay tahay, qaraabadiisa oo ku cadaw ah.

Dameerka: Haddii ruux dameer saaran yahay, waxaa lagu fasiraa in ay tahay badbaado. Mar kale lagu fasiraa safarka. Sidoo kale waxaa lagu micneeyaa qofka aqoonta leh, ee aan aqoontiisa, ficil ku darayn. Mar kale dameerka waxaa lagu fasiraa, samir, dedaal, dulqaad iyo adadayg.

Xamaamka (shimbirta): Waxaa lagu fasiraa qof dumara oo la wada jecel yahay. Haddii uu ku riyoodo gurigiisa oo xamam jooga waxaa lagu micneeyaa riyada noocaas ah, in ay tahay mid guursanaya gabadh qurux badan. Sidoo kale waxaa lagu fasiraa bushaaro qofkii culays saarnaa lagu bishaaraynayo culayskii oo ka fududaanaya.

Fardaha: Riyada farduhu waa riyo wanaagsan oo qurux iyo dhaldhalaal leh. Gabadha uurka leh hadday ku riyooto, riyadeeda waxaa lagu fasirayaa in ay dhali doonta ilmo magac yeelan doona. Sidoo kale waxaa lagu fasiraa arsaaqada ballaadhan iyo guul cadaw laga guulaysanayo. Haddii qofku ku riyoodo, isaga oo saaran faras, waxaa riyadiisaa lagu

Waad riyootee runtu waa maxay?

fasirayaa in uu noqon doono nin heli doona, xoolo, magac iyo oori wanaagsan.

Doofaarka/Khaansiirka: Waxaa lagu fasiraa in uu yahay, cadaw xoog weyn oo khiyaamo badan.

Xaar-walwaal: waxaa lagu micneeyaa in uu yahay cadaw, qadhmuun, uskagna ah, waxaana lagu fasiraa shaydaanka.

Diigga: waxaa lagu fasiraa, aabbaha guriga masuulka ka ah. Qofka ku riyoodo isaga oo gawracay diig, waxaa lagu fasirayaa riyadiisaa isaga oo aan eedaanka ka jawaab celin. Mar kale waxaa lagu fasiraa nin cod debecsan.

Digaagadda: Iyadana waxaa lagu fasiraa qof dumar ah, oo qurux iyo il qabatin leh balse caanyo ah oo la bahdilo.

Dirxi: Haddii ruux uu dirxi ku riyoodo caloosha kaga jira. Waxaa lagu micneeyaa in ay tahay qofkaas oo xoolihiisii cunaya. Sidoo kale haddii mar kale ruux ku riyoodo dirxi jidhkiisa ka baxay, waxaa lagu micneeyaa in ay tahay, dhibaato dhaaftay ama il xaasid oo uu ka bogsaday.

Waraabe ama Dhurwaa: Waxaa lagu fasiraa tuug, kataab beenaale ah. Hadduu qofku ku riyoodo waraabe gurigiisa soo galay, waxaa lagu fasirayaa riyadaa tuug soo galayo guriga. Haddii qof ku mar kale ku riyoodo waraabe, waxaa lagu fasirayaa in ay tahay riyadaasi tuhun la tuhmo ruux bilaa dembi ah. Sidii Qisadii Nebi Yuusuf.

Dukhsi: Waxa lagu fasirayaa qof daciif ah oo liita, haddii ruux uu ku riyoodo dukhsi korkiisa dul meeraya, riyadaas waxaa lagu fasirayaa, in ay tahay mid cadaw ah oo doonaya in uu ka sarreeyo. Sidoo kale haddii ruuxu ku riyoodo isaga oo dukhsi dilaya, waxaa riyadiisaa lagu micneeyaa caafimaad. Sidoo kale haddii ruux uu ku riyoodo dukhsi badan oo gurigiisa dhex fadhiya, waxaa riyadaa lagu fasirayaa cadawgiisa oo uu dhibaato kala kulmayo. Mar kale haddii ruux uu ku riyoodo isaga oo dukhsi ku dhacay sharaab uu cabbayay waxaa riyadaa lagu turjumayaa dawo uu ku caafimaadayo.

Geriga: Waxaa lagu fasiraa qofka dumar ah oo aan nin keli ahi qabi karin, ee guurka badan soo martay.

Diinka: Waxaa lagu fasiraa, qaaddi aqoon badan. Sidoo kale waxaa lagu fasiraa qofka dumar ah ee aadka u xarragoota.

Yayga: Waxaa lagu fasiraa, in uu yahay cadaw dhibaato badan.

Masa-cagalay: Waxaa lagu micneeyaa, dadka bidcoolayaasha ah. Sidoo kale waxaa lagu fasiraa nin reer miyi ah oo xoolo qaad ah.

Raha: Waxaa lagu fasiraa nin cibaado badan, haddii urur ay yihiinna waxa lagu fasirayaa cadaw.

Kalluunka: Haddii ruux uu ku riyoodo kalluun tiradoodana uu garto waxaa riyadiisaa lagu fasirayaa, in ay tahay tiro dumar ah. Haddii tirada la garan waayana waxaa lagu fasiraa xoolo iyo nimcooyin. Haddii ruux uu ku riyoodo kalluun daray ah, waxaa riyadiisaa lagu fasiraa gabadh ugub ah. Sidoo kale haddii uu ku riyoodo isaga oo kalluumaysanaya waxaa lagu fasirayaa riyadiisaa manfac iyo barwaaqo.

Bisadda: Waxaa lagu fasiraa, shaqaale ama qof tuug ah oo guriga ka tirsan. Sidoo kale waxaa lagu fasiraa ruux khiyaamo badan.

Daa'uuska: Waxaa lagu fasiraa, gabadh aan islaam ahayn oo qurux iyo maalba leh. Haddii gabadh ku riyooto daa'uuska riyadeeda waxaa lagu fasirayaa guur wanaagsan. Sidoo kale waxaa lagu fasiraa nolol raaxo leh.

Caarada: Waxaa lagu fasiraa qof saahid ah.

Tukaha: Waxaa lagu fasiraa nin is cajabiyay.

Harimcad: Waxaa lagu fasiraa xoogga iyo sarraynta.

Maroodiga: Waxaa lagu micneeyaa, boqor aan qalbi fiicnayn. Haddii ruux ku riyoodo isaga oo maroodi saaran, riyada noocaas ah waxaa lagu fasiraa in uu noqon doono qof meel sare gaadha. Riyada maroodiguna dadka Ilaahay ka cabsada riyo fiican uma aha.

Daanyeerka: Waxaa lagu fasiraa Yuhuudda. Sidoo kale waxa lagu fasiraa maal-qabeen caydhoobay. Mar kale waxaa lagu fasiraa cadawga iyo macsida.

Injirta: Inteeda badan waa cadaw ama xanuun muddo dheer. Sidoo kale khasaare iyo gaajo, haddii qof ku riyoodo isaga oo dilaya injir dhibaato iyo kurbo haysatay ayaa ka faydmaysa. Qofkii injir qaniintana dad daciif ah ayaa xamanaya. Sidoo kale waxaa lagu fasiraa xoolaha iyo awlaadda.

Waad riyootee runtu waa maxay?

Qudhaanjada: Waxaa lagu fasiraa, dad daciifa. Sidoo kale waxaa lagu fasiraa ruux macaan qaba.

Haadka: Waxaa lagu fasiraa boqortooyo. Sidoo kale waxaa lagu fasiraa cimri dheer iyo xoolo.

Deerada: Waxaa lagu fasiraa ruux madax ah oo cibaado badan.

Fasiraadda Cibaadooyinka

Salaadaha: Waxaa lagu fasiraa in ay calaamad u yihiin Ilaahay oo loo dhawaaddo iyo in ay calaamad u yihiin guusha.

Quraanka: akhriskiisa waxaa lagu fasiraa raxmad iyo bushaaro.

Soonku: waa sharaf iyo dembi-dhaaf. Haddii ruux uu ku riyoodo isaga oo soomman, riyadiisa waxaa lagu fasirayaa, wiil u dhalannaya. Haddii ruuxu ku riyoodo isaga oo soomman oo xanuusanaya, riyadiisa waxaa lagu fasirayaa bogsiimo iyo caafimaad. Haddii ruux uu ku riyoodo iyada oo la soomman yahay, isaguna aanu soommanayn, riyadiisa waxaa lagu fasirayaa safar.

Xajka: Haddii ruux uu ku riyoodo isaga oo xajaya, waa toosnaan uu diinta ku toosnaanayo. Sidoo kale dayn uu iska bixinayo, ama ammaano uu ciddii lahayd u celinayo. Haddii qofka riyoonayaa uu safar ku jiro, waxa ay riyadaasi dhigaysaa in ay tahay safar nabad gelyo. Haddii ruux taajir ahi seexo oo uu riyadan ku riyoodo, waxa ay fasirkeedu tahay mid sii lacagaysanaya, haddii uu xanuusanayana uu bogsanaya. Haddii dayn lagu leeyahayna wuu iska gudayaa. Sidoo kale, haddii aanu hore u xajin wuu xajayaa.

Sakadaiyo Sadaqada: Waxaa lagu fasiraa xoolaha oo tiro bata. Qofka derejadiisa oo sarraysa iyo belaayada oo Ilaahay hareer mariyo.

Citikaafka: waxaa lagu fasiraa camal saalaxa.

Ducada iyo istikhfaaru-laysiga: waxaa lagu fasiraa risiq ballaadhan iyo guusha.

Acuudi Billaysiga: waxaa lagu fasiraa cilmi badni iyo cadaw laga badbaadayo.

Odxiya: Waxaa fasiraa, oo ay calaamad u tahay ballan fulinta. Haddii ruux deyn lagu leeyahayna, deynka ayaa uu iska bixinayaa. Sidoo kale hadduu faqiir yahay wuu xoolaysanayaa. Haddii cabsi ku jirto xasillooni buu dareemayaa. Haddii aanu hore u xajinna wuu soo xajiyayaa, sidoo kale haddii uu dagaal ku jiro uu guulaysanayaa.

Salaadda oo la aqiimo: waxa wy astaan u tahay muraadkaaga oo aad helayso iyo xasillooni aad dareento.

Tasbiixaysigga: Waa faraj Alle, badbaado iyo guul.

Takbiirta: waxaa lagu fasiraa ciidda, farxada iyo sadaqada.

Tacsida: Haddii ruux uu ku riyoodo isaga oo la tacsiyadaynayo waxaa fasirkeedu uu yahay dhibaato laga dulqaadayo.

Toobadda: Waxaa lagu fasiraa badbaado.

Gabagabaysiga: waxa lagu fasiraa safar ama xanuun keenaya gabagabaysiga.

Salaadda Jimce: Haddii uu ku riyoodo salaadda Jimce, waxa ay micnaaheedu tahay arrimihiisa oo kala daadsan in ay meel isku imanayaan, wixii ku adagna ay u fududaanayaan. Sidoo kale waxa ay calaamad u tahay riyadaasi farxad iyo reer raaga.

Weysada: Waxaa lagu fasiraa dembi-dhaaf, derejo sare iyo murugada oo ku deysa.

Janaasadda: qofka ku riyoodaa, waxa uu Ilaahay dartii u walaalaysiinayaa dadka.

Dhaarta: Haddii ruux run ku dhaarto guul buu mudanayaa, haddiise uu been uu ku dhaarto dembi buu gelayaa. Haddii uu Ilaahay ku dhaartana sunnihii buu raacayaa.

Siyaarada Masjidka Nabiga (Csw) Siyaarada masaajidka nebiga waxaa lagu fasiraa amni, dembi-dhaaf, raxmad, badbaado, farash iyo nolol barwaaqaysan.

Siyaarada Masjidka Alle (Maka): waxaa lagu fasiraa amni, xash iyo arsaaqad.

Riyada xubnaha jidhka

Madaxa: Waxaa lagu fasiraa kolba qofka uu u arko madax.

Timaha: Waxaa laggu fasiraa in ay yihiin faa'iido iyo raaxo. Qofka aan guursanna waa guur, ama macaash xaga beeraha ah. Haddii timaha dhererkoodu, dherer caadi ah yahay. Laakiin haddii saliidi ka da'ayso ama dhererku xad-dhaaf yahay, ama indhihiisa ay qarinayaan, sidoo kale uu dhukuran yahay, waxaa lagu fasirayaa intaas oo is xanbaarsan ba murugo iyo werwer.

Maqalka, Aragga, Urta iyo Dhandhanka: Mid waliba waxay calaamad u tahay raaxada, hanuunka, faa'iidada, amniga iyo farxadda,

Baabacadda iyo Faraha: Waxa ay calaamad u tahay salaadda. Haddii ruux uu arko farihiisii oo googa'ay, waxaa riyadiisa lagu fasirayaa in ay tahay in dhaabato ku imanayso awlaaddiisa, maceeshaddiisa, ehelkiisa iyo macaariiftiisa.

Naaska: Haddii uu ku riyoodo isaga oo xubintiisa naaska, caano ka cabbaya ama malab, ama uu arko isaga oo naaskiisa wax ka cunaya, riyada noocaas ah waxaa lagu fasirayaa, haddii uu doob yahay, guur, haddii uu xaas leeyahayna waxaa lagu fasiraa arsaaq iyo awlaad.

Bawdyaha, Lugaha Iyo Mijaha: waxaa lagu fasiraa xoogga.

Wadnaha, Beerka, Beeryarada, Caloosha iyo Sanbabadda: Intuba waxay calaamad u yihiin oo lagu fasiraa awlaadda.

Ciddiyaha, Shaarubaha Iyo Timaha Kilkiladda: Waxaa lagu fasiraa hammi iyo deyn.

CUTUBKA SAGAALAAD

Fasiraadda Riyada Nebiyada

Nebi Aadan (calayhi salaam): Qofka ku riyoodaa waxaa riyadiisa lagu fasiraa in uu noqonayo qof xil sare qaban doona, ama meesha uu joogo ka guuraya oo meel kale u guuraya.

Nebi Ibraahin (calayhi salaam): Haddii ruux uu ku riyoodo, riyadiisa waxaa loogu fasirayaa Xaj ama cimro. Sidoo kale waxaa lagu fasiraa caddaaladda iyo geerida oo ku soo dhawaata. Mar kale waxaa lagu micneeyaa tawxiidka iyo ka fogaanshaha bidcada iyo shirkiga.

Nebi Ismaaciil (calayhi salaam): waxa lagu fasiraa xaj iyo cimro. Sidoo kale waxaa lagu fasiraa wanaag fasir iyo xumaan reebid, mar kale waxaa lagu fasiraa ikhlaaska cibaadada iyo Ilaahay oo loogu dhawaado ducada.

Nebi Isxaaq (calayhi salaam): waxaa lagu fasiraa cibaado, tawxiid, khaatumo wanaagsan, rumayn Ilaahay la rumeeyo iyo iska ilaalinta isku diridda dadka. Mar kale waxaa lagu fasiraa awlaadda faraha badan.

Nebi Yacquub (calayhi salaam): Waxaa lagu fasiraa awlaadda badan. Sidoo kale waxaa lagu fasiraa geeridaada oo soo dhawaatay. Mar kale waxaa lagu fasiraa bidcada oo laga fogaado, tawxiidka oo xoogaysta iyo sharka oo laga badbaado.

Nebi Yuusuf (calayhi salaam): Haddii uu ku riyoodo riyada nabi Yuusuf waxaa lagu fasiraa, in qofka dulmi ku dhici doono, xadhigna u dheer yahay iyo waliba been. Sidoo kale haddii ku riyoodo nabi Yuusuf, isna waxaa loogu fasirayaa riyadiisaa, mansab sare iyo in uu qofkaasi noqon karo dadka fasira riyoooyinka.

Nebi Shucayb (Calayhi salaam): Waxaa lagu fasiraa, qofka oo indha beela, Alle kuma keeno'e. Qofka waa la dulmayaa, waanu guulaysanayaa. Sidoo kale qofka riyadaa ku riyoodaa hablo badan buu

Waad riyootee runtu waa maxay?

dhalayaa, oo mid ka mid ah qof culimo ahi guursanayo. Mar kale haddii qofka ku riyooda iyana waxaa lagu fasiraa, in ay noqon karto shirqool.

Nebi Sulaymaan (calayhi salaam): Haddii uu ku riyoodo Nebi Sulaymaan waxaa riyadiisaa loogu fasirayaa, in uu guursanayo gabadh magac iyo mansaba leh. Sidoo kale waxaa loogu fasiraa qofka riyadaa arka, cimri dherer. Sidoo kale sixir, halka shadaadiinta kaga yimaadda ama waxaa loogu fasiraa durriyad wanaagsan oo barakaysan. Mar kale waxaa lagu fasiraa in uu xukun caddaalad ah helayo. Halka mar kale loogu fasiri karo cilmi iyo fahmad wanaagsan.

Nebi Muuse (calayhi salaam): Haddii uu ku riyoodo nebi Muuse waxaa loogu fasirayaa riyadiisaa, guul iyo badbaado sixirka iyo isha ah. Sidoo kale waxaa lagu fasiraa khayr ka badan iyo xoolaha badan. Mar kale waxaa lagu fasiraa guusha laga guulaysanayo sixiroolaha iyo faaliyahaba.

Nebi Haaruun (calayhi salaam): waxaa lagu fasiraa guul, boqortooyo, sarrayn, xasilloonni qalbiga ah, qaraabo-xidhiidhin, wanaag-faris iyo xumaan-reebid.

Nebi Daa'uud (calayhi salaam): Waxaa lagu fasiraa, aqbalaadda ducada. Sidoo kale waxa lagu fasiraa heshiis xikmadaysan, halka mar kale lagu fasiro cilmiga, fiqiga, camalka saalixa ah. Halka mar kalena lagu fasiro quraan-xafidka iyo ruux cod debecsan.

Nebi Sakariye (calayhi salaam): Haddii uu ku riyoodo riyadisaa waxaa loogu fasiraa in Ilaahay ubad saalixa siinayo. Sidoo kale waxaa lagu fasiraa iimanka xooggan iyo hanuunka.

Nebi Yaxye (calayhi salaam): Haddii uu ku riyoodo Nebi Yaxye calayhi salaam, waxaa riyadiisaa lagu fasirayaa, in Ilaahay siinayo ubad saalixa oo quraan xafid ah. Sidoo kale waxaa lagu fasiraa toosnaan sharciga Ilaahay lagu toosan yahay iyo in uu qofkaasi leeyahay ehel wanaagga ka shaqeeya.

Nebi Ciise (calayhi salaam): Waxaa lagu fasiraa cilmiga, kitaabka iyo sunnaha, sidoo kale bishaaro wanaagsan, ilmo wanaagsan iyo hooyo wanaagsan, khaatumo wanaagsan, sarrayn adduunyo iyo aakhiraba ah,

Nebi Maxamed (calayhi salaatu wa salam): Waxaa lagu fasiraa iska ilaalinta macaasida, rumaynta Ilaahay iyo nebigiisaba, ilaalinta salaadda, bixinta sakada, Iska ilaalinta bidcada, samirka, ilaalinta Ilaahay ilaalinayo qofka riyadaa ku riyooda, oo shar walba laga ilaalinayo, ka fogaanshaha dadka qalloocsan, ilaalinta salaatu laylka, safarka cimrada iyo xajka, muuqashada qofku ka dhex muuqdo dadka.

Riyada Malaa'igta

Aragtida malaa'igta, waxaa lagu fasiraa in ay tahay dhawaansho Ilaahay loogu dhawaanayo cilmiga wanaagsan, tawxiidka suubban iyo cadaalad dadka dhexdooda ah. Sidoo kale waxaa lagu fasiraa iska ilaalinta shirkiga. Iska ilaalinta khaatumo-xumada, u degdegga toobadda ku sugnaanta diinta, iska ilaalinta markhaati beenaalaha, shirkiga iyo nifaaqa.

Malaa'igtu waa abuur ka mid ah khalqiga Alle abuuray, waana addoomo daacada u ah Ilaahay oo aan caasiyin, waxa uu ku amrana qabta. Waxa uu ka abuuray nuurka, labna ma aha dheddigna ma aha. Waxna ma cunaan, waxna ma cabbaan. Ma dhalaan mana gaajoodaan, ma tarmaan, mana hammoodan. Jiritaankooda In la rumeeyana waa tiir tiirarka ka mid ah, tiradooda Ilaahay uun baa og. Aad ayaa ay u badan tahay.

- ❖ **Jibriil:** waa malagga qaabbilsan waxyiga. Waxaa lagu fasiraa guul, xagga Ilaahay iyo la rafiiqida saaxiibka wanaagsan. Iska ilaalinta raacidda, ehlu fawaaxishta. Sidoo kale waxaa lagu fasiraa, toosnaan halka dhaqanka iyo ficilka ba ah. Sidoo kale waxaa lagu fasiraa quraan-xiftiga iyo in ay waajib tahay jacaylka Jibriil.

Waad riyootee runtu waa maxay?

- ❖ **Mikaa'iil:** Sida aynu ognahay, Mikaa'iil magaciisi si toos ah ayaa uu quraanku u xusay. Waana Malagga qaabbilsan roobka sida lagu sheegay, tafsiir Ibnu Kasiir "*Haddii ruux uu ku riyoodo, riyadiisaa waxa lagu fasiraya in magaalada uu joogo qofka riyooday roob wanaagsan heli doono, sixir bararkuna uu hoos uga dhacayo. Sidoo kale waxaa lagu fasiraa ducada iyo in dhibaataada adduun laga badbaadayo. Mar kale waxaa lagu fasiraa iska ilalinta shirkiga, nifaaqa iyo danbiga. Sidoo kale waxaa lagu fasiraa guul laga helayo qofkii daallinka ahaa ee xaqa ka soo horjeeda*".
- ❖ **Israafiil:** Waa malagga qaabbilsan suur afuufka. Waxaa lagu fasiraa iimaanka iyo in wax walba Ilaahay maamulo. Iyo iska ilalinta fitnooyinka. Sidoo kale waxaa lagu fasiraa, iska ilaalinta rixin goynta. Sidoo kale waxaa lagu fasiraa soo dhawaanshaha halaagga daallimiinta. Sidoo kale waxaa lagu fasiraa soo bixitaanka hordhaca dhibaatooyin waawayn.
- ❖ **Cisraa'iil:** Waa malagga qaabbilsan naf-ka-qaadista. Waxaa lagu fasiraa soo dhawaanshaha geerida. Iska ilaalinta khaatumo xumada ayay sabab u yihiin, shirkiga, gaalnimada iyo munaafaqnimada. Sidoo kale waxaa lagu fasiraa khaatumo-wanaagga iyo tawxiidka dartii. Sidoo kale waxaa lagu fasiraa cimri dhererka qofka muuminka ah.

Riyooyinka Saxaabada

Waa kuma saxaabiggu?

Saxaabigu waa qofkii nebiga la kulmay ee muslimay, ilaa intii uu ka dhimanayayna muslimka ahaa. Saxaabada tiradooda waa la isku khilaafsan yahay. Laakiin Sakhaawi kitaabkiisa "Fatax Al-muqiis", waxa uu soo wariyay. Hadalkii, Abu Sacra, oo ahaa macallinkii ninkii qoray kitaabkii (saxiixu Muslim) in ay saxbaadu tiradooda yihiin (114kun). Haddaba riyoooyinka saxaabadu waxa ay calaamad u tahay, aragtida la arkayo iyaga oo nool. Qofku hadduu ku riyoodo in uu qaabbilay saxaabada, taasi waxa ay caddaysanysaa in qofkaa iimankiisu wanaagsan

Telegram:- Same Wade

yahay, ama diintiisu buuxdo. Sidoo kale waxaa lagu fasiraa cisi, sharaf iyo horumar. Haddii uu ku riyoodo isaga oo saxaabadii ka mid noqday, riyadiisa waxaa lagu fasirayaa dhibaatooyin ku dhacaya, balse libinta uu qaadanayo. Haddii riyada saxaabadu ku soo noqnoqotona waxaa lagu fasiraa in uu helayo nolol wanaagsan.

Abuubakar Siddiiq (Radiyahallaahu canhu)

Waxaa lagu fasiraa guul diinta ah iyo sunnaha nebiga iyo sidoo kala sarrayn dadka dhexdooda ah. Sidoo kale waxaa lagu fasiraa isa saamaxaadda. Sidoo kale waxaa lagu micneeyaa jacayl dadku jecel yihiin qofkaa riyooday iyo dhawaansho uu Ilaahay u dhaw yahay.

Cumar Binu Khaddaab (radiyallaahu canhu)

Waxaa lagu fasiraa guul diintu helayso, iimaan sugan, cilmi badan, Alla ka cabsi badan, xikmad badan iyo cibaado badan,

Cusmaan Binu Cafaan (radiyallaahu canhu)

Waxaa lagu fasiraa xishoodka, haybadda, xaasidka badan, arsaaqad badan, shahaado badan iyo shahiid ku sugnaan diinta Alle ah run sheeg, cilmi badan iyo sarrayn.

Cali Binu Abi Daalib (radiyalaahu canhu)

Waxaa lagu fasiraa gargaar diinta ah oo naf iyo maalba leh. Waxaa kale oo lagu fasiraa jacaylka dadka, imaamnimo dadka dhexdiisa ah. Iska ilaalin munaafaqiinta, ilaalinta salaadaha, cilmi iyo fiqi badan, aqoon iyo garsoornimo.

Abu-Cubayda Ibnu Jaraax (radiyallaahu canhu)

Jacaylka sunnaha nebiga, ammaano badan, hoggaamiye iyo xikmad, u shaqayn iyo gargaar diinta loo gargaarayo.

Dalxa Ibnu Cubaydi Laah (Radiyahallaahu canhu)

Shahiidnimo, khayr badnaan, sunne jacayliyo jacaylka sadaqada.

Waad riyootee runtu waa maxay?

Asubayr Ibnu Al Cawaam (radiyallaahu canhu)

Haddii ku riyoodo waxa uu noqonaya qof dhaqaale yeelan doona iyo deeqsi sadaqada ku wanaagsan.

Sacad Ibnu Abii Waqaas (radiyallaahu canhu)

Jacaylka sunnaha iyo u gargaaridda diinta naf iyo maalba, ku adkaanta diinta iyo u cararka khayrka. Tawbadda iyo Ilaahay u soo noqodka, duco-aqbalka iyo xaaraan ka fogaansha ah.

Saciid Ibnu Sayd (radiyallaahu canhu) Guul, ka badbaadidda dadka beentooda, xasadka, saaxiibka wanaagsan iyo khaatumo wanaagsan, u cararka toobadda iyo ku samirka diinta.

Sidaynu wada ognahayba raggaasi waa raggii nebigu naxariis iyo nabad galyo korkiisa ha ahaatee uu ugu bishaareeyay jannada, sidii axaadiis badan oo nebiga ka soo sugnaatay ay sheegayaan.

CUTUBKA TOBNAAD

Faa'iidooyinka laga dheehanayo suuratu Yuusuf, (cilmiga riyada fasiraadda riyada)

Suuratu Yuusuf, waa suurad Maki ah, Maka ayayna ku soo degtay. Aayadaheedu waa 111, waxa ayna soo degtay, suuratu Huud ka dib. Waa suuradda gundhigga u ah riyada iyo fasiraaddeeda. Aayadaha mawduucan fasiraadda riyootoyinku ay ka bilaabmataa waa aayadda 4^{aad} ee suuratu Yuusuf. Waxa aynu wax yar ka soo qaadan doonnaa suuraddan Yuusuf,

Faa'iidooyinka cilmiga ah ee laga faa'iidayo suuratu Yuusuf

1. **Runta riyada** nebiyada intaan loo soo waxyoon.
2. **Riyada carruurta** yaryar ee saqiirka ahi way rumoobi kartaa.
3. **Calaamadaha** nebinnimadda waxaa ka mid ah in riyada dhabta ilmaha yar iyo odayga da'da ahiba, ayna illoobi karayn.
4. **Meereyaasha:** Waxaa lagu fasiraa walaalaha iyo culimada.
5. **Namberka 11:** (kow iyo toban) waxaa lagu fasiraa duriyadda iyo isku xidhnaashaha walaalaha.
6. **Cadceeda:** waxaa lagu fasiraa hooyada wanaagsan.
7. **Dayaxa:** waxaa lagu fasiraa aabbaha culimada ah ee wanaagsan.
8. **Sujuudda:** cadceedda, dayaxa iyo meereyaashu waxa ay calaamad u tahay qiimaha qofka ku riyooday uu bulshada ku dhex leeyahay.

Faa'iidooyinka cilmiga riyada ee laga dheehanayo suuratu Yuusuf, aayaddeeda 5^{aad}

1. In la qariyo iyo in laga sheekeeyo nimcooyinka Ilaahay hadday maslaxadi ku jirto way bannaan tahay, iyada oo xasadka la iska

Waad riyootee runtu waa maxay?

ilaalinayo.

Riyada aabbo inankiisii wacdiyaya waxaa lagu fasiraa, jacayl aabbannimo iyo baqasho uu uga baqayo xasadka, sunnaha waxaa ka mid ah ina aynu riyada ka sheekaynno, sidaa quraanku inoo sheegay.

Shirqoolka: waxaa lagu fasiraa shuqul xun oo shaydaanka ah. Wax walba wixii cadaw ah ee walaalaha dhexdooda ahi waa riyo shaydaan, in la iska ilaaliyo in riyo lagaga sheekeeyo meel ay ku badan yihiin, dad xasad ah, oo masayr badan.

Faa'iidooyinka cilmiga ah ee laga faa'iidaysanayo suuratu Yuusuf, aayaddeeda 6^{aad}

1. Fasiraadda riyadu waa cilmi sharci ah.
2. Riyooyinka magacyada kale ee quraanku sheegayo waxaa ka mid ah ee la micnaha ah, sheekooyinka ama wararka (al axaadiis).
3. Qoyska wanaagsan ee cilmiga lagu tuhmayo, waxaa ka soo bixi kara ruux ku wanaagsan fasiraadda cilmiga riyoooyinka.

Faa'iidooyinka cilmiga ah ee laga faa'iidaysanayo suuratu yuusuf, Aayaddeeda 21-22^{aad}

1. Qofka wax iibsada riyada dhexdeeda, waxaa riyadiisa lagu fasirayaa farash iyo cisi.
2. Aragtida Masar, lagu riyoodaa waa cisi iyo sharaf.
3. Aragtida, ubadka waxaa lagu fasiraa durriyadda.
4. Aragtida ubadka wanaagsan waxaa lagu fasiraa, in qofka ku riyoodaa uu cilmi helayo.
5. Aragtida karaamaynta riyada dhexdeeda, waxaa lagu fasiraa manfacad qof kale uu helayo.

Faa'iidooyinka cilmiga ah ee laga faa'iidaysanayo suuratu Yuusuf, aayaddeeda, 36^{aad}

1. Haddii uu ruux uu ku riyoodo isaga oo jeel galay, riyadiisaa waxa lagu fasirayaa murugo iyo walbahaar.
2. Way dhici kartaa in riyada isku dhex arko.
3. Miiridda khamiraga waxaa lagu fasiraa belaayo iyo dhibaato.
4. Roodhi madaxa lagu qaadayo waxaa lagu fasiraa arsaaqda.
5. Haddii shinbiri cunto roodhidaa madaxa lagu qaadayo waxaa lagu fasiraa cimrigii oo soo gabagaboobaya.
6. Fasiraadda riyada waxaa kugu waajib ah inaad ula tagto ruux aqoon dheer u leh micnaynta riyada,

Faa'iidooyinka cilmiga ah ee laga faa'iidaysanayo suuratu Yuusuf, aayadeedda 37-38^{aad}

1. Sugnaanta fasiraadda nebi Yuusuf calayhi salaam.
2. Cuntada riyada dhexdeeda ku jirta waxaa lagu fasiraa risiq.
3. Inaad si sax ah riyo u fasirto waa Ilaahay xaggiisa iyo hanuunintiisa.
4. Sifooyinka looga baahan yahay qofka riyada fasira waxa ka mid ah inuu caqiido saafiya yeesho iyo tawxiid suubban.

Faa'iidooyinka cilmiga ah ee laga faa'iidaysanayo suuratu Yuusuf, aayaddeeda 39-42^{aad}

1. Saaxiibka lagu riyoodo waxaa lagu fasiraa, wanaagga la isku kashanayo.iyo cilmiga wanaagsan.
2. Fasiraadda nabiyadu riyo ay fasiraan waa mid xaqah oo run ah, siday u dhigeenna u dhacda.
3. Haddii ruux ku riyoodo isaga oo dhex fadhiya jeel, riyadiisaa waxaa lagu fasiraa hammi murugo badan.
4. Ilawshiyaha riyada dhexdeeda, waxaa lagu fasiraa calaamadda shaydaanka.

Faa'idooyinka cilmiga ah ee laga faa'iidayso **suuratu Yuusuf, aayaddeeda 43-49^{aad}**

1. Fasiraadda 7 marka la fasirayo waxaa lagu fasiraa khayr soo socda.
2. Riyada lo'da shilshilis waxaa lagu fasiraa inay tahay sannado barwaaqo.
3. Lo'da cunaysa lo'da waxaa lagu fasiraa sanado is bedbeddela ama khayr khayr ku xigo. Hadday dhammaantood naaxnaaxsan yihiin ama khayr abaar iyo daal ku xigo hadday kuwa waydda ahi kuwa shilshilis cunaan.
4. Riyooyinka iyo fasiraaddoodu illaa qarniyo tegay ayay soo jirtay.
5. Waxaa qurux badan haddii aanu qofka wax fasirayaa waxba ka garanayn riyadaa la micnaynayo inuu yidhaa waxba ka yaqiinsan mayo.
6. Nebi Yuusuf calayhi salaam, waa aabbaha fasiraadda riyooyinka.
7. Riyada haddii si sax ah loo fasiro, badbaado ayay ruuxa u noqotaa.

Faa'idooyinka cilmiga ah ee laga faa'iidayso **suuratu Yuusuf, aayaddeeda 100 ilaa 101^{aad}**

1. Wixii sare loo qaado waxa lagu fasiraa guul iyo sarrayn.
2. Labada waalid oo meelsare la fadhiisiyaa waxay calaamad u tahay ama lagu fasiraa wanaag loo furayo.
3. Riyada kursiga meel sare yaalla, waxaa lagu fasiraa dhaqaale, sarrayniyo boqortooyo.
4. Sujuudda ehelku u sujuudayaan qofku waa sarrayn iyo cilmi uu dheer yahay.
5. Riyada dhabta ah qofkii ku riyooday ma illaawo.
6. Fasiraadda riyadu waa hibo Ilaahay qofka siiyo iyo barashadeeduba.

7. Qofka Ilaahay hibo u siiyay fasiraadda riyoooyinka khayr badan baa u danbeeya.

Midabka riyada

Dadka cilmigan xiisaha u leh, waxay is waydiiyaan, riyadu ma caddaan iyo madaw baa? Mise midab waxa aynu haddaba halkan ka caddaynaynaa natiijadii ay caddeeyeen dadka cilmigan baadhaa inay riyada aadamuhu ku riyoodaa ay tahay mid midab leh oo ka kooban inta midab ee adduunyadda lagu yaqaan. Haddii ruux ku riyoodo tufaax cas, waxba iska beddeli maayaan oo waa casaankiisa uun, sidoo kale haddii uu ku riyoodo, geed gob ah oo cagaaran isna cagaarkaa waxba iska beddeli maayaan.

Riyada Jinka iyo Shaydaanka

Jinka

Haddii qofku jin ku riyoodo isaga oo quraan baraya, wuxuu helayaa xil sare, sida quraanku sheegay, suuratu Jin, aayadda 1^{aad}. **قل أوحى إلي أنه** استمع نفر من الجن فقالوا إنا سمعنا قرآنا عجا

Riyada noocaas ah mar kale waxaa lagu fasiraa dab, olol iyo meel gubanaysa.

Sida ku cad suuraatu Xijir aayaddeeda 27^{aad}. **وَالْجَانَّ خَلْقْنَاهُ مِنْ قَبْلُ مِنْ نَّارٍ** (السَّمُوم) sidoo kale waxaa lagu fasiraa dabaysha iyo dedeg darteed. Sidoo waxaa lagu fasiraa sixir

Shaydaanka:

Waxaa lagu fasiraa in uu yahay cadaw daciif ah. Haddii qof uu arko shaydaan daba socda, waa cadaw. Sida ku cad suuratu Acraaf aayaddeeda, 175^{aad} **وَأَنْتَ عَلَيْهِمْ نَبَأُ الَّذِي آتَيْنَاهُ آيَاتِنَا فَانْسَلَخْ مِنْهَا فَاتَّبَعَهُ الشَّيْطَانُ** فَكَانَ مِنَ الْغَاوِينَ

Waad riyootee runtu waa maxay?

Haddii qof uu ku riyoodo shaydaan ku soo degaya waxaa lagu fashirayaa micnaha riyadiisaa, dembi u shaqaysanayo. Sida ay inoo sheegayso, suuratu Shucaraa aayaddeeda 221-222^{aad}.

هَلْ أَنْبِئُكُمْ عَلَىٰ مَنْ تَنْزَلُ الشَّيَاطِينُ ۖ تَنْزَلُ عَلَىٰ كُلِّ آفَاكٍ أَثِيمٍ

Qofka ku riyooda shayaadiinta oo adeecaysa, waxaa lagu micneeyaa riyadiisaa inuu qoom u talin doono. Xikmad iyo cilmina Alle waa ku galladaa. Sida aynu ka akhrisan karno suuratu Saba aayaddeeda 12aad

وَلِسُلَيْمَانَ الرِّيحَ غُدُوها شَهْرٌ وَرَوَاحُها شَهْرٌ وَأَسَلْنَا لَهُ عَيْنَ الْقِطْرِ وَمِنَ الْجِنِّ مَن يَعْمَلُ بَيْنَ يَدَيْهِ بِإِذْنِ رَبِّهِ وَمَن يَزِغْ مِنْهُمْ عَنَ أَمْرِنَا نُدْغُهُ مِنَ عَذَابِ السَّعِيرِ

Haddii qof uu ku riyoodo shaydaanka oo faraxsan waxaa lagu micneeyaa riyada noocaasahinuu yahay qof shahwaadkiisa daba socda”

CUTUBKA KOW IYO TOBNAAD

Riyada haddii la fasiro sidii loo fasiray ma u dhacdaa?

Culimada ku xeesha dheer cilmigani fasiraadda riyooyinku waxay isku khilaafeen riyadu ma xaqiiqo jirtaa oo sideeda u taagan baa? Mise kolba waxay la soco taa ciddii fasiraysa iyo sidii loo fasiro?

Qolada kowaad: Waxay aaminsan yihiin in riyadu sidii loo fasiro u dhacdo, waxa ayna daliishadaan, xadiiskii uu nabigu yidhi ee Imaamu Axmed soo weriyay “*Riyadu shinbir lugteed bay saaran tahay haddii la fasirana way dhacdaa*”.

Taabicigii Caddaa Ibnu Abii Rabaax: waxa uu yidhi “*Riyadu hadba waa sidii loo fasiro*”. Waxa uu sii raaciyayna hadalkii ahaa, “*Haddii Ilaahay qaddaro in riyadaasi dhacdo wuxuu u sakhiraa in qofkii sidii ay u dhici lahayd loogu fasiro*”. Sidaa darteed waa kii nebigu lahaa, riyada qof cilmi u leh u dhiib ama qof nasteex kuu ah. In kale oo ka midah culimada aqoon ta dheer u leh cilmigan fasiraadda riyooyinku waxay aaminsan yihiin, inay riyadu leedahay run sugan oo aanay shaqo ku lahayn fasiraadda riyada oo sidaa ah haddii fasiraaddu ay waa faqdana waa wanaag, haddii kale na waxay ka leexatay dhabbadii la sheegay.

Waxa aynu tusaale, u soo qaadan karnaa, qisadii nebi Yuusuf ee raggii boqorka la joogay ee aqoonta dheer u lahaa cilmigan, markii uu weydiiyay boqorkii fasiraadda riyadiisa, waa kuwii lahaa “*Waa riyooyin isku dhex jira oo aannan aqoon u lahayn*”. Ka dib waa kii nebi Yuusuf ku fasiray, sannado abaaro ah iyo sannado barwaaqo ah. Waana tii u dhacday sidii uu u fasiray, halka qoladii hore ay fasiraddoodii ay dhici wayday.

Qolada saddexaad ee ka mid ah Culimada aynu soo sheegnay, waxa ay isku dayeen in ay labada qolo ba isku keenaan waxa ayna yidhaahdeen “*Qofka fasirayaa haddii uu xaqiiqadii riyada taabto oo Ilaahay*

waafajiyo sidii nebigu sheegay ee shimbirta lugteeda ay saarnayd riyadu ayay ka dhacaysaa”

Riyooyinkii nebiga

Nebiga (naxariis iyo nabad galyo korkiisa ah ahaatee), waxa uu arkay riyooyin badan oo aynu ka soo qaadan doonno, dhawr ka mid ah riyooyinka:

1. Sida xadiiska Bukhaari uu sheegay ee nebigu yidhi “*Aniga oo hurday, dadku i hor marayeen iyaga oo khamiisyo xidhan (shaadhadh) oo qaybo ka mid ah hu’ga ay xidhan yihiin ilaa naasaha qarinyaan. In kale oo ka mid ihna ay ka hoosayso, dabeetana Cumar Ibnu Khaddaab baa soo marayay isaga oo khamis jiidaya”*. Saxaabadii ayaa weydiisay. Waxa uu nebigu ku fasiray riyadaa, diinta Cumar heerkay gaadhsiisnayd.
2. Xadiiskii Bukhaari soo wariyay in uu nebigu uu yidhi “*Waxa aan ku riyooday aniga oo hurda, in weel caano ku jiraan la ii keenay. Waan cabay oo waanna ka dhergay. Intii soo hadhayna Cumar ayaan siiyay, iyada oo asxaabadii weydiinayso”* waxa uu ku fasiray riyadaa nebigu cilmiga iyo aqoonta.
3. Xadiiskii saxiixu Muslim soo wariyay, ee ahaa in uu nebigu ku riyooday isaga oo jooga gurigii saxaabigii Cuqba, in loo keenay timir. Nebigu waxa uu ku fasiray riyadaa, sarrayn adduun iyo aakhiraba ah iyo diinta islaamka oo meel sare gaadhay.
4. Waxa uu nebigu ku riyooday in uu ka hijrooday Maka, una hijrooday magaalo geedo timira leh. Waxa uu nebigu riyadaa ku fasiray, in magaaladu Yamaama ay tahay balse Madiina ayay noqotay.

Riyoooyinki Saxaabada

1. Xadiiskii Ibnu Maaji soo wariyay ee ahaa in nin reer miyi ahi, nebiga u yimi kuna yidhi *“Waxa aan ku riyooday iyada oo madaxa la iga gooyay anna aan daba socdo”*, inta uu nebigu ku qayliyay ayaa uu ku yidhi *“Ha! iiga sheekayn dadka, hurdada shaydaanku kaaga ciyaaray”*.
2. Xadiiskii Abu Daauud soo wariyay ee ahaa in nebigu markii uu salaaddii subax tukiyay saxaabadii inta uu soo jeestay waydiiyay *“Cid idinka mid ahi xalay ma aragtay riyo?”*. Ninbaa *“Haa”* yidhi, waxa aanu yidhi *“Waxa aan arkay in cirka miisan ka soo degay. Dabeeta nebi Allaw adiga iyo Abuu Bakar ayaa la iidnku miisaamay, adiga ayaana cuslaaday. Dabeeto Abuu Bakar iyo Cumar baa la saaray, Abuu Bakar baana cuslaaday. Mar kale Cumar iyo Cismaan baa la miisaamay, Cumar baana cuslaaday.*
3. Xadiiksii Imaamu Axmed soo wariyay, ee ahaa in saxaabigii Cabdillaahi Ibnu Caamir ku riyooday in farna uu subag ku haystay, farna malab uu muudmuud sanayo. Subaxii buu nebiga weydiiday, waxa uu na nebigu ugu fasiray in labada kitaab aad akhriyi doonto tawraadda iyo quraankaba. Waanu akhriyi jiray.
4. Xadiiskii Ibnu Xubaan soo weriyay ee ahaa in uu Cabdillaahi Ibnu Cumar, ku riyooday in sijaayad xariir ka samaysani, janadda kolba meel ugula duulayso. Dabeetana Cabdillaahi Ibnu Cumar waxa u uga sheekeeyay walaashii Xafsa, waliishiina wax ay uga sheekaysay nebiga (naxariis iyo nabad galyo korkiisa ha ahaatee). Waxa uu nebigu ugu fasiray riyadaa, *“Walaalkaa Cabdullaah, in uu yahay qof hanuunsan oo diin leh”*.
5. Ibnu Maaja Xadiis uu soo weriyay, Umu fadal ayaa nebiga waxa ay ku tidhi *“Waxa aan ku riyooday in xubin xubnahaaga ka mid ahi ay gurigayga taallo”*. Waxa uu ku yidhi, uguna fasiray,

“Khayr ayaad aragtay, waayo Faadumo ayaa dhalaysa, adiga ayaana nuujinaya” sidii bayna u dhacday oo Xasan iyo Xuseen midkood ayay naas ku nuujisay.

Fasiraadda riyoooyinkii ibnu Siiriin!

Ibnu Siiriin waa taabici ku xeel dheer fasiraadda cilmiga riyoooyinka. Waxa uu dhashay xilligii Cismaan Ibnu Cafaan khaliifada muslimiinta ahaa. Aabbihiis Siriinna addoon buu u ahaa saxabigii Anas Ibnu Maalik, oo markii danbe xoreeyay. Waxa uu wax ka bartay, saxaabo badan oo uu ka mid ahaa Abu-Hurayra iyo Ibnu Cabbaas. Waxaa la soo weriyay in mar mar boqol riyo la weydiin jiray, oo aanu midna ka jawaabi jirin. Isaga oo odhan jiray *“Ilaahay ka cabsada, marka aad soo jeeddana waxba ku yeeli mayso, waxaad ku aragto riyada”*

Ibnu Khaalid waxa uu yidhi *“Maalin aan la fadhiistay Ibnu Siiriin 40 qiso ayaa la weydiiday mid kali ah ayaa uu ka jawaabay.”*

Fasiraadda kowaad ee riyada,

Ninbaa Ibnu Siiriin u yimi waxa uu ku yidhi *“Waxa aan riyo ku arkay xaaskayga, oo laba dhegood xidhan oo midina dahab tahay midina lacag”*. Waxa uu Ibnu Siriin ugu jawaab celiyay *“Waxaa laga yabaa in aad laba dalqadood xaaskaaga furtay, oo dalqadi kuu hadhsan tahay”*. Ninkii oo markhaati uga noqday Ibnu Siiriin in uu laba jeer furay gabadhiisa marna u hadhay.

Fasiraadda riyada labaad

Ninbaa Ibnu Siriin u yimi oo riyo ugu sheekeeyay, waxaanu ku yidhi *“waxaan arkay bawdyadayda oo cas, timana leh. Markaasaan nin u yeedhay oo an ku idhi timaha ka xiir bawdadayda”*. Ibnu Siiriin oo ka fasiraya riyadaa ayaa waxaa uu yidhi *“Waxaad tahay nin deyn lagu leeyahay oo nin qaraabadiisii ka bixinayaan”*.

Hal-tebinta riyada saddexaad

Nin baa Ibnu Siiriin u yimid oo waxa uu ku yidhi “*Waxa aan arkay aniga oo hal madiibad oo laba dalool leh biyo ka qubaya, daloolna biyo dhadhaan ka cabbaya dolool na biyo macaan*” Ibnu Siiriin oo riyada micnaynaya ayaa waxa uu yidhi “*Xaas baad leedahay. Xaaskaasina walaal bay leedahay, markaa walaasheed ayaad shukaansatay’e Ilaahay ka cabso*”. Ninkiina waxa uu markaati uga noqday arrinkaa, waxa uuna yidhi “*Waa runtaa Allena waan u toobbad keenay*”.

Micnaynaynta riyada afraad

Nin baa waxa uu yidhi “*Waxaan ku riyooday aniga oo cunaya farahayga*”. Waxa uu Ibnu Siiriin ku yidhi “*Waxa aad maalaysaa xooggaaga*”.

Fasiraadda riyada shanaad

Nin baa waxa uu yidhi “*Waxa aan ku riyooday in aan ku joogsaday xabbad timir ah. Dabadeed uu ka soo dhex baxay jiir*”. Waxa uu Ibnu Siiriin ku fasiray riyadaa, in uu gabadh wanaagsan guursan doono, inan xumina u dhalan doonto. Sideediina way u dhacday.

Fasiraadda riyada lixaad

Nin baa u yimi Ibnu Siiriin waxa uu ku yidhi “*Waxa aan ku riyooday aniga oo gadhkaygii aad u dheeraaday ee garo*”. Waxa uu ku yidhi Ibnu Siiriin “*Ma masaajid baad ka eedaan taa?*”. Waxa uu ninkii ugu jawaabay “*Haa!*”. Ibnu Siiriin waxa uu ku yidhi “*Guryaha jaarka ha khaawisin, hana eegin dumarka*”.

Waad riyootee runtu waa maxay?

Riyooyinkii uu fasiray qoraagu buuggu

Inta badan kuma aanu soo qaadan Diiwankan riyooyin fog oo qarniyo hore dhacay, balse waxa aanu isku deyeynaa in aanu soo qaadanno riyoooyinkii aan fasiray ee ay ku riyoodaan dadkeenna in ka mid ah. Aniga oo isku dayey in aan fasiro marka aan waraysto ruuxa riyooday haddii aan wax ka garto, Allena i waafajiyo.

Qisada kowaad:

Waxaa maalin maalmaha ka mid ah ii yimi nin ka mid ah dadka Soomaalida ah. Waxa aanu ila wadaagay riyo uu doonayay in aan u fasiro. Waanna isku dayay. Waxa uu yidhi ninkii doonayay in riyada loo fasiraa *“Waxa aan ku riyooday aniga oo gurigii ka cararaya, Bisad madawina guriga hortiiisa taal oo ay weynaanaysa marba marka ka dambeeya”*.

Waxa aanan riyadaa fadirkeedii ku idhi *“Guriga aad ka cararaysaa waa dhibaato kaa haysata xaaskaaga, Bisadda madoobina waa sixir. Weynaanta ay weynaanaysana waa sixirkii oo sii weynaanaya. Waxa aanan talo ku siiyay in ay quraan isa saaraan isaga iyo xaaskiisu gurigana suuratu Baqra ku akhriyaan subax walba”*. Allaahu aclam.

Qisaada labaad:

Gabadh baa waxa ay ku riyootay had iyo jeer in ay biibbiile daba cararayso. Waxana riyadeeda fadirkeedu noqotay, in ay tahay ballan darro. Waana ay ka sii xun tahay haddii biibbiluhu riyada dhexdeeda ku qarxo. Maxaa yeelay sidaa si leeg waxaa lagu fasiraa in ay il xaasid jiri karayso ama sixir oo shadaadiinta badhi sidaa oo kale u duusho. *Allaahu aclam*.

Qisada saddexaad:

Ninbaa ii yimi waxa aanu ii sheegay in uu ku riyoodo wiiggiiba saddex habeen isaga oo diyaarad raacaya. Waxa aanan ku idhi *“Meel dheer baad u safri kartaa, dal shisheeyana waad ka guursan kartaa”*. Muddo ka dib waxaa mar kale igu soo nodqay ninkii riyadan ku riyooday waxa aanu ii

sheegay, in wiil uu dhalay ka guursaday gabadh Filibiiniyad ah, isaguna oo shaqo ka helay dal aan dalkeenna ahayn oo shisheeye ah. *Allaahu aclam.*

Qisada afraad:

Nin baa waxa uu ku riyooday isaga oo cabbaya sigaar, balse asal ahaan aanu cabbin sigaarka. Waxa anan ugu fadiray riyadiisa in ay noqon karto dhibaato ku dhacaysa. Sidoo kale waxa ay noqon kartaa noloshiisa iyo dhaqaalihiiisa oo horumara, maxaa yeelay qiiqu korbuu u baxaa, markaa waa riyo wanaagsan. *Allaahu aclam.*

Qisada shanaad:

Nin baa waxa uu ku riyooday, isaga oo malab biyo ku laaqday oo cabbaya. Waxa ayna fasiraaddeedii noqotay xanuun Ilaahay ka siinayo caafimaad. *Allaahu aclam.*

Qisada lixaad:

Gabadh baa waxa ay ku riyootay in ay ilkaheedii ka soo dhaceen. Waxa anan ugu fadiray, haddii ay xaas leedahay, in guurkaasi meel xun marayo. Hadday doonnan tahayna in ay ninkii kala noqonayaan. Waxa ii sheegatay in nin ay u doonnanayad kala noqdeen. *Allaahu aclam.*

Qisada toddobaad:

Gabadh baa waxay ku riyootay iyada oo fadhida, fadhiga gurigeeda oo ay miiska tiifiigu saaran yahay hoostiisa laba jiir fadhiyaan. Riyadaa waxa aan ugu fadiray, in Jiirku dumar xunxun yahay, tv-guna hadal aan faa'iido lahayn yahay. Miiska hoostiisuna waxa ay calaamad u tahay arrin la qarinyo. Halka Carabtuna ay ku maahmaahdo, “*Arrintaasi miiska hoostiisay ku dhammaatay*”. Fadhiga ay ku fadhidayna, waxa aynu ku fadiraynaa in ay tahay bulshadii. Ujeeddada guud ee fasiraadduna, waxa ay noqonaysaa in ay laba dumari isku dayaan in ay dhibaato kuu geystaan ama sumcaddaada ku ciyaaraan. *Allaahu aclam.*

Qisada siddeedaad

Nin baa ii yimi waxa uuna igu yidhi “*Waxa aan ku riyooday, aniga oo xadhig afka iska gelinaya, calooshana ku dhaadhicinaya*”. Dabeeto waxaan ku idhi “*Waxaa laga yaabaa in aad dhakhtar u baahan tahay oo caloosha kameradda kaaga dhaadhiciya*”. Waxa uuna ii sheegay markaan intaa ku idhi, in uu nabar caloosha kaga yaal. Ballanna uu sugayo. *Allaahu aclam.*

Qisada sagaalaad

Nin baa waxa uu ku riyooday afkiisa oo ur xumi ka soo baxayso. Waxa aanan riyadaa ugu fashiray in uu saaxiibbo xun leeyahay oo ay tahay in uu iska beddelo, waxa uuna ii sheegay in uu xabsi ka soo baxay! *Allaahu aclam.*

Qisada tobnaad

Gabadh baa waxa ay ku riyootay aabbaheed oo dhintay, oo hotel deggen, oo leh “*Meeshu miyaanay qaboojiye (Ac) lahayn?*”, waxaan ugu fashiray riyadeeda, in aabbaheed sadaqo degdeg ah laga bixiyo oo uu u baahan yahay, carruurtiisuna ay ka gaabiyeen. Xoolo badanna ay ka dhaxleen, oo lagu garanayo hotelkaa. Waayo lama odhan aqal yar, halkaa waxaa ka cad in uu dhaxal badan uga tegay, qaboojiyahuna uu yahay hawo qabaw. Waxa aanay ii sheegtay in uu dhaxal badan uga tegay, weligoodna aanay wax sadaqo ahna ka bixin. Iyaga oo haddana iska ladan. *Allaahu aclam.*

Qisada kow iyo tobnaad

Qof ayaa yidhi “*Waxaan laba habeen oo isku xiga ku riyooday aniga oo dhunkanaya Xajar aswadkii*”. Fasiraadda riyadaasi waxay noqotay, qof sunnihii nebiga raacay dhunkashada dhagaxu, ma sahlana mana fududa. Sidaas darteed waxaa lagu micneeyaa in arrin adag oo aad higsanaysay Ilaahay kuu fududeeyo. Sidoo kale waxaa lagu fasiri karaa guur. *Allaahu aclam.*

Qisada laba iyo tobnad

Nin baa waxa uu igu yidhi *“Waxa aan ku riyooday aniga iyo saaxiibkay oo meel ku wada kaajaynna”*. Labada kaadi ee meesha iskugu tagay waxay calaamad u yihiin xididnimo iyo guur in uu meesha imanayo. *Allaahu aclam.*

Qisada saddex iyo tobnaad

Gabadh baa waxa ay igu tidhi *“Waxa aan ku riyooday ninkaygii oo ila guursaday gabadh kale”*. Taa waxaa lagu fasirayaa khayr badan iyo martabad sare. Waxa ayna ku xidhan tahay martabadda sare iyo khayr kaasiba inta gabadhaa quruxdeedu le’eg tahay gabadhaa uu kula guursaday. *Allaahu aclam.*

Qisada afar iyo tobnaad

Gabadh baa waxa ay igu tidhi *“Waxa aan ku riyooday, gabadh aan necebahay oo aanu jaar nahay iyada oo hadyad isiisay”*. Riyadaa fasiraaddeedu waxa ay noqotay, hadyadda waxaa lagu fasiraa farxad, sidii nebi Saleebaanba uu u sheegay. Waxaa kale oo lagu fasiraa jacayl iyo muxibbo. Sidii nebigu sheegay ee uu yidhi *“Isku hadyadeeya aad is jeclaanisaane”*. Waxa kale oo lagu fasiraa heshiis dad colaadi dhex martay. Waxaa kale oo lagu fasiraa doonis iyo guur. *Allaahu aclam.*

Qisada Shan iyo tobnaad

Gabadh baa waxa ay igu tidhi *“Waxa aan ahay inan gashaanti ah oo aan weli oori noqon. Waxa aan ku riyooday aniga oo mataano dhalaya. Riyada dhexdeeda waxa kale oo aan ku arkay ilkaha oo i xanuunaya, ka dib irbadii suuxintana la igu mudayo. Dabeeto waxa aan xasuustay in aan uur leeyahay. Kolkii aan dhakhtaraddii la socodsiiyay xaalkayga waxa ay ii sheegtay in irbaddan la igu madayaa halisteeda leedahay oo ay suura gal tahay in aan dhalo ilmo aan caafimaad qabin”*. Riyadan waxa aan ku fasiray, *“In uurku yahay nin ama gabadh dhaqaale siyaado ah leh iyo nimcooyin u soo kordhaya. Irbadda suuxintuna waa ka mashquulidda cibaadada Alle. Markaa waxaa kugu waajibaya in aad*

cibaadada u soo noqoto, si aad arsaaqad iyo mataano ba u hesho. Riyadani waxaa lagu fasiray qofkii lahaa in uu cibaadada ka gaabis yahay. *Allaahu aclam.*

Qisada lix iyo tobnaad

Waxa aan ku riyooday “*Aniga oo shinbiraha hadla daba cararaya. Waxay iga cararaanba, markii danbe gacantaan ku qabtay. Dabeeto aad ayaan ugu farxay waayo nooca shimbirtani ma badna waana qaali qiimaheedu*”. Waxa loogu fasiray rayadaa, in qof beenaale ah oo hadal badan uu ku khiyaamayo. Laakiin aad guusha ka qaadayso, ama risiq badan aad ku helayso ka fogaanshaha qofkaa beenaalaha ah ee ku khiyaamaya. *Allaahu aclam.*

Qisada toddoba iyo tobnaad

Waxa aan ku riyooday eedaankii subax ka hor, “*Aniga oo gacanta ku haya Rumaan faro badan oo leh sadaqaan u bixinayaa*”. Rumaanka waxaa lagu fasirayo saddex arrimood; dhaqaale la uruuriyay, gabadh suuban oo saalixad ah iyo magaalo camiran. Riyadani waxa lagu fasiray, dhaqaale badan ood helayaan (reerkiinnu) iyo idinka oo ka raaliya in qayb ka mid ah aad sadaqo u bixinaysaan. *Allaahu aclam.*

Qisada Sideed iyo tobnaad

Waxa aan ku riyooday “*Aniga oo jannada galay, waxa aanna ku faraxsanaa in aan keligay galo. Waxa aanna kula kulmay jannadda qayb ka mid ah nebiyadii, waanan salaamay*”. Riyadan waxaa loogu fisiray in bushaaroooyinka ay ka mid tahay oo farxad iyo rayrayn uu helayo. Aragtiyada nebiyaduna waa cisi iyo sharaf ama magac iyo sumcad dadka dhexdooda ah. Arrintani waxay noqon kartaa adduun iyo akhiraba. *Allaahu aclam.*

Qisada Sagaal iyo tobnaad

Waxa aan ku riyooday “*Tukaan aan leeyahay oo laba jiir oo kala wayn*

ay dhex cararayaan, kana saari kari waayay tukaankii". Jiir ka waxaa lagu fasiraa dumarka aan khayrka lahayn, markaa noloshadaa waxaa soo galaya dumar aan wanaagsanayn. Allaahu aclam.

Qisada labaatanaad

Waxa aan ku riyooday "Aniga, walaalkay iyo hooyaday oo meel saxare ah ku kala lunnay. Dabeeto, dabayli nagu soo dhacday oo haraad na dili gaadhay. Sidaannu saxariirkaa ugu jirnay, ayaanu sheeda ka aragnay meel cagaaran oo biyo leh. Ka dib halkaa ayaanu ka cabnay". Riyadan waxaa loogu fasiray qofkaa, in mashaakil ka dhacayo gurigooda. Intaa ka dibna mushahar iyo badbaado ugu xigi doonto. Allaahu aclam.

Qisada labaatanaad

"Waxa aan ahay gabadh 19 jir ah, laba jeer baan ku riyooday ilmo yar oon dhalay aniga oo naaska siinaya oo naaskiina i xanuunayo. Mar labaadkiina aniga oo dhalaya oo umushaasi xanuun badan la soo maraya se, ka ladnaanaya intaasi ka dib". Naasnuujinta waxaa lagu fasiraa aroos, xanuunka naaskana waxaa lagu fasiray, dhibaatooyin yaryar oo soo gaadhaya balse guurku si fiican ugu dhacayo. Ilamaha aad dhalaysana waa farax, bishaaro iyo badbaado, culays ku saarnaa kaa dejinaya. Markaa ku bishaarayso guur wanaagsan iyo awlaad saalixa inshaa'a Allah. Allaahu aclam.

Qisada kow iyo labaatanaad

"Waxa aan ahay labaatanaad jir aan gadh lahayn, waxaan se ku riyoodday aniga oo gadh madaw yeeshay". Riyadaasi waxa ay calaamad u tahay, toosnaanta iyo hanuunka wanaagsan iyo in aad nebiga sunihiisa raaci doonto. Allaahu aclam.

Qisada laba iyo labaatanaad

"Waxa aan ahay gabadh 18 jir ah, waxa aanan ku riyooday ilkaha oo i liiqliiqanaya, ka dib waxa aan ku xidhay bir. Mar kale waxa aan ku riyoodday aniga oo xijaab cad ku hor xidhanaya muraayada". Riyadan waxa loogu fasiray, in ilkaha liiqliiqanaya ay tahay, in qaraabadaada iyo

chelkaaga xidhiidh wanaagsani aanu ka dhaxayn oo Ilaahay dartii aad adigu u noqonayso nasteex isku soo dhaweeya oo ka dhexsaaraya xumaantii. Xijaabka cadna waxaa lagu fasiray in uu yahay guur aad guursanayso nin saalixa oo wanaagsan. *Allaahu aclam.*

Qisada saddex iyo labaatanaad

“Aabbahay ayaa jeel ku xidhnaa, dabadeed waxa aan ku riyooday Aabbe oo xabisaga ka soo baxay oo baabuur soo raacay, aniguna aanu ku sugayno meel beer ah”. Riyadan waxa loogu fasiray, in aabbahaasi soo baxayo oo cafis loo fidinayo. Riyadaasina waxa ay bishaaro u tahay in arsaaqadi gurigiinna soo galayso. *Allaahu aclam.*

Qisada afar iyo labaatanaad

“Waxa la i mehersaday saddex bilood ka hor laakiin ma aqal gelin, balse laba wiig ka hor, waxa aan ku riyooday fargalkii meherka ee aan xidhnaa isaga oo jabay”. Riyadan jabitaanka fargalka waxaa lagu fasirayaa hannuun iyo badbaado, waayo xadiiskii Caa’isha, nebiga gadhadii u iman jirtay ee su’aalaha waydiin jirtay, waa kii ugu fasiray in dhidibka jabaya uu yahay badbaado. Riyadaada se, wax lagu fasirayaa in guurkaagu uu badbaadayo, waayo nin wanaagsan ayaad la aqal gelayaa. *Allaahu aclam.*

Qisada shan iyo labaatanaad

“Had iyo jeer waxa aan ku riyoodaa aniga oo dhex socda xabaalaha oo awlaadaydana sita”. Riyadan waxaa lagu fasiray, in werwer maskaxdaada ku jira ay tahay. Waxa se mihiima in saddex jeer aad cadhuuf u tufto dhankaaga bidix, shaydaankana iska naarto. *Allaahu aclam.*

Qisada lix iyo labaatanaad

“Waxa aan ahay gabadh jaamacadda dhigata. Waxa aan ku riyooday aniga oo muraayada eegaya oo finan badani wejiga iga soo baxeen, gadh yar oo madawna yeeshay”. Riyadan waxaa loogu fasiray in aad ilaaliso wejigaaga iyo sharaftaada. Ruuxa wanaag kuu sheegana aad wax

ka qaadato. *Allaahu aclam.*

Qisada toddoba iyo labaatanaad

“Hooyaday waxay ku riyootay maalinta qiyaamaha oo bilaabtay, hooyana leedahay laa ilaaha ilalaah. Hooyadayna waa ruux diinta ku fiican”. Riyadan waxa aan ugu fashiray, in qiyaamaha qofka arkaa uu ka badbaadayo dabinnada caddawgiisa, waxana u sugnaanaya guul iyo badbaado, haddii qofka riyada arkay uu yahay ruux Ilaahay ku xidhan. Kalmadaa tawxiidka ee ay ku dhawaaqday waxa ay calaamad u tahay in dhib iyo kurbo ku soo socotay ay kaga badbaadayso. *Allaahu aclam.*

Qisada sideed iyo labaatanaad

“Waxa aan ku riyooday, aniga oo meel maraya oo sadex nin ay iskugu kay tageen i dileenna oo aad ii garaaceen”. Riyadan waxa aanu ugu fashiray, in riyada dilku tahay khayr. Garaaca lagu garaacayna faa’iidadiisu la qiimo tahay kolba xanuunka uu dareemay. *Allaahu aclam.*

Qisada Sagaal iyo labaatanaad

“Waxa aan ku riyooday, nin aanu ilma-adeer nahay oo meherkii aannu ku kala noqonay isaga oo igu qoslaya”. Riyadan waxa aan ku fashiray, in ninkaasi uu ilaalin doono xidhiidhkii ehelnimo ee idinka dhaxeeyay, adiguna aad heli doonto nin kale oo wanaagsan ood isku faraxdaan. Bini aadamkuna waa in uu ogaadaa, in qadarkiisa aanu dhaafayn. Waxyaalo faro badan oo aynu u murugoonay, ayaynu mar danbe ogaanaa in khayr ku jiray in Alle ina dhaafiyo. *Allaahu aclam.*

CUTUBKA LABA IYO TOBNAAD

Dhacdooyinka riyoorkii la soo dhaafay

1. Madaxwaynihii 16^{aad} ee dalka Maraykanka Ibrahaam Linkon, oo la dilay isaga oo tiyaatar ka daawanaya riwaayad, ayaa mid ka mid ah ilaaladiisa u sheegay in saddex habeen oo isku xiga uu ku riyooday madaxweynuhu in la dilayo intii aanu tiyaatarka tegn. Ninkii ilaalada ahaa ayaa ka codsaday madaxwaynaha in uu habeenkaa ka baaqsado tegida tiyaatarka, balse madaxweynuhu uu ka diiday waxa uuna ku yidhi “*Xaaskayga ayaan u ballan qaaday in aan soo daawadsiiyo riwaayadda*”.
2. Habeen baa waxaa riyooday Al-iskandar Al-maqduuni (Dulqarnayn), waxa uuna ku riyooday isaga oo la jaasaya Ilaaha kaymaha ee Giriigii hore (Saa'taayar) ee sawirkiisuna yahay faraska. Dulqarnayn waxa uu u yeedhay ruux u fasira riyadan. Waxaana loogu fasiray in uu furi doono magaalo xeebeed kaymo badan leh, waanu furay sanadka dhammaadkiisii magaalo tilmaantaa leh.
3. Karl Yong, oo ah caalim nafsi reer Iswiisarland ah, ayaa habeen ku riyooday, Duufaan reer Yurub oo dhan qaadday oo qarqisay. Biyihii dufaankaasina soo gaadhay ilaa buuraha (Alb) ayaa markii danbe dhiig isku beddalay. Riyadan waxaa loogu fasiray, in dagaal soo socdo, mudo yar ka dibana dagaalkii kowaad ee adduunka ayaa dhacay.
4. Waxaa la helay cadaymo qoraal ah oo sheegaya in riyadii ugu horaysay ee la fasiro la hal-tabiyay 5000 sanno ka hor dhalashadii Ciise.

Riyoooyinka kala geddisan

Timirta: Waxaa lagu fasiraa nolosha wanaagsan, arsaaqda iyo awlaadda. Sida ku cad suuratu maryam aayaddeeda 25^{aad}

وَهَزِّي إِلَيْكَ بِجِذْعِ النَّخْلَةِ تُسَاقِطُ عَلَيْكَ رُطْبًا جَنِيًّا

Sidoo kale waxaa lagu fasiraa ku dedaalka soonka iyo cibaadada, sidii uu nebigu sheegay ee uu dhawr xabbo oo timir ah inuu afuri ku jiray, sida ku sugan saxiixu Abu Daa'uud. Sidoo kale waxaa lagu fasiraa timirta badbaado mashaakilka adduunyada ah oo ay sabab u tahay sadaqada timirtu. Sida xadiiskii Bukhaari iyo saxiixu Muslim ku sugnaa ee uu nabigu sheegay ee ahaa “*Qofkii kari karow jeex timir ah naarta iskaga badbaadi*”.

Oohinta lagu riyoodo: oohinta lagu riyoodo waxaa lagu fasiraa, cibaadada oo la badsado iyo iimaanka oo siyaada ayay calaamad u tahaysida ku cad suuratu Israa, aayaddeeda 109^{aad}

وَيَخْرُونَ لِلْأَذْقَانِ يَبْكُونَ وَيَزِيدُهُمْ خُشُوعًا

Sidoo kale waxaa lagu fasiraa baqasho Ilaahay laga baqanayo iyo salaadda oo lagu khushuucsan yahay. Sida abu Daauud soo weriyay in nebigu naxariis iyo nabad galyo korkiisa ah ahaatee uu ku qushuuci jiray salaadda, oo laabtiisu guux samsayn jirtay.

Ubaxa: waxaa lagu fasiraa nolosha wanaagsan iyo durriyadda wanaagsan.

Dugsiga (iskuulka): waxaa lagu fasiraa barashada cilmiga.

Dhagaxakabcada (xajar aswad): waxaa lagu fasiraa xajka, cimrada iyo sunnaha nabiga oo la raaco.

Dhiigga: waxaa lagu fasiraa iska ilaalinta xoolaha xaaraanta ah iyo xoolaha dhibaataada iyo fitmooyinka wata.

Qosolka iyo dhoola-caddaynta: waxaa lagu fasiraa bushaaro uur iyo awlaad badan. Sidoo kale waxaa lagu fasiraa iska ilaalinta dib u dhigidda tawbadda iyo guusha.

Badda: waxaa lagu fasiraabadbaado cadaw laga badbaadayo. Sidoo kale waxaa lagu fasiraa khayrka badan iyo arsaaqad waasac ah.

Qof ku riyooday isaga oo duulaya: Waxaa lagu fasiraa riyada noocan ah helitaanka wax uu higsanayo iyo sarrayn uu dadka ka sarraynayo.

Caanaha: Waxaa lagu fasiraa risqi xalaal ah oo barako leh iyo khayr soo kordhay. Sidoo kale waxaa lagu fasiraa aqoon diimeed.

Baranbarada: Waxaa lagu micneeyaa inay tahay cadaw insi ama jin ah iyo iska ilaalinta isha xaasidka.

Indhokuusha: Waxaa lagu micneeyaa guur, awlaad iyo wixii munaasibad ah ee farxad leh.

Gabadha uurka leh: Waxaa lagu fasiraa, guur iyo khilaaf lammaane iyo iska ilaalinta xuquuqda hooyada, waxa kale oo lagu micneeyaa dhimashada Aabbaha iyo gabadha uur kaleh oo asaydii qaadda.

Fargalka: Waxaa lagu fasiraa doonis ama guur, sidoo kale waxaa lagu micneeyaa iska ilaalinta khiyaamada.

Wabiyadda: Waxaa lagu fasiraa camalka wanaagsan iyo arsaaq ballaadhan.

Kabaha: Waxaa lagu fasiraa, guurka. Laakiin waxaa shardi u ah isaga oo fadhiya in uu xidho haddii isaga oo taagan uu xidho, waa macsi, dulmi iyo dhibaatooyin guurkii ku dhacaya. Haddii uu iska saaro kabo uu xidhan yahay waxaa lagu fasirayaa xash iyo cimarada, sidoo kale waxaa lagu fasiraa furitaan guur.

Qodaxda: Waxaa lagu fasiraa mashaakil iyo dembi ay ku xigi doonto tawbad wanaagsan.

Baqashada: Waxaa lagu fasiraa guusha, xasilloonidda iyo farxadda.

Jidhka gubtay: Waxaa lagu fasiraa, il xaasid u ah qurux jidhkaasi leeyahay darteed, sida ku cad Suuratu Qalam, aayaddeeda 51^{aad}

وَإِنْ يَكَادُ الَّذِينَ كَفَرُوا لَيُزْلِقُونَكَ بِأَبْصَارِهِمْ لَمَّا سَمِعُوا الذِّكْرَ وَيَقُولُونَ إِنَّهُ لَمَجْنُونٌ

Suuqa: Waxaa lagu turjumaa, xasanaadka, derejooyinka sar sare adduun iyo aakhira ba. iyo iska ilaalinta hadalka xaasidiinta.

Kibtaabka (quraanka): Waxaa lagu fasiraa, albaabbadii khayr ka iyo barakada oo qofka u furma.

Nabar madaxa ah: Waxaa lagu fasiraa, haddii shaqaale yahay waa dhibaato ka soo gaadhaysa shaqada ama dagaal heshiis ka dambeeyo.

Tukaha: Waxaa lagu fasiraa inuu yahay cadaw dulmi badan iyo khilaafaad.

Marti: Waxaa lagu fasiraa guur ama doonis.

Qaylada: Waxaa lagu fasiraa, tacab hammi iyo werwer.

Xabaalaha: Waxaa lagu fasiraa Iimaanka oo siyaada, sidoo kale waxaa lagu fasiraa wax wanaagsan adduunyo iyo aakhiraba.

Harraadka: Waxaa lagu micneeyaa tacab nafsi ah werwer, hammi iyo walbahaar.

Basal: Riyada dhexdeeda haddii aanu ku cunin ruuxa ku riyooda basashu waxaa lagu micneeyaa inay tahay khayr haddii uu cunana waxaa lagu fasiraa inay tahay shar.

Bustaanka: Waxaa lagu fasiraa inay tahay, xaaska, waladka iyo dhaqaalaha. Waana riyo wanaagsan.

Tallaagadda: Waxaa lagu fasiraa inay tahay arsaaqad ballaadhan.

Buurta: Haddii ruux ku riyoodo isaga oo ka soo dhacaya buur dheer oo uu rakadeeda saarnaa waxaa lagu fasiraa riyada noocaas ah inuu dembi gelayoama dhibaato jidhkiisa gaadhaysa. Sidoo kale waxaa lagu fasiraa inay tahay meel sare oo uu gaadhay inuu ka soo dhacayo, haddii uu ku riyoodo ruuxu isaga oo buurta fuulaya, waxaa riyadaa micnaheedu yahay inay tahay in uu gaadhayo, higsigiisu halkuu ahaa.

Janaasadda: Haddii uu ku riyoodo isaga oo janaasad tukanaya, waxaa lagu fasirayaa riyadiisaa inay tahay mid uu dad ku walaalaynayo. Haddii mar kale uu ku riyoodo isaga oo janaasaddiisii la sido, waxaa lagu fasiraa riyada tani ah inay tahay mid uu ku helayo mansab sare, oo uu dadka ku dhibayo.

Dawaarlaha: Waxaa lagu fasiraa dad heshiis dhex marayo.

Danbaska: Waxaa lagu fasiraa, hadalka badilka ah iyo camal aan faa'iido lahayn.

Waad riyootee runtu waa maxay?

Sabiibta: Sabiibta waxaa lagu fasiraa inay tahay, arsaqaad ballaadhan.

Sunta: Haddii ruux uu ku riyoodo isaga oo sun cabbaya, waxaa riyadiisaa loogu fasiraa inay tahay hami iyo walbahaar.

Caashaqa: Haddii ruux uu ku riyoodo isaga oo ruux caashaqsan waxaa riyadiisaa lagu fasiraa inay tahay hammi iyo murugo. Waayo caashaqu waa riyo xun.

Wanqasha: Waxaa lagu fasiraa inay tahay bushaarooyin soo socda ama qof safar ku maqnaa oo soo laabtay.

Hoteelka hurdada: Waxaa lagu fasiraa safarka.

Jannada: Qofkii jannada ku riyoodo een wali albaabka ka gelin.

Waxaa lagu fasirayaa inay tahay riyadaasi, mid khayr leh adduun iyo aakhiraba. Haddii markaa uu ku riyoodo isaga oo jannada dhex jooga, waxay riyadaasina noqonaysaa inay tahay qofka oo guul hela iyo diinta oo u dhammays tiranta.

Khalka: Waxaa lagu fasiraa inuu yahay xoolo, barako iyo nololdheer.

Biyaha Samsamka ah: Haddii ruux uu ku riyoodo isaga oo cabbaya biyaha samsamka ah waxaa riyadiisa lagu fasirayaa inuu yahay, mid ka bogsanaya xanuun hayay. Halka mid aanu xanuun haynnin haddii uu ku riyoodo ay u tahay, wanaag iyo badhaadhe.

Diinka: Waxaa lagu fasiraa cimri dherer. iyo dulqaad badnaan iyo u fiirsasho hawsha lagu jiro markaa

Qiyaamaha: Waxaa lagu fasiraa caddaaladda.

Siraadka qiyaamaha: Waxaa lagu fasiraa safarka,

Hasha, Qiyaamaha: (Daabba), waxaa lagu fasiraa dhibaatooyin iyo dagaallo.

Cadceedda oo dhinaca kale ka soo baxda: Waxaa lagu fasiraa dad safray soona laabanaya.

Naarta: Waxaa lagu fasiraa xanuunno, jeel iyo shiddo, dadka maalka lehna waxaa loogu fasiraa faqri.

Jannada: Waxaa lagu fasiraacaafimaad, xorriyad, sharaf iyo maal.

Dhuxul: Waxaa lagu fasiraa, ruux dhibaato badan, ama xoolo xaraan ah. Sidoo kale masuul cadaaladdarro sameeyay.

Saboolnimo: Waxa lagu fasiraa, ruux cunto badan helaya. Ruux saboola oo dad dawarsanaya waa mid duco badan.

- Qabri, Iil:** Waxa lagu fasiraa, Xabsi, Jeel.
- Quful:** Waxaa lagu fasiraa, nin amaano badan ama gabadh bikro ah.
- Mataga (hunqaaco):** Waxaa lagu fasiraa, Tawbadda ama dayn ruuxu iska bixinayo.
- Kabbaha:** Waxaa lagu fasiraa, guur
- Cadarka:** Waxaa lagu fasiraa, war farxad leh
- Cirka:** Waxaa lagu fasiraa, baryo la ajiibayo
- Kaadida:** Waxaa lagu fasiraa culays nafis ka danbeeyo
- Kacbada:** Waxaa lagu fasiraa, hooyada
- Dhagaxa madow ee xajka:** Waxaa lagu fasiraa, duco la aqbalayo ama xaj oo la tegayo
- Dhalmada:** Waxaa lagu fasiraa bushaaro farxad leh,
- Furintanka gabadh la furayo:** Waxaa lagu fasiraa hami lumaya iyo faraj soo socda, halka mar kale lagu fariso faqiirnimo.
- Waalida:** Waxaa lagu fasiraa, jacaylka ama xaraan la cunayo.
- Xaasidka:** Waxaa lagu fasiraa, munaafaqa iyo diradiraale, namiimiyaha.
- Toobinka:** Waxaa lagu fasiraa, heshiis, halka ruuxa xanuusanaya loogu fasiro shifo.
- Xummadda:** Waxaa lagu fasiraa, diin xumo iyo xanuun.
- Godka:** Waxaa lagu fasiraa, khiyaamo.
- Xidhiga:** Waxaa lagu fasiraa, ballan.
- Xinaha:** Waxa lagu fasiraa, guur.
- Ducada:** Waxaa lagu fasiraa, salaada.
- Jaaska:** Waxaa lagu fasiraa, masiibo.
- Sinada:** Waxaa lagu fasiraa, tuugnimo.
- Hargabka:** Waxaa lagu fasiraa, xanuun fudud.
- Qufaca:** Waxaa lagu fasiraa, dacwo iyo ashkato.
- Cadceeda:** Waxaa lagu fasiraa, aabbaha ama dahabka.
- Cirrada:** Waxaa lagu fasiraa, haybad ama daciifnimo.

Qodobbo si guud kaaga caawinaya fasiraada riyada

- Wax walba oo meel sare ka soo dhaca oo dhulka ku soo dhacaa waa riyo xun.
- Wax walba oo dusha u baxa haddii aanu xadkii loogu tala galay dhaafin waa wax wanaagsan.
- Wax walba oo dabi gubayo oo aan wax laga qaban karaynin waa masiibo, sidoo kale weelka jabaa waa riyo aan wanaagsanayn.
- Wax walba oo la xado, cidii xadayna aan la garanayn si ay u xaday, waa rajo wayn in uu waxaasi soo nodonayo.
- Wax walba oo siyaada, sida gacantoo dheeraata, carabka iyo lugta waxaa lagu fasiraa khayr u soo kordhay wax qabadka xubintaa.
- Wax walba oo siyaada ah oo xadkeeda dhaafaa waa shar iyo fadeexad.

- Shay kasta oo la xidho, habkii loogu tala galay aan loo xidhan, sida Cimaamada oo lugta lagu xidho, Sharabaadada oo gacanta la geliyo iyo Siliska oo bawdada lagu xidho, waa riyo aan wanaagsanayn.
- Shaykasta oo wax lagu kaydiyo sida sanduuqa, khasnada, iyo bacda dhammidood waxaa lagu fasiraa qalbiga.
- Wax walba oo is dhexgala oo isku milma, waxaa lagu fasiraa wadaagid, is gargaarid iyo meher.
- Ruux bukaan ah oo gurigiisii laga soo saaray isaga oo aamusan waxa lagu fasiraa, in ay geeri calaamad u tahay. Halka ruuxa kale ee isaga oo xanuusanaya laga soo saaray gurigiisa isaga oo hadlaya oo macsalaamaynaya reerkiisa waxaa lagu fasiraa nolol.
- Ka bixid laga baxaya albaabada cidhiidhiga ah, waxa ay calaamad u tahay, ka badbaadid culays saarnaa ruuxa iyo tawbad wanaagsan.
- Safarka iyo socdaalka ruuxa, marka la fasirayo riyadaasi waxa la eegayaa halka uu ka tagay xaladdeeda iyo halka kuu tagay.

- Geeridu waa toobad, waayo dhimshada Ilaahay ayaa loogu noqonayaa.
- Ruux ruux kale hilibkii cunaya, waxaa lagu fasiraa xanta siday ayaadu sheegtay.
- Furaha waxaa lagu fasirayaa guul iyo macaash.
- Xanuunka waxaa lagu fasirayaa, nifaaq, shaki iyo istusnimo.
- Geedka Timirta waxaa lagu fasiraa, ruuxa muslimka ah iyo kalmada wanaagsan.

- Dharka sida shaadhka waxaa lagu fasiraa, diinta, ha dheeraado ama ha gaabto sidoo kale nadiif ha ahaado ama uskaga ha lahaadee, siduu nebigu shaadhka igu fasiray diinta. Labadooda waxa ka dhexeeyaa waa asturaad ruuxa ay asturayaan.
- Caanaha waxaa lagu fasiraa, dhaqanka wanaagsan.
- Qodaalka waxaa lagu fasiraa, camalka wanaagsan.
- Roobka waxaa lagu fasiraa, Raxmad, Cilmi iyo Quraanka.
- Birta waxaa lagu fasiraa, Xooga iyo Guusha.
- Uduga wanaagsan waxaa lagu fasiraa, qawlka wanaagsan iyo amaanta. Sidoo kale urta xun waxaa lagu fasiraa, hadal xun iyo aflagaadada.
- Shinida waxaa lagu fasiraa, camal wanaagsan iyo soorta fiican.
- Diigga waxaa lagu fasiraa, nin hanwayn oo han sare leh oo cod dheer.
- Maska waxaa lagu fasiraa, cadaw ama ruuxa halawsan.

Faa'iidooyinka iyo midhaha riyada

Riyadu waa qayb ka mid ah qaybka, sidaa darteed la inooma oggolla umana baahnin in aynu u tagno, Sixirroolayaasha iyo faaliyayaasha.

1. Waa bishaaro Ilaahay u soo dirayo qofka riyooday, si uu ugu sugo xagga uu ku taagan yahay. Ama uu uga fogeeyo shar uu cidhibta

- saaray ama uu ku taagan yahay. Si uu uga soo noqdo oo uu u toobbad keeno.
2. Riyadu waxay noqon kartaa digniin. Nin taabiciyiinta ka mid ah oo salaatu laylka tukan jiray ayaa muddo ka dib ka seexday” dabeetana wuxuu ku riyooday isaga oo madaxiisa la dul taagan yahay, oo lagu leeyahay “*Kac oo Ilaahay Xus, Ilaahay ha ku xusee.*” Dabadeedna hurdadii ayuu ka kacay salaatu laylkii ayuuna ku noqday.
 3. Waxay sabab riyadu u noqon kartaa cilmiga iyo Alifaadda. Sidii riyadii Bukhaari ee uu ku riyooday inuu arkay nabiga oo uu dul taagan yahay isaga oo jiifa dukhsina ka babinaya. Dabeetana wuxuu u taeay culimada cilmigani fasira riyoooyinka. Markii ay u micneeyeen waxay ugu turjumeen riyada inuu nabiga beenta ka baabiiyo. Riyadaa iyo fasiraaddeeda ayaa igu kalliftay ayuu yidhi inaan qoro, kitaabkayga (Al-Jaamicu saxiix) Saxiixu Bukhaari.
 4. Waxay sabab u noqon kartaa riyadu gacan furnaansho iyo sadaqo. Sidii xadiiskii Imaamu Axmed soo weriyay, ee Caashi tidhi in nabigu uu yidhi “*Waxaan ku riyooday Cabdiraxmaan Ibnu Cawf*” oo jannada galay isaga oo gur’guuranaya”. Arrintii ayaa Cabdiraxmaan Ibnu Cawf gaadhay. Ganacsigiisuna toddoba boqol oo awr ayuu kor u dhaafay, oo ka yimi Shaam (Suuriya). Dabeetana Caasha ayuu ka waraystay riyadii nebiga Csw Wayna uga waran tahay, markaasu u ku yidhi Cabdiraxmaan Ibnu Cawf “*Waxaan markaati kaaga dhigayaa Caashay in ganacsigaygaa oo dhan aan Ilaahay dartii u sadaqaystay*” ka dib waa kii ka mid noqday tobankii jannada loogu bishaareeyay.
 5. Riyadu waxay sabab u noqon kartaa inay qalbi hooyo qaboojiso. Sidii ku dhacday Bukhaari hooyadii, waxaynu sheekada ku haynaa in Bukhaari isaga oo yar uu indho belay. Kaddib Hooyadii waxay ku riyootay Nabi Ibraahim oo ku leh “*Oohintaada badan iyo ducadaada darteed ayuu Ilaahay*

inankaagii indhihiisii u soo celiyay. Dabeetana markii uu waagu baryay, waxaa la arkay Bukhaari oo wax arkaya.

Sababta riyooyinka xun xun

1. Waxaa ka mid ah nooca cuntada iyo hurdada intaanu qofku seexan cuntada uu cunayaa haddii ay tahay cunto kulul, ama xawaash iyo basbaas badan, ama Cuntoculus, nooca cuntooyinkaasi qayb bay ka qaataan asbaabta riyooyinka xun xun.
2. Cabbitaanka khamriga iyo isticmaalka daroogadu waxay qayb libaax ka qaadataa riyada nooceeda xun.
3. Qaadashada dawooyinka loo isticmaalo isku buuqa maskaxda.
4. Xanuunka, riyada qof xanuusanaya iyo mid caafimaad qaba isku mid ma aha.
5. Tacabka iyo daalka.
6. Dareenka murugada.
7. Hurda yaraanta.

Wax yaabaha cilmigga cusub ogaaday

1. In qofku boqolkiiba sagaashan riyadiisa uu illaawo marka uu tooso toban daqiiqo ka bacdi.
2. Isku celcelis qofku wuxuu riyoodaa 6 sanadood. Waa qofka 60-65 sano noolaada.
3. Qofku haddii uu khuuriyo ma riyoodo. Haddii uu riyo ku jiray oo khuuro soo gashona way joogsataa riyadu.
4. Carruurta 3 jir ka yari ma riyooto. Kuwa riyoodaana riyooyin xun xun bay ku riyoodan ilaa inta toddoba iyo siddeed ka gaadhayaan.
5. Qofku wuxuu ku riyoodaa oo kaliya dadka uu yaqaanno ama uu arko. Waxaana dhici karta inuu ku riyoodo yaraan dadkuu arkay.
6. Qofku wuxuu riyoodaa habeenka kaliya afar ilaa toddoba riyo.
7. Waxaa la caddeeyay cuntada jiiska ahi inay qofka ka fogayso hurdada xun kana caawiso inuu seexo hurdo fiican.

8. Riyooyinka ugu badani waa riyooyinka xun, xun sida baqashada iyo cadhada.
9. Xayawaanka oo dhammi uu riyoodaa iyo in boqolkiiba sagaashan riyooyinku aanay fasiraadba lahayn.
10. Daraasadi waxay caddaysay in boqolkiiba laba iyo toban, dadkii riyadoodu ay tahay Caddaan iyo Madaw, halka dadkii boqolkiiba siddeed iyo siddeetan ay tahay midab kale

Ku saabsan qoraaga



Waad riyootee runtu waa maxay?

Dr. Sheekh Siciid Maxamed Faarax Jire, waxa uu ku dhashay magaalada Hargaysa. Isaga oo ku barbaaray, waxbarashadii aasaasiga ahaydna ka bilaabay dalka Sucuudiga. Halkaa oo uu ku dhammaystay dugsigii hoose/dhexe ilaa sare. Heerka koowaad ee aqoonta sare ee jaamacadda waxa uu ku qaatay dalka Masar, isaga oo diyaariyay aqoonta beeraha (Agriculture), jaamacadda ku taalla dalka Masar magaalada Al-iskanderiya. Heerkiisii labaad (Master) waxa uu ku soo qaatay dalka Suudaan, magaalada Ummu-durmaan, isaga oo diyaariyay Shareecada iyo sharciga (Sharia and Law). Master-ta labaad waxa uu mar labaad ku diyaariyay dalka Ingiriiska, isaga oo diyaariyay Islamic education, kuna magaalada Gloucestershire. Heerka saddexaad ee Phd-da waxa uu ku diyaariyay dalka Lubnaan, magaalada Bayruut.

Dr. Siciid, waxa uu gacan weyn ka geystay dhiirrigelinta iyo dhismaha masaajiddo waaweyn oo laga dhisay qaaradda Yurub, kuwaas oo ay ku baxeen malaayiin doolar. Waxa kale oo uu soo saare ka ahaa, barnaamij wacyigelineed oo lagu caawinayo dhalinta tahriibta ee ku tabaalaysan dalalka shisheeye. Iyada oo laga sii dayn jiray, muuq-baahiyaha qaranka Soomaaliland. Waxa kale oo uu u ololayn jiray hooyooyinka qurbaha lagaga qaato ubadkooda, si loogu soo celiyo. Sheekhu waxa uu soo saare ka ahaa barnaamijka buuggani ka dhashay ee "*Waad riyootee, runtu waa maxay?*", barnaamijkaa oo ka bixi jiray, tv-ga Universal. Tv-gaa oo sheekhu ka baahiyo barnaamijyo sannadle ah. Dr. Siciid, waxa uu xubin firfircoon ka ahaa, ka soo qaybgalka iyo agaasinka kullamada islaamiga ah ee jaaliyaddaha Soomaalida ee ka dhaca Yurub iyo Ameerika. Hadda sheekhu waxa uu guddoomiye ka yahay hay'adda diiwaanka Sakada iyo samafalka qaranka ee Soomaaliland.

Tuse

aammins, 25, 27, 39, 41, 61, 103
aayaddeeda, 23, 97, 98, 99, 100
abuuray, 15, 93
adduunyada, 41, 68
afaf, 15
Afeef, 14
afkeenna, 15, 18
Alle, 33, 43, 65, 89, 91, 93, 95, 111, 115
Anas, 16, 22, 29, 34, 106
Anfaal, 23
Axmed, 60, 68, 103, 105, 124
been, 36, 89, 91
Beenta, 36
Bukhaari, 15, 16, 29, 30, 32, 36, 37, 41, 58, 59, 62, 104, 124
Bushaaroyinkii, 17
buuggan, 15
Caa'ishi, 35
caafimaadka, 44, 66
Cabbaas, 17, 36, 106
Calayhi salaam, 23, 38, 91
Carabta, 22, 64
Cilmi, 24, 26, 27, 49, 123
Cilmiga, 15, 17
culimadii, 18, 41
Culimadu, 17, 26, 29, 41
Culimo, 27
dadka, 15, 17, 18, 23, 27, 38, 40, 46, 47, 52, 53, 54, 64, 66, 84,

Telegram: - Same Wada

87, 89, 91, 93, 95, 96, 101, 105, 108, 112, 118, 119, 120, 125
dhacdooyin, 15, 26, 39
dhiig, 16, 116
diini, 42
diinta, 16, 42, 47, 51, 53, 54, 59, 67, 88, 93, 95, 96, 104, 115, 120, 123
Diinta, 16, 26
diiwaankani, 14
Eebbe, 15
Falaasafadii, 22
fasiraadda, 15, 17, 22, 24, 38, 41, 42, 43, 45, 49, 53, 56, 62, 64, 65, 97, 98, 99, 100, 101, 103, 106
fasiraaddeedu, 35, 44, 51, 111
fasirayay, 17
fasiri, 18, 35, 92, 110
fasirno, 37, 61
Fatwada, 17
Fekerka, 25, 26, 39
Fekerkanii, 26
fekerkanii, 25
Furqaan, 23
Gaalada, 37
Gabadh, 63, 108, 109, 110
Giriiggu, 52
hammi, 38, 52, 58, 68, 69, 90, 99, 119, 120
hooyada, 83, 97, 118, 121

Hooyo, 25
hurdo, 29, 39, 104, 126
Ibnu, 17, 22, 23, 29, 30, 32, 34, 36,
41, 43, 45, 53, 59, 62, 63, 65,
94, 95, 96, 103, 104, 105, 106,
107, 124
Ilaahay, 15, 16, 23, 29, 30, 32, 33,
34, 35, 36, 38, 41, 43, 45, 46,
48, 52, 56, 58, 59, 63, 65, 66,
87, 88, 89, 91, 92, 93, 94, 95,
96, 97, 99, 100, 101, 103, 104,
106, 107, 109, 110, 114, 115,
117, 123, 124, 125
Ilaahayna, 38, 43
Injiil, 23
islaamka, 26, 104
kariimka, 23
khayr, 29, 35, 37, 38, 42, 43, 50,
51, 52, 55, 83, 92, 95, 100, 101,
106, 111, 115, 118, 119, 120,
122
Kiristan, 51
maahmaahday, 14
magacyada, 41, 98
Maxamed, 1, 22, 23, 43, 93
Mu'allifiintii, 22
munaafaqiinta, 54, 95
munaafaquna, 54
naxariis, 17, 29, 33, 96, 104, 105,
117
nebigu, 15, 17, 26, 29, 30, 33, 35,
36, 37, 42, 58, 62, 104, 111,
117, 123
Nebiyada, 22, 36, 91
Qoraa, 23

Telegram:- Same Wade

Quraanka, 23, 61, 88, 123
quruumo, 25
riyada wanaagsan, 30, 31, 32, 35
Riyada xun, 32, 35
riyadiisu, 16, 38, 44, 45, 83
Riyo, 30, 31, 35, 38, 39, 42, 55, 61
riyooday, 17, 26, 34, 38, 39, 41,
43, 45, 47, 48, 49, 50, 51, 54,
59, 62, 63, 68, 94, 95, 97, 100,
104, 105, 107, 108, 109, 110,
111, 112, 113, 114, 115, 116,
118, 123, 124
riyooyinka, 15, 16, 17, 22, 23, 24,
25, 27, 33, 38, 39, 42, 43, 45,
48, 51, 53, 56, 62, 65, 91, 94,
98, 100, 101, 106, 124, 125, 126
Riyooyinka, 23, 24, 65, 67, 94, 98,
100, 117, 126
Riyooyinkana, 16
riyooyinku, 15, 17, 18, 24, 25, 26,
30, 41, 49, 97, 103, 126
runtu, 1, 15
Ruux, 33, 42, 120, 122, 123
Saahidiintii, 22
Saalixiinta, 37
salaadda, 26, 29, 36, 89, 90, 93,
117
sawir, 42
Saxaabadii, 22, 58, 104
saxeexu, 41
seexan, 26, 36, 38, 125
sharxaya, 25
shaydaanka, 29, 30, 31, 34, 36, 61,
84, 86, 98, 99
shaydaankana, 33, 37, 114

Waad riyootee runtu waa maxay?

Sheekh, 1, 17, 50
Siriin, 45, 63, 65, 106, 107
Soomaalida, 14, 108
suuratu, 17, 23, 97, 98, 99, 100,
108
Taabiciyiintii, 22
Tawraad, 23
waddamada, 44
Xaakim, 34
xaaraanta, 51, 117

xadiiskii, 15, 16, 17, 26, 29, 30, 32,
33, 34, 36, 41, 58, 59, 62, 68,
84, 103, 114, 124
Xadiiskii, 33, 36, 68, 104, 105
Xanuunkan, 39
xumo, 39, 121
Yacquub, 22, 47, 91
Yaxye, 23, 92
Yong, 25, 116
Yurub, 44, 116
Yuusuf, 17, 22, 23, 33, 46, 47, 62,
86, 91, 97, 98, 99, 100, 103

Tixraaca buugga

- *Quraanka kariimka*
- *Al-Imaamu Al Bukhaari, Saxiixu Al-Bukhaari,*
- *Al-Imaamu Muslim, Saxiixu Muslim,*
- *Sheekh Al-Albaani, Saxiixu Sunan Abu Daa'uud,*
- *Sheekh Al-Albaani, Saxiixu jaamicu Al-Tarmidii,*
- *Al-Imaamu Axmed, Musnad Al-Imaam Axmed,*
- *Al-Xaakim, Al-Mustadrar,*
- *Sheekh Al-Albaani, Saxiixu Al-Nisaa'ii,*
- *Ibnu Xajar, Fatax Al baari,*
- *Saxiixu Sunan Ibnu Maaja,*
- *Cabdimalik Ibnu Haashim, Siraat Ibnu Hishaam,*
- *Inbu Taymiya, Majmuucu Fataawaa,*
- *Ibnu Kasiir, Al-bidaaya Wa-Nihaayaa,*
- *Ibnu Siiriin, Muntakhab Alkalaam Fii Tafsiir Al-Axlaam,*
- *Maxamed Ibraahin Al-canaam, Al Maclam calaa Xuruuf Al Mucjam Fii Tacbiir Al Axlaam,*
- *Dr. Fahad Al Cusaymii, Tacbiir Al ruyaa,*
- *Naadir Saynudiin, Al-ru'yaa Wal Axlaam,*
- *Dr. Khaliid Cali Al Cambarii, Al-Ishaara Fii cilm Al-Cibaara,*
- *Dr. khaliid Cali Al-Cambarii, Qamuus Tafsiir Al-Axlaam,*
- *Al Shaykh Xamuud Al-Tuway Jarii, Al-ruyaa,*
- *Ibnu Qumayba, Tacbiiru ruyaa,*
- *Cabdi Al-Muncim Al-Haasimii, Ruyaa Al-anbiyaa Wa Saalixiin,*
- *Dr. Maxamed Qunaym, 200 Ruyaa Wa ruyaa,*
- *Ibnu Siriin Iyo Al Nabulsii, Tafsiir Al axlaam Wa tacdiiru,*
- *Sheekh Fahad Al-cutaybii, Mukhtasar al-kalaam fii tacbiir al ru'aa wal axlaam,*
- *Sheekh Taamir al caamir, maw sucat tafsiir al ru'aa wal axlaam,*
- *Dr. Cabdi Casiis Al-siir, kayfaa tu-fasiro axlaamak,*

- Abu Islaam Axmed Ibnu Calii, Al ru'aah Al nababiyaah,
- Abubakar Mb Axamed Al-axsaa'ii, Jaamic Tafaasiir Al-axlaam,
- Ibnu Qayim Al-jawsiiyah, Saadil Macaad fii hadi khayr Al-cibaad,
- Maxamed Ibnu Cisaa Al-tarmadii, Al-shamaa'il Al-muxamadiyah,
- Abubakar Cabdulah Al-qurashii Al-Baqdaadii, Al-Manaa Maat,
- Axmed Suldaan Ibnu Suruur, Qawaacid Tafsiir Al-axlaam,
- Axmed Ibnu Maxamed Ibnu Cabdirabuuh, Al Ciqid Al Fariid,
- Dr. Maxamed Ibnu Fahad Al wadcaan, Dawaabid Al Ru'yaah,
- Cabdiwahaab Al-Najaar, Qisasu Ambiyaa,
- Maxamed Axmed Jaad Al-Maw laa, Qisasu Al-Qur'aan,

Waad riyootee runtu waa maxay?

Baalqor

A series of horizontal lines for writing. The top line is wavy, while the subsequent lines are straight and parallel, providing a space for a handwritten response to the question above.

Waad riyootee runtu waa maxay?

A series of approximately 25 horizontal wavy lines, evenly spaced, intended for writing. The lines are black and curve slightly upwards in the middle of each line.

Waad riyootee runtu waa maxay?

A series of approximately 25 horizontal lines, slightly curved at the top, provided for writing an answer to the question above.

